Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya
Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta
**XARUNTA HORUMARINTA MANAAHIJTA**
TEL. 21267
S.B. 7163

جمهورية الصومال الديمقراطية
وزارة التربية والتعليم
مركز تطوير المناهج
تليفون ٢١٢٦٧

# TAARIIKH

## FASALKA LABAAD

## 2



**Dugsiga Sare**

41

# T A A R I I K H
# DUGSIGA SARE
## Fasalka Labaad
## 2

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
**XAFIISKA MANAAHIJTA**
MUQDISHO — 1983

# HORDHAC

Buuggan waxa loogu talo galay Fasalka 2aad ee Dugsiyada Sare. Casharrada buuggani waxay koobayaan Taariikhda Afrika, laga bilaabo waayihii ka horreeyey la kulankii reer Yurub ilaa dhalashadii gobannimadooda. Afarta cutub ee u horreeyaa waxay u gogol dhigayaan tusmada cutubyada ka dambeeya. Cutubyada kale waxay tafsiir gaar ah ka bixinayaan Afrika sidii loogu soo duulay, talisyo gumeysi looga sugtay, weerarradii, iyo siyaasadihii gumeystayaasha, labadii dagaal-weyne ee adduunka iyo dhalashadii dhaqdhaqaaqyo gobannimadoon.

Waxaa mahad gaar ah loo naqayaa qorayaasha buugga oo kala ah: Cabdirax-maan Carte Qaalib, Caasha Xaaji Xaashi, Aamina Xaaji Aadan, Maxamed Cali Car-raale, Cabdulqaadir Maxamed iyo Cabdulqaadir X. Muumin. Waxa kale oo loo mahadnaqayaa Maxamed Diiriye Cabdi iyo Axmed Saciid Axmed Saciid, oo buug-gab dib u saxay, mar labaadna daabacaadda u diyaariyey.

Waxaa Mahad aan la illaabi karin mudan W akaaladda Madbacadda Qaranka, oo xil gaar ah iska saarta soo saarista iyo daabacaadda buugaagta, la'aanteedna aanay suuro gal noqoteen in ay ardayda Soomaaliyeed helaan buugaag ay akhristaan, waxna ka faa'iideystaan.

*Maamulaha Xafiiska Manaahijta*
*Xasan Daahir Obsiiye*


# TUSMADA


Toobiyaha Bariga iyo Sahmiskii Reer Yurub ............................ 5
Gaddiska Dadka ............................................................ 8
Yurub Qarnigii 18aad ..................................................... 13
Afrika gumeysiga hortii ................................................... 20
Afrika iyo duullaankii gumeysatada ................................. 28
Sahamiskii Afrika gudaheeda iyo sababihii ......................... 41
Diinta Kiristaanka ........................................................ 46
Siyaasadihii dawladaha gumeysiga iyo maamulkoodii .............. 50
Dagaalkii Koowaad ee adduunka ........................................ 67
Afrika intii labada dagaal u dhaxaysay .............................. 73
Waddaniyadda .............................................................. 77

## TOOBIYAHA BARIGA IYO SAHAMISKII REER YURUB

Qarnigii 11aad dhammaadkiisii xiriirka ka dhexeeyay Kiristaanka Roomaanka, Kiristaanka Giriigga iyo Muslinku aad buu u qasmay. 1095, gaaladu waxay ku dhawaaqday dagaal inay ku qaaddo dadka muslinka ah, si ay laanqayrta uga taagaan magaalada Jerusalaam. Dagaalladaasi waxa lagu magacaabay dagaalladii Jihaadka ama (Kurusayd). Imberadooriyaddii Bisantan dagaalkay soo qaadday waxay u qabatay mid muslinka lagula jihaadaayo, magaca Ilaahayna kor loogu qaaday. Mar waxaabay qabsan gaadheen Juresalaam, hase ahaatee, muslinka ayaa jebiyey. Odayga Diinta Kiristaanka ee la oran jirey Boob Urban II, ayaa 1095 ku dhawaaqay Kurusaydkii koowaad. Waxa uu dadkii Kiristaanka ahaa ugu ballanqaaday danbidhaaf, shahiidnimo, hanti iyo khayraad. Kumanyaal qof ayaa u soo banbaxay dagaal, laanqayrna ku toshay dharkoodii. Dagaalladu waxay socdeen muddo (200) laba boqol sano kor u dhaaftay. Gaaladu duullaan ayay ku qaadeen muslinkii degganaa Suuriya, Falastiin, Masar, Afrikada Woqooyi iyo dalka Boortuqiiska, iyaga oo ay hoggaaminayaan boqorro iyo imberadoorro, mararka qaarkoodna rag sare (nobles). Ciidammada laanqayrtu marmar ayay guuleysteen, hase ahaatee, inta badan waa ay ku hooban jireen dagaallada. Ciidammadu si is-daba joog ah ayay ugu duuli jireen dalalka muslinka. Sidaa awgeed, ayaa dagaalladaasi waxaa loo yiqiin JIhaadkii koowaad ama (Kurusaydkii koowaad), kan labaad iyo ilaa kan siddeedaad. 1099kii laanqayr sidayaashii waxay qabsadeen Jerusalaam, halkaas oo ay Muslin iyo Yuhuudba ku xasuuqeen. 1244 ayaa Boqorka Faransiisku weerar cusub furay, hase ahaatee, isaga laftiisa ayaa muslinku gacanta ku dhigeen, 1250kii, markaas oo Mamluukisku xukunka qabteen. Mamluukiska ayaa ciidammadii laanqayrta wixii sii dhaqdhaqaaqay jebiyey kaddib markii ay ka guuleysteen «Mongols» oo qabsaday Baqdaad 1258kii, isla markaas Suuriyana ka saaray 1260kii. Mamluukiska ayaa cirib-tiray ciidammadii Kiristaanka ka joogay Bariga Dhexe iyo waqooyiga Afrika. Tripoli iyo Akra waxay Mamluukusku qudha kaga jareen 60.000 oo Kiristaan ah.

Yurub xiriir ay adduunka la yeelatay, wuxuu ahaa mid ku yimid dagaalladaa «Kurusayd». Waxaana lagu tilmaamaa in uu ahaa dhaqdhaqaaq ay Yurub ku raadsanaysay gumeysi, oo hor kacaayey Baadi-doonkii «Kolombas» iyo sahamiyayaashii kale ee u xusul duubay in ay gaaraan Bariga Fog.




Dhulalkii ay barteen Bad-maaxyadii Boortuqiiska
Qarnigii 15aad ilaa Qarnigii 16aad

Inkasta oo xooggii Imberadooriyadda Turkigu korodhay, Yurubta Badda Cadna hoos timid, Taliskii Cusmaaniyiinta, Isbeyn iyo Boortuqaal labaduba waxay ka hoos baxeen xukunkii Islaamka. 1494kii, Muslinkii Isbeyn degganaa waxa lagu soo rogay in ay Kiristaan noqdaan ama dalka ka tagaan.

Dhinaca kale hadaan ka fiirinno Taliska Cusmaaniyiintu wuxuu reer Yurub ka xiray jidka gaddiska ee Bariga Dhexe, misana Boortuqiiska iyo Isbeyn waxa u suuro gashay in ay dunida weji cusub u yeelaan, kaddib markay hormariyeen qalabka badmaaxa iyo maraakiibta dhismahoodaba. Boqorka Boortuqiisku isaga oo raba in uu ganacsiga iyo xoogga dalkiisaba kor u qaado, wuxuu qabanqaabiyey sahanno, qalabkii ugu hormarsanaa waqtigaasna maraakiibta ayuu uga adeejiyey. Hortiiba waxay tageen Asuures, Madeira iyo Kanarieska.

1488kii Diaz, wuxuu gaaray Koonfurta Afrika, 1497kiina Vasco de Gama ayaaba Hindiya ku degay. 1500kii Pedro Cabral, isaguna Baraasiil xeebteeda ayuu cagaha dhigay. 1492kii Columbus oo u adeegaaya dawladda Isbaanishka ayaa daaha ka rogay dunida cusub, kaddib markii uu ku degay Jasiiradda «Bahaman» — una baxshay San Salvador. Kaddib markuu Columbus ku soo noqday Isbayn, isaga oo aqoonsan in uu gaaray Hindiya waxay Dawladda Isbaanishku weydiisatay odayga diinta kiristaankla in la aqoonsado dalalka Isbaanishku soo arkooday. Bishii Mey 4dii 1493kii Pope Alexandar adduunka ayuu u kala baray Boortuqiiska iyo Isbaanishka. Wixii xagga Galbeed ka xiga Asures iyo Keyb Feerd (Cape Verde), Isbaanishka ayaa lagu qoray, wixii Bariga ka xigana Boortuqiiska.

Hantidii iyo khayraadkii ay Boortuqiisku ka heleen ganacsiga Bariga ayaa hunguri gashay, laab-qaadayna Dawladihii Reer Yurub intoodii kale. Sidaa darteedna waxay ku dhaqaaqeen baadi-doon ay u galeen marin lagu gaaro Bariga fog. Ingiriiska, Faransiiska, iyo Dhajku waxay fureen Qarnigii 16aad sahamis ay ku raadinayaan Bariga fog, si aan u kas ahayn waxay ugu turunturroodeen dunida cusub, halkaas oo ay ku abuurteen gumeysi, ku dulnoolaasho iyo addoonsi. Qarnigaasi wuxuu la magab baxay (Qarnigii sahamiska), hase ahaatee, dunida inteeda kale wuxuu u ahaa qarnigii la kulanka reer Yurub ee ku aadayey dhac, boob, dil iyo addoonsi. Kor iyo salba reer Yurub sahamiska waxay uga jeedeen in ay ku hantiyaan dahab iyo khayraad. Reer Yurub himiladooda sahamiska waxa si cad uga hadlay nin Ingiriis ah oo la oran jirey «Richard Hakluyt» oo yiri : «Waxa innala gudboon in aan fiirinno socdaalka Isbaanishka iyo Boortuqiiska, oo labaduba ah dalal sabool ah, hase ahaatee, kaddib markay sahamis ku dhaqaaqeen, duni cusubna daaha ka rogeen, maynaan maqal ma aynuna arag «Qawlaysato badda maaxda» oo labada dal ka tirsan. Innaga iyo Faransiiskuna waxaan hoos ugu dhacnay dhaca iyo qawlaysadka badaha. Taasi waxa suuro geliyey iyaga oo dadkooda shaqooyin siiyey, waliba dad kale oo u adeega iyagu maanta u baahan. Dalkeenna iyo kan Faransiiska hadaad eegtid, waxaad arkaysaa dadkii oo tiradoodu korodhay, ninba ninka kale laga yaabo in uu cuno. Inta aan shaqo hayn ayaa ciidda ka badan, doonayana in ay dalka qasaan, xadaan, sidaa darteedna jeelasha ayaa maanta dadkeennii ka buuxaan.

Haddii la qabanqaabiyo sahamis, waxa suurogal noqonaya in dadkeenna la geeyo dhulalka cusub ee la helo, laguna shaqeeyo, si ay u soo saaraan loox maraakiibta lagu dhiso, amase macdanta, dahabka, lacagta, maarta,naxaasta iyo biro lagu qodo, amase lagu falo beero lagu biqliyo sonkorta, sida ay Boortuqiisku ka sameeyeen Madeiria. Waxyaabo badan oo khayraad laga heli karo ayay soo saari karaan dadka maanta magaalooyinkeenna daadsani. Taas waxa soo raacaysa, in markaas Iglan nafteedfu ay noqon doonto xarun ganacsi iyo shaqo ay helaan dadkeennu, magaalooyinka dumayna dhismaan».

Niyo sifahaa leh ayay Yurub la baraarugtay qarnigii 15aad, kii lix iyo tobnaadna ay si hor leh u hirgelisay. Hase ahaatee, dadkoodii oo qudha kumay adeegsan si ay u hanti abuurtaan. Hortiiba waxay hoggaanka u qabteen ganacsi aan adduunku horay u arag, kaas oo ku aadayey ganacsigii dadka iyo ciribtiriddii dadka dhaladka lahaa ee degganaa Ameerikada Waqooyi. Socdaalladii ay sahamisyaashii dunida cusub ko ogaadeen waxay reer Yurub ku baabi'iyeen ilbixii dadka Hindida ee Ameerikada Koonfureed ee ay ka mid ahaayeen Astek iyo Inkas. Dadkii Hindida ahaana waxay ku le'deen addoonsigii Isbaanishka, dhaqankoodii iyo ahaanshahoodii, iyo afkoodiina wuxuu isu beddelay Isbaanish. Afrikana dhibaato laxaad leh ayaa ka soo gaadhay kulankii reer Yurub. Ilbixii Gaana, Maali, Songohaay, Ife, Mutapa, Simbaabwe iyo magaalo qarannadii Muqdisho, Kilwa, Sofaala iyo Malindi dhammaantood waxay isu rogeen xarumo laga ganacsado dadka reer Afrika. Maamulkii habaysnaa ee Maansa Musa iyo Askiya Maxamedna waxa beddelay naxariis-darradii ganacsatada iyo iimaan-darro qaadday madaxdii Afrikaanka ahaa.

## GADDISKA DADKA

Waxyaabaha la yaabka leh ayay ka mid tahay in Yurub markay baraarugtay qarnigii 15aad badahana ka gudubtay, ay in ka yar boqol sano ku qabato hoggaanka ganacsi weji cusub leh kuna aadda dhoofinta dadka Afrika. Taariikhda sugiddeeda wax badan ayaa dood laga jeedshay, sababihii iyo ciribtirkii ganacsiga dadka.

Haddase raacdayn dhowaal ihi waxay inoo suuro gelinaysaa inaan tirno sheeko baraleydii, ka tagtay Yurub qarnigii 18aad kuna aadaysay ganacsiga dadka, oo midab nacayb yasid ihi ku dheehnaa. Haddiiba reer Yurub fidsheen in ganacsiga dadka reer Afrika ay ugu wacnayd, dib-u-dhaca iyo hebadnimo dabiici ihi, imminka way caddaatay inaan Afrikaanku labadaa midna ku sifoobin. Ameerika waxa si joogta ah uga holcaayey gadoodyo Afrikaanku ku diidsanaayeen addoonsiga. Dadka madow ee la geeyey Seynt Dominiko (imminkana ah Heyti), waxay ahaayeen bulshadii ugu horreysay taariikhda ee qallibta xukunka gumeysiga, kuwa kale oo sidaas u guuleystayna waa ay jireen. Beelo ka baxsaday addoonsiga, fallaago ahaan ayey u degi jireen Koonfurta Maraykanka iyo Jasiiradaha Kaaribiyaanka. Dhowr ka mid ah beelahaa iyo bulshooyinkaa ayaa madaxbannaani sugtay ilaa iyo intii la joojiyey ganacsigii dadka.

## BILOWGII ADDOONSIGA DADKA MADOW

Raacdayn kale waxay gacan innagu siinaysaa inaan garanno sababaha ay Afrikaanku u noqdeen kuwa ugu badan dadkii la addoonsaday. Koonfurta Yurub addoonsigu waa uu jiray facii dhexe, waxaanu ku ekaa ilaa iyo qarnigii 18aad meelaha qaarkood. Waqooyiga Yurubna addoonsigii Roomaaniyiintu wuxuu isu rogay kala sarrayn la magac-baxday Midiidsi. Addoonsigii Badda Cad ka jirey ee Koonfurta Yurub ma ahayn mid leh weji midab ama jinsi. Gaaladu, Muslinka ayey addoonsan jirtey, Muslinkuna Gaalada ayuu addoonsan jirey. Afrikaanku ka mid bay ahaayeen addoonta Badda Cad, hase ahaatee, tiradoodu ma badnayn. Irmaanta addoonta Badda Cadi, waxay ahayd waqooyiga iyo bariga Badda Madow.

Qarnigii 14aad iyo 15aad Koonfurta Yurub addoonsiga guryaha, dad seebaadka ku dhaqaajiya doonyaha iyo maraakiibta waqtigaas, iyo ururinta dadka si ganacsi u suuro galo. Meelaha laga qoto macdanta, amase laga beero Sonkorta ee ay ka mid ahaayeen Jasiiradaha Badda Cad Koonfurta Isbayn ama Boortuqaal, addoontu gacan weyn ayay u ahayd.

Intaan Ameerika daaha laga rogin, Yurub waxay ka samaysay Beero la mid ah kuwa jasiiradaha ku yaalla "Atlaantika". Qarnigii 16aad waxay soo gaareen Sio Thome oo ku taal Gacanka Gini, sidaas oo kale ayay Reer Yurub ku degeen Kaar-ibiyaanka iyo Baraasiil. Dadka meelayowgaas degganaa tiradoodu way ka yarayd wax lagaga shaqeeyo Beeraha Sonkorta oo shaqaale xoog leh u baahnayd. Dadkaas dhibaato kale ayaa kaga timid imaatinkii Reer Yurub, oo ku aada cudurrada sida fudud u fida, Jadeeco, Kaneeco, Furuq, Tiifow iwm., kuwaas oo ciribtiray, maxaa yeelay, adkaysi ayaanay u lahayn.

Reer Yurub horay bay addoonsiga u dhaqan gelin jireen, si ay qasab dadka ugaga shaqaysiiyaan. Siday Badda Cad ugu hirgasheen ayay Atlaantikana ugu halciyeen. Kaddib markii dadkii Hindida ahaa ku le'deen Meksiko iyo Beeru, Isbaan-ishku waxay u leexdeen adeegsi, midiidsi ah. Ameerikada inteeda ku taal kulaal-ayaalka waxay noqotay cadaab dadka madow loo addoonsi qasbo. Afrikaanka oo keliya mayn ahayn dadkii loo soo qasbay dunida cusub. Maxaabiis iyo fallaagooyin-kii guuleysan waaya, iyo shaqaalaha deynka lagu yeesho, kaddibna muddo lagu shaqaysto, ayaa si tiro badan looga soo shixnidi jirey Yurub. Hindida iyagana waa la addoonsan jirey, beeraha Baraasiil ayaana lagu qodi jirey.

Afrika lafteeda addoonsigu waa jirey, laakiin, waa ka duwanaa kan beeraha waaweyn ee Maraykanka lagaga dhaqmi jirey. Ninka addoonka laga dhigay xaq muusan lahayn. Marka gacanta lagu dhigo, waa la dili karayey ama waa la iibin karaayey. Wuxuu ahaa nin aan xaq lahayn ilaa inta la gadanaayo ama loo shixnadayo dibedda. Hadduu ku dambeeyo beer Maraykan ah, waxa loola dhaqmi jirey sidii uu yahay dubbe ama majarafad. Hase ahaatee, Afrika addoonsigu muu ahayn mid ku xiran dhaqaalaha. Ujeeddada laga lahaa gadaasha ama haysadka addoonta waxay ahayd, in tirada bulshadu ay korodho, si beeshu maamuus iyo xoog milleteri u yeelato. Dadkaasi inta badan waxay noqon jireen dad ka tirsan beesha ama bulshada ninka hadba ay la joogaan. Xuquuq waa ay lahaayeen, danahoodana waa la ilaalin jirey. Addoonta ay lahaayeen ragga sare meelo waaweyn ayaabay qaban jireen. Addoonsiga Afrika jirey wuxuu u kala qaybsanaa — mid rahman oo xooggiisa isku furta, mid guri joog ah iyo mid caqiidadiisa lagu addoonsado.

## GANACSIGII DADKA REER AFRIKA

Ganacsigii dadka ee Atlaantiku wuxuu la qabsaday addoonsigii dadka ee Afrika ka socday, hase ahaatee, ganacsiga Atlaantiku wuxuu dadkii ugu jeheeyey addoonsi sifo kale leh. Afrikaanku hadday gudahooda iska addoonsan jireen kani wuxuu suura geshay in dad tiro badan laga taxaabo oo reer Yurub laga gado.


Nidaamka gaddiska waa kala duwanaa, meeliba hab u gaar ah ayey ku adeegsan jirtay. Meelaha qaarkood Reer Yurub waxay ka dhisteen qalcado. Xeebta dahabka waxa ka taagnaa (27) toddoba iyo labaatan qalcadood. Qalcadaha waxa loo oggolaa in ay si madaxbannaan u maamushaan, hase ahaatee, kiro ayey ka bixin jireen dhulka ay ka dhisan yihiin. Meelayowga qaarkood waxay reer Yurub ku lahaayeen guryo iyo bakhaarro alaabta gaddiska loo keeno lagu kaydsho, iyo dayrar lagu hayo dadka addoonsiga loo soo qabtay ilaa inta maraakiibta lagu shixnadayo. Dadka reer Yurub ee gaddiska u yimaada xeebaha fasaxa iyo abaansiga hadba madaxa dalkaas ayey ku joogeen. Waxa kale oo jiray habka markabka gaddiska, oo ahaa in maraakiibtu hadba deked istaagto, hase ahaatee, aan si joogto ah dad reer Yurub ahi xeebta lagaga tegin.

Qayb waliba waxay lahayd gaddis u gooni ah amase lacag. Lacagaha waxa ka mid ahaan jirey Sabarad bir ah, alaalaxay laga keeni jirey Badweynta Hindiya, iyo macdanaha dahabka iyo baraaska. Alaabta ay reer Yurub u keenaan gaddiska kuwaas ayaa lagu qiimeyn jirey. Meelayowga qaarkood sida Dahoomi (Dohomey) ganacsiga dadku wuxuu ahaa mid ku jira gacanta Boqortooyada. Dalalka ay ka mid ahayd Fura Toro, oo ku taal Webiga Senegaal, dadka ay iibin jireen waa uu yaraa, hase ahaatee, dadka gaddiska loo wado ee dalka loo dhexmariyo ayey canshuur ka qaadan jirtey. Dar kalena waa bay dhul balladhsan jireen, si ay gacanta ugu dhigaan jidadka gaddiska.

Qarnigii 16aad boortuqiiska ayaa ganacsiga dadka ee galbeedka Afrika ugu horreeyey. Ingiriisku waxa uu markii ugu horeysay ka qayb galay 1588kii, markaas oo Boqoraddii Elisabeet ay u fasaxdayKambaniga la oran jirey "Shirkadda Ingiriis ee Afrika". Ganacsiga dadku waxa uu Ingiriiska u noqday gacan ay ku hanti abuurteen. Lifarbuul iyo Biristol waxay ka taajireen kuna dhismeen gaddiska dadka, waxaanay ku tilmaami jireen gaddiska dadka "taageerada ugu weyn ee dadka Ingiriisku helo". Lifarbuul waxay ku faani jirtey in ay tahay "Dekedda Ganacsiga Dadka ee ugu weyn Iglan iyo Yurub oo dhan". Dawladaha reer Yurub midna may rabin in ay ka hadho khayraadka laga helaayo ganacsiga dadka —Dhajka, Faransiiska, Dheenishka, Jarmalka, Iswiidhanka iyo Isbaanishka, intuba way ka qayb qaateen gaddiska dadka. Waxaanay u dhisteen maaraakiib ay u sar gooyeen in ay qaaddo dad aad u tiro badan. Ingiriiska oo qudha maraakiibta qarnigii 18aad uga shaqaynaysay waxay gaartay 200 boqol. Dadka, marka sida ariga oo kale loogu guro markabka, ciriiri, dul-fuul iyo darxumo ayaa Afrikaanka wehel u ahaa. Cuntada la siin jirey waxay ahayd mid ka kooban arabikhi iyo biyo afar iyo labaatankii saacadoodba mar loo fiiqo. Si gaalnimada iyo naxariis-darrada ninka cad tilmaamaysay, ayaa ganacsatada reer Yurub u shaabuugayn jireen ama u sunti jireen haddiiba dadku cuntada ka gacan laabtaan. Marka dadka addoon-qasabka u socda, qof ka mid ahi xanuunsado badda ayay ku ridi jireen, si aan xanuunku kuwa kale ugu fidin. Dad badan oo qaadan kari la' addoonsiga ayaa badda isku ridi jirey iyaga oo u arkaayey dhimasho iyo addoonsi in ay isku dhig yihiin. Taasi markay badatay ganacsatadu shebeg ayaa bay ku daahi jireen dadka la addoonsan rabo ee markabka saaran. Inta badan dil, dhac, boob iyo roorsi ayay ku adeegsan jireen, dadka Afrikaanka ah ee walaalahooda gadi rabay. Dadka inta addoonsiga loo wado waa laysku xiriirin jirey, sida safarka oo kale, kan taagdarreeya ama xanuunsadana halkuu ka dhaqaaqi waayo ayaa lagu dhaafi jirey. Inta nolol xeebta ku gaartana badanaaba shirkad ama nin ayaa laga gadi jirey.

Dadka le'da intaan xeebta la keenin saddex dalooloo laba dalool ayay dhammaayeen. Intii ka horreysay 1600, in gaarta 20,000 qof ayaa sannad walba Ameerika loo dhoofin jirey, waxaanay gaartay 55,000 oo qof sannadkiiba qarnigii 18aad. 1780kii tiradu waxay gaartay 70, ilaa 75,000 oo Maraykan loo dhoofin jirey sannad walba. Sannadaha qaarkood tiradu waxa ay gaaraysay 100,000 qof sannadkiiba.

Ganacsigii Saddex Geesoodka



Inkasta oo si fool xun dadka reer Afrika uu dhibaato iyo darxumo ugu dhashay gaddiska dadku, misana in lagu qiyaasay 300 boqol oo sano ayuu gaddisku si isdabajoog ah u socday. Sababaha uu u joogsan waayeyna waxa u weynaa kan dhaqaalaha. Reer yurub aad bay uga taajireen dekedahooda iyo magaalooyinkood-una si dhaqso leh ayey ugu dhismeen uguna hormareen. Dawladihii waqtigaas may oggolayn joojinta ganacsiga dadka, maxaa yeelay, dadka Afrika laga qaado ayaa beeraha cudbiga, sonkorta, buuriga iwm. ee dunida cusub, ka shaqayn jirey iyagoon wax mushaharo ah qaadan. Alaabta ay soo saaraan ayey ganacsatada Yurub qiimo jaban ku gadan jirtay, dabadeedna alaabtaas oy soo farsamaystaan ayey dib uga gadi jireen dadka reer Afrika.

Intii qarnigii 18aad bartankiisa ka horraysay, qiimaha ninka laga bixin jirey waa uu jabnaa. 1695kii ninka la addoonsan rabo waxa uu ka taagnaa Jamayka £ 20 oo la mid ahaa lix boqol oo rodol oo sonkor ah, ama lix qori oo ah nooca Afrika laga gadi jirey. Mararka qaarkood Afrika gudaheeda waxa lagu gadan jirey siddeed qori. Misana ninka la addoon qasbay buuriga, cudbiga, sonkorta, ramka iyo wixii la mid ah ee uu soo saaro ayaa habi jirey warshadaha reer Yurub, dekedahooduna ku furnaay-een. Reer Yurub malaayiin gini ayaa ka soo geli jirey gaddiskaasi saddex geeska ah, magaalooyinka ay ka mid ahaayeen Bristol, Lifarbuul iyo Glaasgowna noloshooda ayaaba ku xirnayd. Nin Ingiriis ah oo wargeysyada qoraa isaga oo tilmaan ka bixi-naaya sifaha ganacsiga dadku macaash iyo hantiba ugu keeney reer Yurub, gaar ahaan dalka Ingiriiska wuxuu qoray: "Ma jiro magaalada Bristol midh jaajuur ah oo aan dhiigga addoonku ku sibidhaysanayn. Magaalooyinka, nolosha raaxada, iyo adeegayaasha guryuhu intuba waxay yihiin hanti laga soo miiray darxumada iyo taaha dad ay iibsadeen, misana ay gadeen ganacsatada reer "Bristol".

Dawladihii Ingiriiska ee maalintaasi, dadkii ka soo horjeeday ganacsiga dadka waxay ugu jawaabi jirtey: "Ganacsiga dadku in uu faa'iido laxaad leh u soo hooyo, sidaa awgeedna aan la joojin karin". Lord Dartmawt oo ahaa Xoghayaha Qaranka ee dalalka Ingiriisku gumeysto wuxuu yiri, 1772; "Uma oggolaan karno cidnaba in ay isku daydo joojinta durdur qaranka, si laxaad leh ugu keenaya macaash". Dadkii ka soo horjeeday joojinta ganacsiga dadku, waxa muraadkoodu ahaa mid ku aada shaqaale iyo xoogga dawladda. Waxay ku andacoonayeen in joojinta ganacsigu ay abuurayso, meelaha maraakiibta lagu sameeyo oo xirma, dadkii ka shaqayn jirey oo shaqo beela, dawladda oo xooggeeda baddu is-dhimo, joojinta ganacsiga oo dib-u-dhac u keena dekedaha, magaalooyinka, iyo warshadaha. Nin Ingiriis ahaa oo ka horjeeday joojinta ganacsigu wuxuu ku murmay joojinta ganacsigu in ay tahay "In la tiro darajayn Ilaahay waayo badan joogto ka dhigay oo dhaqan gashay ma aha mid aan ku dhacayno dabaqado badan oo ka mid ah dadkeenna ee waa naxariis-darro aan u geysanayno dadka Afrikaanka ah ee dib-u-dhacsan oo la hubo haddii ganac-sigu socdo in aan ka baajin lahayn dil iyo dar-xumo Afrika sal u ah oo ay u gudbayaan nolol farxad leh".

## TALLAABOOYINKII CIRIBTIRKA GANACSIGA DADKA

Ka dib markii 3 boqol oo sano socotay ayaa rag dadnimabiil ihi iyo niman dareen dineed lihi ku kaceen jiridda ganacsiga dadka. Guddi ayaa abuurantay la magac baxday "Guddida Ciribtirka Ganacsiga Dadka". Waxaana baaqoodii gaaray Daw-ladda Ingiriiska iyo barlamaanka Ingiriiska. Dadkii ganacsiga macaashka ku qabay iyaga hantidooda ayaa u muuqatay, dhibaatada ninka madow ee la addoonsanaayay se indho umay lahayn. 1807 ayaa barlamaanka Ingiriisku xaaraantinimeeyey ganac-siga dadka. Faransiiska, Maraykanka, Isbaaniska iyo Bortoqiisku iyagu way sii wat-een. Muddo ayuu geddisku socday ka dib markii Ingiriisku mamnuucay. Hase ahaatee markii Boortaqiiska, Isbaaniska, Faransiiska iyo Maraykanku iyana oggo-

laadeen tirtiridda geddiska ayaa si dhab ah uu isu taagay dhaqdhaqaaqii ganacsiga dadka ee ka socday Badda Atlaantigga. Hase ahaatee dhinaca bari iyo kan waqooyi weli waa uu ka socday. Bariga, Carabta ayaa weli gacanta ku haysay, 1840 na waabu sii xoogaystay markii Sayid Siciid oo Boqorka Cummaan ihi u soo guuray Zanzibaar, Carabtu Bariga uun kumay koobnayn ee se Afrikada Dhexe ilaa iyo Kongo ayuu dhaqdhaqaaqa ganacsigu ku ekaa. Xagga woqooyi wabiga Niilk iyo toobiyaha lama degaanka ayaa laga gudbin jiray dadka la addoonsan rabo. Darxumada iyo dhibaatada gaaraysay dadkaas laga gudbin jiray saxarada waa mid aan la sheegi karin, lana barbar dhigi karin tan haysatay kuwa Atlaantiga laga gudbiyo. Dhinaca Bariga iyo Waqooyiga geddisku wuxuu iska taagay dhammaadkii qarniga 19aad.

## CIRIB REEBKII GEDDISKA DADKA

Raadkii Addoonsiga iyo dhoofinta dad tiro badan oo Afrikaan ahi ku dhigeen bulshada Afrika waa mid aan si buuxda loo xisaabi karin dhibaatada iyo darxumada gaadhi jirtey dadka waa mid layska garan karo horayna aan u soo sheegnay. Waxaan shaki ku jirin in ganacsiga dadku uu ciribtiray dadweynihii Afrikaanka. Waxa lagu qiyaasaa dadkii laga dhoofiyay Atlaantigga 12 Malyuun, guud ahaan inta ku dhimatay waxaaba lagu qaddaray boqol ilaa boqol iyo labaatan Malyuun. Waxaa ku baab-a'ay qaranno dhisnaa. Mani-Kongo wuxuu Boortqiisku u rogay xarun uu ka dhoofsho dad uu ku addoonsado Baraaziil, Benin, Dahomey iyo Asante, waxay noqdeen qarano ka jeestay horumarkii nabadda, siyaasadda dhaqaalaha iyo farshaxankaoo ku dhaqaaqay dagaallo addoon raadis ah iyo burburinta bulshooyinka ka taagdarraa. Benin iyadu waxay jiraalkeedu ku xirmay (ganacsiga dadka ay dhoofis u gudbin jirtay qarnigii 19aad), waxay ku caan baxday Magaaladii dhiigga "City of blood".

Raad dhinac-yaal ah oo ka yimid ganacsiga dadka wuxuu yahay aasaaskii Freetown iyo Libeeriya. Labadaas dal ayaa lagu ururshay dadkii la addoonsan jirey ee la xoreeyey. Freetown waxa la geeyey dad laga soo ururshay London, lagana keenay Kanada iyo Kariibiyaanka. Libeeriya iyada waxa la dejiyey 1822kii dad laga keenay Maraykan. Guud ahaan muddadii dheereyd ee uu ganacsiga dadku socday wuxuu dhaawacay horumarkii iyo koriddii ilbaxa Afrika. Heerkii ilbaxa gaaray facihii dhexe, waxa qasay ganacsigii guud ee aadamiga, Afrikaanka waxa loo qaatay loolana dhaqmay sidii loogu talo galay in ay ninka cad u adeegaan. Halkaas waxa ka abuurmay horukac aad u qoto dheer oo ninka madow loo qabo, sida uu u baaba'ana adag tahay. Addoonsigu wuxuu noqday nolosha ninka madow. Yaa oran kara ninka cad maskaxdiisa aragtidaasi way ka suushay?

## YURUB QARNIGII 18aad

Intaanan u gudbin qarnigii 18aad, waa inaynu indha-indhayno waxyaabihii gogol-dhigga u ahaa qarnigaas. Bal aynu eegno waqtigii lagu magacaabi jirey xukunka kama dambeysta ah ee qarniyadii 16aad, 17aad, iyo 18naadba. Nimanka sheegtay in ay xaq u leeyihiin taliska kuna dhaqmi jirey xukunka kama dambeysta ahaa, waxay taageero iyo gargaar ka heli jireen nimanka aqoonta dheer u leh falsafadda iyo maamulka siyaasadda. Fikradaha ay aqoonyahannadu qori jireen waxa lagu tilmaami karaa in aanay ahayn kuwa dadweynaha ee ay ahaayeen kuwa dadka xoogga siyaasiga ah leh, reeraha sarena ka dhashay maal-qabeenka ahaa. Culimada aad u taageersanayd xukunka kama dambeysta ah, waxa ka mid ahaa Jiin Boodaan (1530-1595). Boodaan wuxuu ku dadaalay sidii loo gubi lahaa, loona ciqaabi lahaa haween sheegtay in ay awood rooxaan ah leeyihiin.

Boodaan wuxuu taageersanaa in habka siyaasiga ah aan waxba iska beddelin, gole sharci ahina uusan jirin. Amarka Boqorkana, wuxuu Boodaan u haystay lama dhaafaan. Boodaan waxa uu u aqoonsanaa boqorka in loo oggolaado awoodda uu aabbuhu carruurtiisa ku leeyahay oo kale. Toomaas Hoobis, isna wuxuu ahaa Feylasuuf Ingiriis ah; wuxuuna ahaa horseedaha xukunka kama dambeysta ah. Hase yeeshee, Hoobis wuxuu aqoonsanaa in aan Boqortooyadu ahayn wax xagga Ilaahay laga caleemo saaray. Fikraddaasna waxa ku colaadshay boqorkii markaa Iglan xukumi jirey. Hoobis, wuxuu qabay dawladdu in ay tahay heshiis dadka oo dhammi ay xuquuqdoodii gaar ahaaneed ay ka degeen, si loo ilaasho danta guud ahaaneed. 1485-1789kii, waxa lagu tilmaamaa waqtigii xukunka kama dambeysta ahaa. Awooddaa weyn ee Boqorku lahaa ma ay taageersanayn culimada falsafadda oo qudh ahi ee waxay ahayd fikrad laga dhaadhiciyey dadka oo dhan. Nimanka burjuwaasiyiinta yaryar ahi oo markaa dhaqaaluhu gacanta ugu jirey, iyana waxay raacsanaayeen xukunka kama dambeysta ah. Had iyo jeer waxa ay odhan jireen nabadgelyada waa in la ilaaliyo, xorriyadda dadkuna waa waxaan baahi weyn loo qabin. Habka ganacsiga ee markaa lagu dhaqmi jirey oo loo yaqaan "mercantilism" ayaa dhidibbada u sii adkeynayey xukunkaas isaga ah. Luwiiskii 14aad markuu yidhi, "Anigaa Qaranka ah", waxay inoo muujinaysaa in aannu oggoleyn dood iyo in xukunkiisa la fara geliyo toona, awood sarena uu leeyahay, dadweynahana uu ka filayo daacad indho la'aaneed! Waqtigaa Yurub waxay u kala qaybsanayd Boqortooyooyin yaryar. Jarmalka waxa hoos imaan jirey 39 Dawladood oo mid waliba nin reer boqor ahi uu xukumi jirey. Xukunka kama dambeysta ahi wuxuu saldhig u ahaa sidii uu u abuurmay habka dawladnimada ee cusub.

## QARANNIMADA:

Qarannimada sida aynu waqtigan imminka u naqaanno qarniyadii dhexe looma aqoon, maba jirin. Qarniyadii hore saddex wax ayey Yurub u hoggaansanayd.

1. Boqortooyada Roomaanka;
2. Afka Laatiinka oo dadka aqoonta sare lihi ku hadli jireen;
3. Kaniisadda Katooligga.

Sidaa daraaddeed, ninka cilmi lihi wuxuu isagu ku fekeri jirey in uu yahay nin kiristaan ah, waax Boqortaayada ka mid ahna deggan yahay, ugu dambeystiina nin Faransiis, ama Ingiriis ah yahay. Dadweynuhu Boqorka iyo Kaniisadda ayay isaga hoggaansanaayeen. Waxyaabaha abuuray qarammada waxa ka mid ahaa markii nimanka aqoonta lihi iyo kuwa wax qoraa ay afkay u dhasheen wax ku qoreen waxna ay ku hal-abuureen. Ta labaad waxay ahayd markii Kaniisaddii Katooligga kala biiqbiiqday ee ay dhasheen Kaniisado waddani ahi hirgeliyeenna dhaqankooda gaar ahaaneed, afkay u dhasheen ay Ilaahood ku caabudeen, afka Laatiinkana ay ka soo horjeesteen. Qarnigii 18aad ayey qarannimada cusub ee waqtigaa Yurub ka samaysantay abuurantay. Hirgelintii ugu weyneyd ee qarannimada waxay aad u xoogeysatay waqtigii Kacaanka Faransiiska markii dadweynuhu ay ku dhawaaqi jireen waxa aynu nahay mase baaquna ahaa sinnan, walaaltooyo iyo madaxbannaani.

## FILOOSOOFIS:

Les Filoosoofis waxay ahaayeen koox culimo ahaa oo doonaysay in ay si cilmi ahaan ah ay uga baaraan degaan arrimaha ku saabsan dhaqanka, dhaqaalaha filoosoofiga, diinta iyo habaynta dawladnimada. Didroo oo ahaa ninkii baandheeyaha u ahaa Insay-kala-biidhiyaha, wuxuu aqoonsanaa in adduunka wax kasta la faalleeyo,

lagana doodo su'aasha ugu da'da weyn aqoontuna ay tahay waayo? Didroo wuxuu ku barbaaray hoyga culimada Jasuuweedka ee ku yiil Baariis. Ulajeeddooyinka Insay-kala-biidhiyuhuna waxay ahaayeen in la ururiyo aqoonta iyo cilmiga kala filiqsan, meel qudhana laga baadho marba arrintii loo baahdo. Nimankii aqoonta ururiyey waxay ahaayeen Foolteer, Montaaskii iyo Ruuso. Boqorkii Faransiisku wuu mamnuucay qoraalka, oo akhriska Insay-kala-biidhiyaha. Waxa uuna culimada ku cambaareeyey in ay faafinayaan sharci-darro, ilaahna ka fogaadeen, lidna ay ku ahaayeen awoodda Boqortooyada.

Hase yeeshee, inkasta oo boqorku isku dayey in uu joojiyo qoraalka insay-kala-biidhiyaha, dadku aad bay u akhrisan jireen. 1757kii 4000 oo qof ayaa rukuntay insay-kala-biidhiyaha. Boqorku waxa uu aad uga xumaaday ereyga "ciqaabta" marka culimadu qeexayaan. Culimadu waxay yidhaahdeen; "Iglan waa laga tirtiray waxa la yiraahdo ciqaab". Culimada Faransiiska ahaa waxay ku tawaawici jireen in ay helaan dawlad ta Ingiriiska u dhiganta. Montaaskii wuxuu jeclaystay in diinta iyo quraanku kala baxaan sida Ingiriiska. Foolteer markuu Iglan ku tegey Masaafuris wuxuu yidhi, "Iglan waa fiican tahay, laakiin, dhaqan debecsan iyo cunto macaan ayaanay lahayn". Foolteer wuxuu aad u necbaystay dhismaha iyo maamulka Kaniisadda "dhidibbada ha loo saaro" ayuu oran jirey, "waa mid aan u dulqaadan kareyn wixii aan iyada la aragti diineed iyo siyaasad ahayn". Didroo wuxuu yidhi markuu dhimanayey "Ma aamminsanayn ilaah aabba ah, iyo ka wiilka iyo ka rooxaanta ah". Culimadu may diiddanayn Kiristaannimada iyo ilaahay toona. Waxaase ay ka soo horjeedeen dawladdu markay doonto in ay dulmi iyo dhac dadweynaha masaakiinta ah kula kacdo in ay u cuskato Kaniisadda.

Waxay diidayeen awoodda siyaasiga ah ee ay u qaateen boqorradu in ay tahay hantidooda gaar ahaaneed. Filoosoofiyiintu waxay ahaayeen Jaansaarayaal doonaya in ay isbeddello yaryar sameeyaan ee ma ahayn kuwo doonaya kacaan. Hase ahaatee, boqorradii ku dhaqmi jirey xukunka kama dambeysta ah, waxay ahaayeen kuwo ay dhibayso in xukunka marnaba laga fara geliyo. Culimada Boqortooyada ma ay diiddanayn. Boqorrada qaarkood iyo culimadana saaxiibtinnimo ayaa ka dhaxaysay. Kaatariin oo ahayd Boqoraddii Ruushka 1762-69, waxay la dhacday arrimaha ay ka faalloon jireen filoosoofiyiinta Didroo iyo Foolteerba. Waxay culimada iyo Kaatariin isu qori jireen waraaqaha. Haddaynu dhinaca Faransiiska dayno waxaynu ogaanaynaa in Luwgii XV waqtigiisii aad la isugu taxallujin jirey siday suugaanta, farshaxanka iyo aqoontuba aad hore loogu mariyo. Filoosoofiyiinta waxa lagu soo dhoweyn jirey guryo lagu magacaabi jirey "Salon". Guryaha waxa lahaa dumar jecel aqooni in ay ka dhexeyso iyaga iyo culimada.

Dumarka guryaha lahaa waxay diyaar garayn jireen meelo quruxsan oo la fariisto, cunto fudud iyo waxyaabo la cabo. Maadaam de Pombiduur oo Luwgii XV ay saaxiib ahaayeen, Foolteerna saaxiibtinnimada culumada iyo Maadaam de Pombidurur ka dhexeysa heer sare, waxaanay boqorka ka dhammaysay in uu Alembert siiyo bisil ama gunno uu ku noolaado. Alembert wuxuu ahaa aqoonyahankii Didroo la baandhayn jirey inay-kala-biidhiyada. Waxa kale oo ay Maadaam de Pombiduum, Boqorka ka dhaadhicisay in uu oggolaado in insay-kala-biidhiyaha dadku gaar ahaan u haysan karaan, laakiin, aan lagu iibin meelaha madalweynaha. Taasu waxay ina tusaysaa in qarnigii 18aad uu ahaa mid aqoonta aad loo hirgelinayey siiba asluubta hadalka, filoosoofiyada, riwaayadaha, dhismaha kaniisadaha iyo guryaha Boqorrada.

## ISU DHEELLITIRKA XOOGGA

Qarnigii 18aad haddaynu eegno xagga siyaasadda wuxuu ahaa mid mar walba laysugu imaan jirey heshiisyo dhul qaybin, iyo soohdimo cusub oo mar walba la kala xarriiqanayo. Sidaynu hore u soo sheegnay qarannimada Yurub markaa ma ay taabbagelin. Dhulka Talyaaniga waxa lagu tilmaami jirey in uu yahay, "Tibaax Juqraafiya", Jarmalku 39 qaybood ayuu u ahaa. Booland oo kalena waxay u qaybsanayd, Ruushka, Buruushiina iyo Awsteriya. Khariidada Yurubna wax Boolaand la yiraahdaba maba ay jirin. Boqorrada Yurub inkasta oo ay dhigteen heshiisyo, waxay ahaayeen kuwa ummadnimada meel kaga dhacaya, himiladooduna ay tahay in ay dhulal kala hororsadaan. Saddex xoog oo waaweyn ayaa jiray oo kala ahaa Ingiriiska, Faransiiska iyo Awsteriya oo iyadu dhaxashay Boqortooyada Kaniisadda ee Roomaanka.

Waxaan iyaguna dab yar shidayn Barash iyo Ruushka, Isbeyn, Iswiidhan iyo Holand oo 1600kii ahaa Boqortooyooyin awood leh. Qarnigii 18aad waxay ahaayeen kuwo aan dagaal iyo dibloomaasinimada toona aan la tirsan, lana tixgelin. Boobka ayaa isaguna qarniyadii hore siyaasadda Yurub qayb libaax ka qaadan jirey. Boqortooyadii lagu magacaabi jirey Cusmaaniyiinta ee Turkiga ayaa iyana aad waqtigaa laxaad u lahayd. Waxay boqortooyadaasu ku kala baahsanayd dhulka Balkana loo yaqaanno ama Yurubta Koonfur-Bari. Awsteriya iyo Ruushku waxay rabeen in Boqortooyada Turkigu faraha ka qaaddo dalalka Balkanka, taasoo ay u cuskanayeen diinta oo ay ka gilgilanayeen in dad Kiristaan ah la gumeysto.

Markay taariikhdu ahayd 1789kii ayaa dhibaatooyinka Balkanku aad u soo caan baxday, boqortooyada Turkigana ay shir walba iyo dood kastaba laga hor keenay arrimaha Bariga ama su'aasha Bariga, sida dadka taariikhda qoraa ku magacaabeen. Siddeedda Boqortooyo ee xoogga weyn lahaa waxa dhex yiillay tartan iyo colaad. Faransiisku wuxuu doonayey in aan marnaba Ingiriisku badaha kaga xoog weynaan. Boqortooyada Beerbanka ee Faransiiska waxay utuuni ka dhexeysay Boqortooyada Habisheerga ee Awsteriya. Boqortooyada Habisheerg waxay xukumi jirtay dad iyo dhul ballaadhan oo afaf kala duwan lagaga hadlo. Dadkaa iyaga laf-ahaantooda wax xidhiidhin kara ma ay jirin oo aan ahayn xukunka Boqortooyada.

Yurub haddaynu fiirinno waqtigii dagaalkii is-dabayaalka ahaa ee toddobada sano, waxaynu arkaynaa in marba xooggu dhan u liicayey, iyada oo marba guuto boqortooyo ahi is-gaashaan buursanayso. Dagaalkuna aannu ahayn gudaha Yurub oo qudha ee la isku hirdiyaayo la iskagana hor imaanayo goobo ahaa Hindiya, waqooyiga Ameerika iyo Jasiiradda Karibiyaanka. Mar walba waxay dagaalladaasu aloosmi jireen marka inta heshiis la dhigto aan haddana raalli loogu kala noqon qodobbada ku jira heshiiska. 1748kii, waxa la wada dhigtay heshiis, haddana, waa la wada ciil qabay, Iglan iyo Faransa kumay qanacsanayn qaybtii ay W. Ameerika la heshay, Burashiya waxay doonaysay in aan marnaba taliska gacanteeda laga saarin. Awstariyana waxay doonaysay in iyada Salisa loo soo cesho oo gacanteeda ku soo noqoto xukunka iyo dadka reer Salisaba.

Heshiiskii la odhan jirey "heshiiskii Baariis 1733kii, waxa la isla gaadhay in Ingiriiska loo dhaafo waqooyiga Ameerika iyo Hindiya, Faransiiskana loo oggolaado in ay Niyuufawndland, saldhig ganacsi ku lahaato kana kalluumaysato. Karibiyaanka iyaga waxaa loo kala qaybiyey Iglan oo la siiyey St. Firiseet, Tobago, Domanka iyo Gaanda. Maartamiika, St. Luulka iyo Gowdloobna waxa la siiyey Faransiiska.

Qarnigii 18aad wuxuu ahaa mid shir, heshiis dibloomaasinnimo iyo dagaal ku caan baxay dhinaca siyaasadda, boqorraduna ay ku dacwoon jireen in ay dhaxaltooyo xukunka u helaan. Heshiis kasta dabadeedna, hadba dhan ayey isu gaashaan-

buursan jireen nimanka boqorrada ah ee xukunka caynaanka u hayey. Bal haddaba aan fiirinno heshiiskii Fiyeenna. Heshiiskii Fiyeenna 1815kii ayaa la abaabulay markii Naaboloyoon la riday lagana adkaaday, waxaana la rabay in khariidada Yurub dib loo sameeyo, Naaboolyoon iyo cagacagayntiisana laga nasto! Saddex arrimood ayaa la cuskanayey oo heshiiskaa qodabbadiisu ku dhisnaayeen.

1. Dhaxaltooyo xaqa, oo xukunka loo raaco.
2. Awoodda siyaasiga ah oo la isku dheellitiro.
3. In lays weydaarsado dhulal laysku samir siiyo.

Xukunkii dhaxaltooyada markii la raacay, Faransa, Hooland, Isbeyn iyo qaybaha Talyaanigaba waxa la oggolaaday in boqorradii hore u xukumi jirey gacanta ku qabtaan. Beerbanka si loo adkeeyo, xoogguna aannu dhanna ugu liicin waxa la xoogeeyey waddannadii Faransa hareeraheeda ahaa. Hooland waxa la siiyey Biljim, Awstariyana waxay qaadatay Lambarday iyo Fineesiya, Barshana waxay qayb u heshay dhulkii ahaa agagaarka Webiga Rayn; Ingiriiska waxa la siiyey Maalta, Sayloon iyo Keebka ku yaal Koonfur Afrika. Ruushkana Boolan ayuu qaatay.

Heshiiskaasu waxba kama duwanayn kuwii ka horreeyey, waayo, heshiiskaasu ma aqoonsanayn waxa la yiraahdo qaran iyo ummadnimo.

Dhulalkana Boqorradu sidii waax hilib ah ayay u qorma-qormaysteen. Qarnigii 18aad waxaynu sheegnay in siyaasaddu qalalaase ku jirtay, xasilllooniduna ay yarayd, boqorrada Yurub iyo dadweynaha himilooyinkoodu ay kala fogaayeen.

## KACAANKII WARSHADAHA

Kacaanka Warshadaha waxyaabaha keenay waxa ka mid ah, Yurubta Galbeed oo qarnigii 18aad dadkii ay ka soo firdhadeen beerihii oo ay magaalooyinkii soo galeen. Soo gelitaankaa magaalooyinka waxa keenay, iyada oo xagga ganacsiga hore looga maray. Sahamiyayaashii, aabbayaashii diinta iyo ganacsatadii reer Yurubka ee Afrika, Aasiya iyo Ameerika u soo doolay waxay waddada u xaadheen dhul-ballaadhsiga, iyo sayladihii reer Yurubka u hirgeliyey Kacaankii Warshadaha. Yurubta Galbeed waaga waxay ka gudbaysay habka loo yaqaan dhulgoosiga oo dhaqaalihiisu ku xidhnaa beeraha.

Kacaanka Warshaduhu wuxuu Yurub ku sandulleeyey in ay noloshoodii dhan walba iska beddesho. Caleenta Shaaha, Koofiga, iyo Kakowguba waxay noqdeen waxyaabaha Yurub aad looga jeclaystay cabbiddooda.

Alaabta ceedhiin ee dhulalka qalaad Yurub uga imaan jirtay waxay noqotay midda qudha ee warshadaha Yurub laf-dhabarta u ahayd. Marka alaabta laga keeno dhulkii ay dhaladka u ahayd, ayaa Yurub lagu farsamo tumi jirey, qiima qaali ahna lagaga gadi jirey sayladaha adduunka oo dhan. Arrimaha taakuleeyey Kacaanka Warshadaha waxa ka mid ahaa:

1. In la sameeyey makiinado dharka sameeya.
2. Jaymis waat oo sameeyey makiinadda uumiga.
3. Aadam Ismid oo qoray buugga la yidhaahdo "Barwaaqo-sooranka Ummadaha".

Waxa kale oo jirtay in dad badani sameeyeen waddooyin iyo biyo-xidheenno, baayac-mushtarkiina hore u maray, magaalooyinkiina loo soo gurmaday. Xagga ganacsiga Ismid iyo kuwa la aragti ahi waxay ku doodi jireen "Laisse-Faire" oo ujeeddadoodu tahay ganacsigii in uu madaxbannaanaado, dawladnimaduna in ay in dheer u jirsato arrimaha ku saabsan dhaqaalaha.

Qaxitaankii magaalooyinka loo soo qaxay, wuxuu dhalieyey in ay beeraleydii yaryarayd fara madhnaan ku sugnaato. Markaa danyarta waxaa khasab ku noqotay in ay wershado u shaqo raadsadaan. Sidaa daraaddeed, waxa abuurantay koox muruq-maal ah oo xooggooda ku ganacsada oo lagu magacaabay Borolitaariyaad. Halkaana waxay kula kulmeen toddobadii silic ee hantigoosadka.

1. Habka Warshadaha;
2. Saacadaha oo dheeraa;
3. carruurta oo laga shaqaysiiyo;
4. Umulo ama uurray laga shaqaysiiyo;
5. Mushaharo yar;
6. Shaqa li'i;
7. Hooy la'aan.

Shaqaaluhu marka ay isku dayaan in ay xuquuqdooda u halgamaan waa la toogan jirey, ama waaba la xidhi jirey, ama waa la masaafurin jirey. dembiga ugu weyn ee uu nin shaqaala ahi geli karo wuxuu ahaa isagoo gala urur shaqaale. Nimanka Warshadaha lahaa waxay kaloo hoggaanka u hayeen awoodda siyaasiga ah, sababtuna waxay ahayd iyaga ayaa Mudanayaal Baarlamaanka ka ahaa, ama iyaga ayaa soo dooran jirey Mudanayaasha.

Nimankaas maal-qabeenka ahi, waxay ka fekeri jireen inta macaash soo geleysa, waxayna socodsiin jireen qawaaniin had iyo jeer taageereysa dhaqaale madaxbannaan.

Kacaankii Sancada inkasta oo uu dhibaatooyin xagga dhaqanka iyo dhaqaalaha kala yimid, waxaynu ognahay in qalabka wax soo saaridda iyo tacabkuba horay u maray. Waxa la bartay sida dharka si dhakhso ah loogu sameeyo, waxa la sameeyey maraakiib waaweyn, waxa kor loo qaaday awooddii siyaasiga ahayd ee warshadayntu keentay.

## SABABIHII UU KACAANKA WARSHADUHU UGA BILAABMAY IGLAN

Dhulka Iglan lagu magacaabo waxay lahayd waxyaabo ay ka mid yihiin xoogga biyaha, birta iyo dhuxusha dhulka laga qodo. Saddexdaa oo wada socdaa waxay Iglan u suurto gelisay in ay u hawl yaraato sida birta loo shubo loogana sameeyo makiinado lagu adeegto. qalabkaasuna markaa tacabka kor u qaado. Nasiib wanaag waxay Iglan u ahayd in gobollada biyaha lihi ay ahaayeen kuwa dhuxusha laga helo. Gobolka Lanshire oo ugu badnaa alaabta ceedhiin, waxay kaloo lahayd marso fiican oo la yiraahdo Libar-Buul.

Marsada waxa laga diri jirey alaabta ceedhiin ee laga keeno waddammada shisheeyaha. Markaa waxa hirgalay tareenka oo aad isugu xidhay ganacsigii dhulka. Waxa kale oo Iglan caawiyey in ay lahayd dul-qaad siyaasi ah oo nimakii Brotestanka ee Flemishka iyo Faransiiska ahaa ee laga soo caydhiyey waddammadii ay u dhasheen ay qaxooti ku yimaadeen Iglan. Nimankaas oo cilmigii farsamada hore u mariyey. Nimankaasu waxay soo kordhiyeen aqoon iyo farsamo. Culimadu sooyaalka ilbaxnimada waxay marar badan ku qiyaasaan habaynta iyo horumarka farsamada iyo teknoloojiyada! Taas oo ina tusaysa heerka nolosha laga gaadhay.

## SAAMEYNTII KACAANKA WARSHADAHA IYO YURUB

Saamaynta Kacaanka Warshadaha Arrimaha uu keenay Yurub waxaa ka mid ahaa habka hantigoosadka oo taabbagalay. Habkaasu wuxuu la barbaaray Kacaanka Warshadaha 1870kii, waxa lagu magacaabay heerkii dhexe ee Kacaanka Warshadaha. Heerka dhexena waxa bilaabantay hantidii moodka ahayd. Nimankii

maal-qabeenka ahaana lacagtoodii waxay dhigteen, bankiga, waxayna gashadeen dhul iyo mood, si iyagoon dhibtoon, haddana ay u helaan macaash deg-deg ah. Waxa kaloo kordhay tiradii dadka oo ay ugu wacnayd cuntadii iyo dawadii oo korodhay. Magaalooyinka iyo dadka reer magaalkaba Kacaanku dhaqankoodii wuu xoogeysay. Kacaanku wuxuu kaloo xoogeeyey hantida gaar ahaaneed, Yurubna waxa ka dillaacay koox maal-qabeen ahaa oo laga dambeeyo, kuwaasoo la odhan karo waxay ahaayeen boqorradii lacagta. Kacaankaasu wuxuu Yurub u suura geliyey in ay u doosho carra-edeg oo dhan. Dadkii markaa iyaga aannu weli soo gaadhin Kacaankaasuna, waxa dhacay in Yurub ay gumeysato, waayo, dhaqanka sancada iyo hubka dagaalka ayay heer hoose ka joogeen oo Yurub kaga horraysay. Yurub saylidihii ay raadinayeen iyo saldhigyadii ganacsiga waxay isu rogeen saldhig millateri iyo saylado addoonsi. Yurub waxay u baahatay alaabo ceedhiin, shaqo jaban iyo saylado wax lagu gato.

Xagga nolosha bulshada haddaynu ka eegno horumarka aadamigu wuxuu ku xidhan yahay in dabeecadda dagaal lagula jiro. Kacaankii sanaaciga ahaana inkasta oo uu cidhiidhi geliyey dadka saboolka ah, wuxuu ahaa mid dabeecadda dagaal kula jira. Dadku waxay rabaan had iyo jeer in ay dabeecadda ka gacan sarreeyaan.

Sidaa darteed way shaqeeyeen, oo waxay tacbeen waxa lagu noolaado. Tacabka waxa lagu gaadhi karaa iyada oo la sameysto qalab. Qalabkuna waa in uu shaqada hormariyo, horumarkaasuna waa in uu heerka nolosha kor u qaado. Warshadeynta iyo wada shaqayntuna waxay dhalisay in dadku xidhiidh dhex maro. Xidhiidhkaas oo ah xidhiidhka bulshannimada ee shaqada. Halkaana waxa ka dhashay tacabka, oo markaa ahaa mid hantigoosad ah. Sidaa daraaddeed bal aynu indha-indhayno qarnigii 18aad, oo dib u xusuusanno casharka horraantiisii. Kacaanka siyaasiga ahi sidii ka sanaaciga ah ayuu ka bilaabmay Iglan, waxaanuna ku baahay Yurub oo dhan. Qarnigii 17aad Iglan waxa ka dhacay Kacaan siyaasi ah.

Kacaankaas Ingiriiska wuxuu saldhig u ahaa Kacaankii Yurub ku baahay qarnigii 19aad, adduunwrynahana dhammeeyey qarnigii 20aad. Kacaankii sanaaciga ahaa wuxuu abuuray laba dabaqadood oo danahoodu kala gaar yihiin. Borolootaariyada oo aan iyagu waxba lahayn, waxbana aanay ka lumayn silsiladda dulliga ee gaajadu ku xidhay mooyee. Ta kale oo ahayd Burjuwaasiyiinta oo maal-qabeen ah oo iyagu ku kor noolaa xoogsatada. Heerkii labaad ee Kacaanka siyaasiga ahi wuxuu ahaa kii lagu magacaabi jirey "Iftiin" oo ka horreeyey Kacaankii Faransiiska 1789kii.

Kacaanka sanaaciga ahi, wuxuu Yurub u suurto geliyey in ay markay saylado ka hesho dhulal shisheeye ah ay ku adeegato dadkii u dhashay dhulalka oo xooggooda ay kaga gataan qiime aad u jaban. Waxa dhacay in waddan walba oo reer Yurub ahi ay ka abuurmayeen shirkado u kala tartamaya sayladaha dalalka Afrika iyo Aasiya lagaga haagay.

## AFRIKA GUMEYSIGA HORTII

*Sheeko-Baraleydii gumeysigu ka faafiyey Afrika*

Markii la isugu yimid fadhigii Baarliin 1884kii ee Afrika lagu kala qaybsanayey, dawladihii reer Yurub ee halkaa isugu yimid waxay isku dayeen in ay gardarradooda huwiyaan maryo kale, isla markaana adduunweynaha ka indha-saabaan gumeysiga ay danahooda ku fushanayeen. Waxay iska dhigeen dad Afrika samafal u gelaya, sidaa darteedna, waxay faafiyeen afkaar lagu liidayo dadyowga reer Afrika, kuwaas oo ulajeeddadoodu ahayd in lagu jideeyo gumeysiga reer Yurub. Waxa laga dhigay In Afrika gumeysiga hortiis ay ahayd dhul ay deggan yihiin dad maan-gaab ah oo iska hurda oo aan lahayn dhaqdhaqaaq iyo taariikh u qalanta oo la sheego. Waqtiga afkaartaa la hirgeliyeyna waa labadii qarni ee u dambeeyey.

Nin Ingiriis ah oo "Antrobolojist" ah oo la oran jirey A. B. Ellis, wuxuu qoray qarnigii aynu soo dhaafnay dabayaaqadiisii! "Caqligooda haddaynu barbardhigno kan ilmaha reer Yurub, waxa la moodaa in uu ka sarreeyo. Tan iyo intay qaan-gaarayaan si sahlan ayey wax ku bartaan, dabadeedna jirka ayaa caqliga ka adkaada. Wax way jili karaan, waxse ma hindisi karaan". Sir Richard Burteaon oo isna Ingiriis ah, kuna wareegay Afrika qarnigii hore dabayaaqadiisii, yimidna Soomaaliya, asagoo ka hadlaya ninka madow wuxuu qoray: "Koridda caqligiisa way istaageysaa, intay hore u kici lahaydna dib ayey u dhacaysaa".

Afkaartaa waxa ka muuqata in ay yihiin kuwa ujeeddo leh, aanse lahayn haba yaraatee wax sal ah oo qof waxgarad ahi marna rumaysan karin.

Haddaan fiiro u yeelasnno taariikhdii hore ee reer Yurub, waxaan arkaynaa in afkaarta ay ka qabeen Afrika ay ka duwanaayeen kuwaa. Dadka reer Yurub waxyaabihii ay ka fidiyeen Afrika waxa ka mid ahaa in ay ahayd dal go'doon ah oo aan xiriir la lahayn adduunka kale. Taasi sidaan hore u soo aragnay waa mid been ah, waayo, Afrikada Bari waxay xiriir la lahayd dadka ku nool Badda Cad, Hindiya, Gacanka Carabta, iyo Shiinaha. Afrikada Galbeed, waxay xiriir la lahayd dadyowga deggan Badda Cad. Waxaabase culimadu caddaynayaan in waayihii hore dhulka Saxaaraha ahaa uusan lama degaan ahayn oo uu biyo iyo dhirba lahaa ee waaya dambe dhulku abaaroobay una dillaacay lama-degaan, kolkaasna xiriirkii ka dhexeeyey labada dhinac ciriiri galay.

Xiriir ayaa ka dhexeyn jirey dadka Giriigga, dadka reer Rooma iyo dadyowga ku nool Afrikada Galbeed, waxaana sidaa muujinaya farshaxanka qolooyinkaa. Waxaa taariikhda lagu hayaa in ay sahamiyayaal reer Rooma ah ay ka gudbeen Saxaaraaga booqdeenna dalka Suudaan. Waxaana ka mid ahaa Jeneraal Syetonio Baolino oo gaaray webiga ku biyo-shuba Nayjar oo loo yiqiin Jir 50 sano N.C.K. Qarnigii u dambeeyey N.C. dhalashadiisii ka hor ayaa waxa tegey Nayjar Settiminio Flacco oo asaguna ahaa Reer Rooma, waxaase si wacan uga warramay Guilio Materno.

Baariis arkiyooloji ah oo lagu sameeyey dalka Xawsada iyo xabaalaha madax Ashaanti ahba waxa laga helay alaabo lagu sameeyey Rooma. Markay Roomi u talisay Afrikada Waqooyi, dadka Afrikaanka ahi waxay la xuquuq ahaayeen dadka dhaladka ah oo lama quursan jirin. Waxay dhigan jireen dugsiyada, waxay wax ka qaban jireen maamulka dawladda jago kasta, haddayba ka mid yihiin dhaladka. Yurub, waxa ku soo duulay qabaa'il fara badan oo la oran jirey Barbari, magacaas oo lagu tilmaamo Jangelinnimo. Qabaa'ilkaasi waxay baabi'iyeen Imberadooriyaddii Rooma, Yurub oo idilna waxa ka dhashay talisyo ku dhisan qabiil.

Haddaan barbar dhigno ninka reer Afrika ee ku noolaa Timbuktu ama Jenne iyo kan reer Yurub oo facihii dhexe ku noolaa Kambridje ama Ogsfoord, in uu wax dheeree mooyee shaki kuma jiro in uusan kan reer Yurub waxba ka dhinnayn faraqa u dhexeeya dadka reer Afrika iyo dadka reer Yurub. Qaabkaasi waa mid dhashay labadii qarni ee u dambeeyey, haddaynu aad ugu dhabbagalnana waxa inoo muuq-anaysa in horukaca teknoloojiyada ah oo ay Yurub gaartay uu yahay mid ka dhashay gacan ku dhigiddii khayraadka iyo ku adeegsigii dadka reer Afrika oo hantidooda iyo dhiggoodaba ay Yurub dhuuxday.

Haddaynuse ka dhigno in mitirka lagu cabbirayaa caqliga iyo kartida dadka in uu yahay horumarkooda teknolojiyada ah, waxay noqonaysaa inaynu niraahno dalka Giriigga, oo aqoontoodu sal u tahay tan maanta la haysto, ama dadka Carabta, way ka caqli yar yihiin dadka Maraykanka, Jarmalka, Jabbaan oo ayagu gaarsiisan maanta xagga teknoloojiyada heer aad u sarreeya. Taasina suurogal ma aha, waayo, dadkaasi mar bay adduunka xaggaa u sarreeyaan. Waxa halkaa nooga caddaanaysa in taariikhda adduunku is-beddesho dadka ku noolina hadba heer gaaraan, taasoo ina tusaalaynaysa in horukacoodu ama dib-u-dhacoodu uusan ku xirnayn marna caqligooda ee ay dhaliyaan sababo kale.

## BULSHOOYINKA REER AFRIKA GUMEYSIGA HORTII

Ilbax, haddaynu si kooban u qeexno, waxa la oran karaa bulsho leh sharci, farsugyo, caadooyin maamula xiriirka ka dhexeeya dadka, kana shaqeeya danaha ururkooda. Haddaba, dadka reer Afrika tilmaamahaasi ma ka maran yihiin?

Afrika taariikhdeedu waa mid fara badan; ka kooban waxyaabo isku jira, oo qoraalkeedu uusan sahlanayn, waxaana sidaa darteed, laga soo qaadayaa afar qaybood ayadoo la tixgelinaayo sida degaanku u samaysan yahay. Dad waliba waxay leeyihiin dhaqan iyo nidaam siyaasadeed oo la xiriira kana dhasha degaan-kooda. Dadka meelaha oomanaha ah deggani waa xoolo-dhaqato reer guuraa ah, noloshoodaasina waxay dhaxalsiisaa dhaqan iyo nidaam siyaasadeed oo ayaga u gaar ah meel kastaba ha deggenaadeene. Sidaa darteed, qaybaha loo kala saari karaa waxay noqonayaan sida soo socota: Afrikada Waqooyi, Afrikada Galbeed, Afrikada Bari iyo tan Dhexe iyo Afrikada Koonfureed.

## AFRIKADA WAQOOYI

Afrikada Waqooyi qarnigii 19aad waxay ku hoos jirtay, Marooko mooyee, taliska imberadooriyadda Cusmaaniyiinta, kaas oo bilaabmay 1517kii. Waxaase taariikh-deeda cusub laga bilaabaa qabsashadii Napoleone 1789kii. Markii Ingiriisku ka kacshay dalka Masar waxa la soo banbaxay hawlkarnimo iyo karti, sarkaal reer Albaaniya ah oo ka tirsanaa Ciidanka Turkiga, asaga oo hunguryaynaya in loo dhiibo taliska waddankaa, kaas oo la odhan jirey Maxamed Cali. Arrintaasi waxay Maxamed Cali u suuro gashay afar sano dabadeed kolkii loo magacaabay in uu noqdo Baas-haha Masar. Maxamed qayb weyn ayuu ku leeyahay taariikhda Masar, taasina waxa ugu wacan, asagoo gartay qiimaha teknoloojiyada iskuna dayey in uu ka dhigo Masar dawlad casri ah oo la tartami karta dawladaha reer Yurub, wuxuuna arrintaa ku daryeelayey danihiisa iyo kuwa qoyskiisa oo uu doonayey in uu halkaa uga dhiso talis-dhaxaltooyo oo ay maamulaan.

Waxyaabo badan ayaa waqtigiisii la sameeyey, waxaana ka mid ah, hagaajinta waraabinta beeraha, hirgelinta beeridda suufka, ardo dibedda loo diro, dugsiyo kala duwan oo la furo oo uu ka mid ahaa dugsi loogu tarjumo Af-Carabi buugaagta reer Yurub. Maxamed Cali, wuxuu u yeerey khubaro shisheeye ah oo la dhistay milleteri iyo ciidan badeed oo sita hub cusub, waxaas oo idilna waxay Masar ka dhigeen

dawlad xoog weyn leh. Wuxuu Maxamed Cali bilaabay siyaasad dhul-ballaadhsi ah oo gacanta u soo gelisay dalka Carabta, Suudaan, Jasiiradda Krete, Xeebaha Falastiin, Lubnaan iyo Suuriya. Ciidanka Masar waxa ka hor istaagay in uu galo Kostantinooboli dawladda Ingiriiska, Maxamed Calina wuxuu markaa doonayey in uu dhiso imberadooriyad Carabta oo madaxbannaan oo uu isagu u taliyo, taasise waxay ka horjeedday danaha Ingiriiska.

Maxamed Cali waxaa loo aqoonsaday in uu Masar ka noqdo Khedibe, taliskana ka dhaxlaan ilmihiisa, ayadoose ay ka tirsan tahay imberadooriyadda Cusmaaniinta, Maxamed Cali waxa taliska ka dhaxlay madax aan isaga u qalmin, lahayna kartidiisii. Dhaqaalaha Masar waxay gacanta u geliyeen dhiigmiiratooyin reer Yurub ah. Arrintaasi iyo furitaankii Biyo-mareenka Suweys ayaa kordhiyey danihii gumeystuhu ku lahaa Masar. Dhaqaalaha Masar oo ciriiri geliyey iyo arrimaha dalka oo aad loo soo fara geliyey ayaa waxay dhalisay dadka Masaarida oo ku kaca dawladda iyada ah oo uu hoggaaminaayo nin sarkaal ah oo la yiraahdo Axmed Curaabi. Waxa kacaanka baabi'iyey Ingiriiska oo Alexsanderiya bombo la dhacay Juulaay 1882kii, laba bilood dabadeedna qabtay Masar.

Aljeeriya waxa qabsaday Faransiiska 1830kii, kolkay aad u taagdarraysay imberadooriyaddii Cusmaaniyiinta oo waqtiyadaas dambe oo idil xukunkeedu oraah iska ahaa. Beyga Tuunis wuxuu kolkaa isku dayey in uu dhiso dawlad u dhiganta tii Maxamed Cali, wuuna ku guuleysan lahaa haddii hantida waddanka si wanaagsan loo maamuli lahaa. Dhibaatooyinkaa ka qabsaday xagga dhaqaalaha waxay u fududeeyeen Faransiiska in uu qabsado taliska waddanka. Madaxbannaanida dawladda Morooko ayadu waxay soo gaartay qarnigan aynu ku jirno.

## AFRIKADA GALBEED

Muddo ka badan 16kii qarni ee ka dambeeyey dhalashadii Nebi Ciise, ayaa dhaqaalaha iyo taariikhda Afrikada Galbeed waxa aad u saameeyey geddiska isaga tallaaba saxaaraha ee ka dhexeeya Afrikada Waqooyi iyo tan Galbeed, waxaana halkaa ka dhashay Boqortooyin waaweyn. Waddooyinka uu geddiskaasi mari jirey waxay ahaayeen saddex; mid marta dhinaca Galbeed, mid marta Bartamaha iyo tu marta dhinaca Bari. Dagaalkii qarnigii 16aad iyo kii 17aad dhexmaray Isbaanishka iyo Marooko ayaa wuxuu u sabab ahaa baabi'ii waddada Galbeed oo ahayd tan ugu qaayo weyn.

Baabi'ii Boqortooyinkii Muslinka ahaa (Maali, Song-hay) iyo xariirkii ka dhexeeyey waddammada Carabta iyo Afrikada Galbeed waxay is-hor-istaagtay faafiddii Diinta Islaamka oo markaa hakatay. Hoggaankii horumarinta siyaasaddana waxa qabtay qarammo ka dhismay Afrika gudaheeda oo haystay diimo Afrikaan ah.

Dahabkii laga qodayey Afrikada Galbeed oo ay Carabtu ka iibsanaysay dadka reer Yurub, wuxuu hunguri geliyey dadka reer Yurub oo iyagu bilaabay in ay la yeeshaan Afrika xiriir toosan, taasoo dhalisay in uu abuurmo xiriir geddis ah oo ka dhexeeya waddammada reer Yurub iyo Afrika, marna Badweynta Atlaantigga. Xiririrka aasaaskiisa waxaa lahaa Boortuqiiska, wuxuuna bilowday qarnigii 15aad, Boortuqiisku waxay Afrika ka iibsan jireen dahab, caag, kooka iyo dad aan fara badneyn oo ay geyn jireen Boortuqaal, si ay u addoonsadaan. Waxaa Boortuqiiskii tartan la soo galay dawlado badan oo Yurub ah, markii ay reer Yurub uga baahdeen Ameerika dad shaqaale ahna, ganacsigii dadku wuu kordhay, wuxuuna gaaray heer uu waxyeello aan la qiimayn karin u geystay dadka iyo dalka Afrika. Waxa Afrika laga qafaashay dad aan tiradoodu ka yarayn 100 malyan. Afrikada Galbeed, waxa qarnigii 19aad jirey qarammo fara badan oo ay ka mid ahaayeen:

BENIN. Benin waxay ahayd magaalo qarammadii ka dhashay hawdka Gini tan ugu caansan. Magaaladaas waxa qarnigii 15aad booqday dad Boortuqiis ah, aad bayna ugu bogeen. Dadkaasi waxay siiba la yaabeen weynaanta magaalada, waddooyinkeeda, sida nidaamsan oo ay u dhisnaayeen guryaheeda iyo nadaafaddeeda. Alaabada farshaxanka ah ee laga sameeyey Brons ayaa u marag kacaysa, ilbaxnimada dadka reer Beniin.

Inkasta oo aan la hubin soohdinta Beniin, waxa loo malaynayaa in taliskeedu gaarsiisnaa dhulka u dhexeeya Nayjar iyo Laagoos, dalka "Kukurukuda" tan iyo Nayjer, inkastoo ay awoodda Beniin soo yaraanaysay waxa dhab ahaan liicitaankeedu kordhay qarnigii 19aad, taasoo ay u sabab ahaayeen soo bixitaankii Boqortooyada Ooyo, ganacsigii dadka iyo soo gelitaankii hubka rasaasta ah oo gudaheeda ka dhashay dagaallo.

Nin Dhaj ah oo booqday qarnigii 18aad bilowgiisii wuxuu yiri isaga oo tilmaan ka bixinaaya dadka reer Beniin:

"Way dabci wanaagsan yihiin, aad bayna ilbax u yihiin". Waxa had iyo jeer qofka shisheeyaha ahi la dhici jirey sida maamuuska leh oo ay ku noolaayeen, taasoo ka dhalatay dhaqan iyo hab siyaasadeed oo soo jiraalkoodu gaarsiisnaa qarniyo fara badan.

## BOQORTOOYADA OOYO

Waxyaabihii is-raacshay Beniin waxa ka mid ahaa soo bixitaankii Ooyo oo ka dhalatay Galbeedka Nayjarka hoose, dalka Yurubada. Ooyo oo boqorka u taliya lagu magacaabi jirey Alafin, waxay xoogaysatay oo awooddeedu korodhay qarnigii 18aad oo ay bartamihiisa noqotay qarankii ugu awood sarreeyey dhulka u dhexeeya Webiga Foolta iyo Beniin, xagga Beniinna gaarsiisan Nayjar. Waxaana taliska dhulkaa u suuro geliyey ciidan fardooley joogto ah, oo ahaa caan, aadna looga biqi jirey. Taliska waxa Alafiinka la maamuli jirey Gole loo yaqaan Ooyo Meesi; oo iska hor taagi jirey in uu Boqorku taliska siduu doono ugu camal-falo, waxana ay lahaayeen awood urursan. Boqortooyadii Ooyo waxay heerkii ugu sarreeyey gaartay markay u talinayeen Boqorradii la oran jirey Agonglo iyo Geeso. Wixii ka dambeeyey 1818kii ayaa waxa bilowday liicitaankii awoodda Ooyo, waxana madaxa kor u soo qaaday Boqortooyada Daahomey oo iyadu ay horey u haysan jirtay, waxayna bilowday in ay weerarro u geysato Ooyo.

## BOQORTOOYADA DAAHOOMEY

Qarnigii 19aad waxa Daahoomey geesteeda Koonfureed u talinaysay boqortooyo ku dhisan nidaam cusub. Fikradda ay ku dhisnayd waxay ahayd in jiraalka qaranku ku xiran yahay dadka iyo Boqorka oo taageero isa siiya, waxana loo haystay in boqorku yahay ilaaliyihii barwaaqada iyo nabadgelyada dadka. Qarnigii 19aad waxay u talisay dhul ballaaran oo toos ahaan qaar boqorku u maamuli jirey, qaarna ay amarkiisa ku fulin jireen Wasiirro. Boqortooyadu waxay ku tiirsanayd ciidammada oo ay door weyn ka cayaari jireen dumarku. Daahoomey waxay lahayd qorsheyn u dhiganta tan dawladaha casriga ah. Wasiirka Beeruhu, wuxuu ku amri jirey dadka beeraleyda ah waxyaabaha ay beeranayaan, si ay u noqdaan waxa la soo saaro kuwo haqabtiri baahida dadka. Sannad walba waxa la tirin jirey dadka, khayraadka ka baxa dhulka, qalabka laga soo saaro Warshadaha, taasoo ulajeeddadeedu ahayd in hantida waddanka dadka la wada gaarsiiyo oo aanay qolana ka bursan qolada kale.

Hawlaha Boqorka waxa ugu weynaa in uu hantida waddanka ururiyo, dabadeedna dadka u kala qaybiyo, asagoo si gaar ahaaneed u daryeelaya danaha ciidammada.

## ISUTAGGA ASHANTIDA IYO FANTIDA

Qarammadii kale oo ka dhashay Afrikada Galbeed waxa ka mid ahaa Isutagga Ashantida iyo Fantida. Ashantidu waxay dhistay qaran aad u ballaaran door weynna ka cayaaray siyaasadda iyo geddiska, taliskooduna wuxuu gaarsiisnaa tan iyo Xeebta Caagga, Toogo iyo Daahoomey.

Nidaamka siyaasiga ah ee Isutagga Ashantida wuxuu ku dhisnaa habab isku jira ahna kuwa dabacsan. Boqortooyadu haddii si loo eego waxay ku tilmaanayd diinta oo uu Boqorku maamulayey, marna dhul-goosatada, haddii si kale loo eego maamul-keedu mid toosan iyo mid dadban intaba wuu lahaa, inkasta oo taliska boqorka gacanta ugu jirery dimuqraadiyad meesha kama aysan maqnayn.

Maamulka qaranku wuxuu ku taagnaa saddex tiir, kuwaas oo ahaa: Asent-eenaha, Gole la taliya Asentaanaha iyo Gole guud oo ay ku jiraan odayaasha iyo abbaanduulayaasha ka talinaayana arrimo kooban. Isutagga Ashantida waxa midni-madooda meteli jirey gambar dahab ah, wuxuuna qarnigii i9aad gaaray heer aad u sarreeya, waxaana laga hirgeliyey habab cusub oo lagu maamulo qaranka.

Wuxuu maamulka qaranku ka xoroobay ku tiirsanaantii qoyayka, ninkii karti leh ayaa u tartami karayey jagooyinka dawladda. Waxa la adkeeyey nabadgelyada, waxaana la sugay awoodda Boqorka markii la sameeyey ciidan Booliis ah oo joogto ku ah magaalo-madaxda "Kumaasi". Madaxda Afrikada Galbeed oo dhan way aqoonsanaayeen haybadda iyo awoodda Asenteenaha. Isutagga Fanti isaga aqoon weyn looma lahayn, waxaana arrintaas ugu wacnayd iyagoo midnimadoodu ayan adkayn sida tan Ashantida.

Dhulka Suudaan markii ay galbadeen Boqorradii Maali iyo Songhay, waxa muddoo dheer ka socday qas iyo qalaanqal. Dadyow fara badan ayaa ku looltamay qabsashada xukunka, waxaana dabadeed ka soo dhex baxay dadka reer Bambara iyo Fulaani.

Dhulka reer Bambara waxa ka dhashay laba Boqortooyo, kuwaas oo ahaa Segu iyo Kaarta, una taliyey Nayjarka Dhexe tan iyo qarnigii 19aad. Nin Ingiriis ah oo booqday Segu 1796kii, oo la oran jirey Mungo Park wuxuu yiri, "Aragga magaaladaas weyn, doonuaha faraha badan ee dhexmaraya Webiga iyo dhulka ballaaran oo agagaarkeeda ku yaallo oo la beero, intuba waxay muujinayaan ilbaxnimo iyo ilwaad quruxsan oo aanan haba yaraatee ku filnayn Afrika gudaheeda".

Dhaqdhaqaaqyadii Fulaaniga oo ayagu dhaliyey kacaan doonaya in lagu bed-delo habka nolosha ee waqtigaa, waxa ka dhashay qarannimadii Fuuta Tooro, Bondu, Fuuta Jaallon oo soo nooleeyey Diinta Islaamka oo ka mudatay xididdo dheer. Dhaqdhaqaaqaasi wuxuu ku fiday dhinaca bari, halkaasoo uu hoggaam-inayey nin waddaniya oo la oran jirey Cusmaan Dan Foodiyo.

Taariikhda Afrikada Galbeed ma aha mid halkaan lagu soo koobi karo, waxa laga soo qaaday in yar, waxaana laga soo tegey dadyow badan oo u dhigma kuwa halkan lagu soo sheegay, si loo muujiyo in ayan jirin dad reer Afrika ah oo iska hurday oo gumeystuhu u yimid in uu ilbixiyo.

## AFRIKADA BARI IYO TAN DHEXE

Waxaa qarnigii 15aad Afrikada Bari iyo tan Dhexe ka bilowday dhaqdhaqaaqyo daldoorsi ah oo socday qarniyadii 16aad iyo 17aad, keenayna isbeddel weyn. Waxa kaloo dadka reer Afrika ku soo biiray dad Caraba, kuwaas oo tartan la soo galay Boortuqiiska qarnigii 17aad. Waxaase halkan fiiro gaar ah loo yeelanayaa dadyowgii

degganaa meelaha Xeebaha ka fog oo haystay dhaqan iyo hab nololeed oo dhalad ah. Dadka reer Afrika waxay ku dhaqmi jireen hab dimuqraadi ah oo aan lahayn askar ama dad amarka khasab ku fuliya. Hoggaanka madaxtinnimadana waxa hayey dad waxgarad ah oo la doortay. Dhaqdhaqaaqyadii dal-doorsiga ahaa, fara gelintii ka timid dibedda, siiba xoogoobiddii addoonsiga ayaa ku kalliftay dadka deggan Afrikada Bari, in ay isu ururaan oo is-gaashaanbuuraystaan, si ay uga hortagaan dhibaatooyinka soo food saara, halkaasna waxa la bilowday dhaqdhaqaaqii ay ka dhasheen qarammada Afrika oo ayagu abuurmayey gumeysiga hortii, oo uu dhalashadooda hakiyey. Tansaaniya, waxa muddo kala duwan ka dhashay qarammo aan yarayn, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen, Agweenno oo ka dhalatay buuraha Bari oo ay dhiseen dad reer Baantuu ah oo lagu maamuli jirey talis awood urursan.

Shalambay oo dhalatay qarnigii 17aad oo uu aasaasay nin la oran jirey Mbega oo taliskiisu gaarsiisnaa Taanga, Dangaani iyo Maangu oo ku yaal Xeebaha. Dalka Ugaandha, qarnigii 17aad dabayaaqadiisii waxa sii liicayey Boqortooyadii Bonyooro oy u talinayeen boqorro la yiraahdo Biito. Waxaanay bilaabeen in ay xoojiyaan boqortooyadii dadka reer Ganda ee boqorrada madaxda u ah la oran jirey Kabaabka, waxana waqtigaa u talinayey Kabaaka Katareega. Dadka reer Ganda waxay kordhiyeen awooddii Kabaakaha, oo hortii taliska ay hayn jirtey madax kale. Awooddii kabaakaha oo ka sara martay tan madaxa kale, waxay waxtar u yeelatay midayntii ummadda. Waqtigii uu taliska hayey Kabaaka Katareega ayey Bugaanda dhulkeedii aad u ballaarisay, oo uu laba jibbaarmay.

Sababta ay Bugaandi uga lib heshay Bonyooro waxay ahayd iyadoo intii ayan dagaallada iyo dhul-ballaarsiga bilaabin dhistay bulsho midaysan, haysatana talis urursan. Boqorka iyo madaxda dadka ku hoos nool taliskiisu way isku xirnaayeen, xiriirkaasuna wuxuu ka imaan jirey ayadoo boqorku ku xushmeyn jirey madaxdaas xafiisyo si dawladda daacad ugu noqdaan, ama uu qoyskiisu la xididiyo madaxdaas. Sidaa ayaana dadkii isugu darsanaa uguna wada xirnaa madaxtooyada qaranka, arrintaasina waxay dhalisay xasillooni iyo nabadgelyo kordhisay awooddii qaranka una suurto gelisay in uu muto xididdo aad u dheer.

Awoodda Boqorku waqtiba kan ka dambeeya way ka soo kordhaysay, nidaamka boqortooyada oo hortii ku dhisnaa hab dhul-goosad ah kuna tiirsanaa qoysas wuu isbeddelay oo wuxuu isu rogay hab buquraddi ah. Boqoryooyada Buganda waxay hirgelisay maamul waxtar u yeeshay horumarinta dalka iyo dhismaha qaranka, ahna kan ugu taabbagalsan maamulyadii Afrikada Bari oo xagga dhaqanka iyo hiddaha dhistay ilbaxnimada aad u sarraysay. Maamulka dadka reer Kiinya wuu ka duwanaa kuwaa aan hore u soo sheegnay oo Kiinya ma ayan yeelan tan iyo muddo dhow madax awood sare leh, hase yeeshee, waxay ku guuleysteen ka hortaggii dhibaatooyinka bulshadooda oo ay maamuli jireen goleyaal tuulo, kuwaas oo ay ku jireen dadka waxgaradka ah, hawlahoodana ay ka mid ahaayeen:

b) In ay u tilmaamaan bulshada dhaqanka wanaagsan.

t) In ay ka taliyaan danaha guud ee tuulooyinka ay ku nool yihiin.

1. Xagga horumarka siyaasadda, waxa cad in aan la garab dhigi karin tan Buganda. Dadkaasi ma ahayn dad doonaya boob iyo qabsasho, sidaa darteed, ma ayan lahayn ciidan, taasina waa mid ay u badnaayeen dadka reer Afrika.

Dadka Gaallada ayagu waxay lahaayeen nidaam siyaasi ah oo ayaga u gaar ah. Gaalladu waxay lahayd Jamhuuriyad ku dhisan koox-faceed. Qolo waliba maalintay qaan-gaarto ayey Jamhuuriyadda soo geli jirtey, hawluhuna way u kala qaybsanaayeen kooxaha. Sidaa darteed, qof waliba qayb ayuu ka qaadan jirey dhismaha iyo talada ummadda.

Dadka Soomaaliyeed, inkastoo ay ku noolaayeen Dimuqraadiyad, taasoo la xiriirtay noloshooda xoolo-dhaqatada reer guuraaga ah, haddana waxa waddanka ka dhismay boqortooyooyin ay ka mid ahaayeen Saylac, Harar, Iyo Geledi. Dhulka Afrikada Dhexe, waxa ayana ka dhashay Boqortooyooyin dhowr ah. Dhulka u dhexeeya Kataanga iyo Saambiya, waxa ka talinayey boqorro madaxbannaan, mid walbana uu leeyahay magaalo-madax iyo Wasiirro ama Madax xukunkiisa fulisa.

Qarnigii 18aad iyo kii 19aad waxa ugu qaaya weynaa qarammadaas Kaseemba, oo dhalatay qarnigii 17aad, waxayna u talisay webigha Luwabuula labadiisa gebi dhulka ku yaalla oo xagga Koonfureed ka xiga Harada Mweeru. Boqortooyadani waxay bilowday qarnigii 18aad in ay qayb ka qaadato geddiska Afrikada Bari, waxana suuro gashay in ay geddiska Afrikada Bari u gudbiyeen dhulka Galbeed.

Ugu dambeyntii Boqortooyinkii Saambiya waxa ka mid ahaa tii Loosi, waxana aasaastay boqorad la oran jirey Mwambwa. Waxa Afrikada Bari iyo tan Dhexeba jirey boqortooyin kale oo fara badan oo qaarna qarniyo badan taariikhdoodu gaarsiisnayd, kuwana la dhintay raggii aasaasay.

## AFRIKADA KOONFUREED

Dhulka Afrikada Koonfureed waxa degganaa tan iyo facihii dhexe ka hor dad reer Baantuu ah oo fara badan. Dhulka hodannimadiisa ayaa u suura gelisay in ay tarmaan oo aad u bulaalaan, taasina waxay keentay in ay faafaan. Arrintaa waxa ka dhashay dagaallo ulajeeddadoodu ahayd dhul-ballaarsi.

Qarnigii 18aad gudihiisa haddaan eegno taariikhda Afrikada Koonfureed, waxaan arkaynaa in ay jireen qarammo waaweyn, lahaana nidaam Milleteri oo taabbagal ah. Qarammadaa nimankii aasaasay oo ku leh taariikhda Afrikada Koonfureed magac weyn waxa ka mid ahaa: Sabhusa oo madax u ahaa Swaasi (Iswoose). Swide oo madax u ahaa dadka loo yaqaan Ndewande, Dingiswaayo oo madax u ahaa Mthethwa iyo Shaka oo ahaa Saluu, ahna ninka ugu caansan.

Sabhusa waa boqorkii isu geeyey dadka reer Swasi u mudayna tiirkii aasaaska Boqortooyada Swaase. Shaka wuxuu ka mid ahaa ciidanka Dingisawaayo, markii aabbihii dhintay ayuuna qabsaday madaxtinnimada Suluu. Shaka wuxuu bilaabay inuu beddelo nidaamkii Milleteriga ahaa ee hore u jiri jirey, hirgeliyeyna mid cusub oo dhisay midnimo kana saaraya dadka qabyaaladda. Wuxuu ka dhigay ciidankiisa mid nidaam askareed leh joogtana ah. Nidaamkii koox-faceedyada ee ku jirey dhaqanka iyo hiddaha ayuu u rogay nidaam askareed. Dhallinyarada isku filka ah ee qaadanaysa tababarka milleteriga, waxay ku wada noolaayeen magaalooyin iyaga u gaar ah, wada noolaashadaasina waxay xoojin jirtey midnimada dhallinta. Qoladii uu qabsado, wuxuu aalaaba u deyn jirey madaxdoodaa, wuxuuse ka kaxaysan jirey dhallinyarada, kuwaas oo tababar ku qaadan jirey magaalooyin milleteriga u khaas ahaa. Shaka waxa u muuqatay in waqtiga foodda ku soo haya uu yahay mid adag. Nasiib-xumo Shaka oo ahaa ninka keliya ee is-hortaagi kara gumeysiga, waxa shirqool u sameeyey niman walaalihiisa. Wuxuu hagaajiyey hubkii hore loogu dagaallami jirey.

Nidaamkii milleteriga ahaa ee uu Shaka dhaqan geliyey lama uusan dhiman; dadyow fara badan ayaa Suuluuga ka bartay habka dagaallanka ee cusub, waxana Afrikada Koonfureed ka dhashay Boqortooyin u eg tii Shaka. Waxana ka mid ahaa Boqortooyadii Soshangaane oo ka dhisantay dhulka u dhexeeya Limboobo iyo Sambiisi. Waxa kaloo qarnigii 18aad mideeyey ummadda reer Basuuteo nin la oran jirey Mosheesh, oo ka dhashay qoyska reer Boqor ee Soota; waxa siyaasaddiisa ka muuqatay in uu ahaa nin indheer-garato ah, una bisil siyaasadda.

Wuxuu gartay in waqtigaasi uu ahaa mid la soo baxayey dhibaatooyin iyo dagaallo, sidaa darteed, wuxuu saldhig ka samaystay meelo ku yaal buuraha Bute Bute oo soo weerarkoodu uu adag yahay. Markuu xoogaystayna wuxuu u guuray Bosin halkaa oo uu ka aasaasay boqortooyada Basuuto. Haddaan u yeelanno fiiro gaar ah taariikhda Afrikada Koonfureed, waxa inoo caddaanaysa intuusan gumeystuhu dhexgelin oo uusan kala firdhin dadyowgaa uu halkaa ka socday isbeddel weyn oo ay sal u ahaayeen isutag iyo midaw. Qarammada maanta jira Afrikada Koonfureed maaha kuwa dhalashadoodu ay keentay ilbaxnimo laga bartay dadka reer Yurub, ee waa kuwa gumeysiga hortiis jirey oo uu baabai'iyey, dabadeedna soo dhacsaday ama weli u dagaallamaya midnimadoodii iyo gobannimadoodii.

## DHAQAMMADII AFRIKA

Ilbaxnimada Afrika, inkastoo ayan xagga teknoloojiyada horumar weyn gaarsiisnayn, waxay ahayd mid aad u qiimaynaysa dadnimada, lehna dhaqan, falsafad, diin, farshaxan iyo hiddo dhaxalgal ah.

Dhaqammada reer Afrika, waxaynu u qaybin karnaa kuwa qoraal ah oo ay sameysay Diinta Islaamka iyo kuwa Afrikada ku badan.

Diinta Islaamku waxay Afrika soo gashay muddo fog magaalada Xamar, waxa laga helay xabaal lagu aasay naag muslin ah oo magaceeda la yiraahdo Faadumo Cismaan, dhimatayna qarnigii labaad ee Hijriyada bilowgiisii, taasoo inoo cadday-naysa in diintu soo gashay Xamar intii Nebi Maxamed Ilaahay korkiisa nabad ha ka yeelee uu noolaa.

Afrikada Galbeed, sidaan hore u soo aragnay waxay weligeed la lahayd tan Waqooyi, xiriir geddis, waxaana ka dhashay qarammo waaweyn, kuwaas oo ahaa, Maali Songhay. Diintu waxay keentay af qoran, waxayna suura gelisay in ay dhalato dabaqad aqoon qoraal ku dhisan leh oo kaalin weyn ka gashay maamulka dawladda. Diintu waxay qiimo jebisay xiriirkii isir-wadaagnimada, waxayna noqotay xarig isku xira dadka ku nool dhulkaa. Madaxdii Gaana inkastoo ayan muslin ahayn, waxa u shaqayn jirey dad muslim ah, kuwaasoo u ahaa karraaniyeyaal. Maali madaxdeedu ayagu muslin bay ahaayeen, waddankase waxa weli xoog ku lahayd diinta Afrikaanka. Waqtigii Songhay ayey diintu aad u tabar yaraatay saameysayna sharciga iyo maamulka dawladda. Timbuktuu iyo Jenne waxay lahaayeen culimo caan ah oo qayb weyn ka qaatay qoridda taariikhda Suudaan iyo ka hortagga dadyowga soo fara geliyey midnimada iyo qarannimada dhulkooda.

Faafidda Diinta Islaamka, waxay gaarsiisnayd magaalooyinka waaweyn iyo sayladaha, miyigase kuma ayan xididaysan. Dhaqan kaloo qoraal ahi, wuxuu ka hirgalay Xeebta Afrikada Bari, waana ilbaxnimadii Sawaaxiliga, taasoo muslin ahayd aanse Carab ahayn. Ilbaxnimadaasi waxay lahayd af qoran iyo diin; waxayna u kala tilmaamaysay dadka xumaanta iyo samaanta. Ilbaxnimada Sawaaxiligu horeba way u jiri jirtey, waxase soo gashay nolol cusub oo aad isu beddeshay qarnigii 18aad, markaasoo la bilaabay in afka Sawaaxiliga ah lagu qoro af Carabi. Qoraalkii ugu horreeyey ee laga hayo afka Sawaaxiliga waa gabay la qoray 1728, wixii waqtigaa ka dambeeyey xagga suugaanta aad buu uga hodmay. Ilbaxnimadaasi waxay ku ekayd Xeebaha.

Magaalooyinka ku yaal Xeebta Soomaaliyeed, oo sidaan horeba u sheegnay diintu ugaba soo horraysay waddammada Carabta qaarkood, waxay ahaayeen meelo lagu barto diinta oo culimadu u soo aqoon doonato.

Afrika badankeeduse waxay haysatay dhaqan oraah ah oo xagga murtida iyo dhaxalgalnimada aan waxba u ogeyn dhaqammada adduunka kale. Laamaha ay waxbarashadu ka kooban tahay dhammaan waa la tixgelin jirey.

Dhallinta reer Afrika, waxa la bari jirey caadooyinka, dhaqanka, hiddaha, taariikhda, diinta, sharciga iyo farsamooyinka.

Caadooyinka, sharciga iyo diintu waxay tilmaami jireen wada xiriirka bulshada, iyo suugaanta. Taariikhduna waxay dadka ku beeri jirtey jacayl uu u yeesho dalkiisa iyo noloshiisa. Xagga Farsamada waxa la bari jirey farsamooyin qofku wax ugu taro dadkiisa iyo dalkiisa.


## AFRIKA IYO DUULLAANKII GUMEYSATADA

Inta badan taariikhda Afrika, waxa ku cad kulanno ay la yeelatay Yurub iyo Aasiya. Dalalka Afrika ee Waqooyiga iyo Bariga Afrika ayaa badanaaba ugu horreeyey xiriirka sifahaa leh. Inta kale sida badan wax xiriir ah oo dad aan Afrikaan ahayn ay la yeeshaan wuu yaraa. Weerarro dibedda kaga yimaaddaa oo lagaga guuleystaa maysan jirin. Afrika waxay ahayd adduunyo iyadu is ah, oo meeleysa imberedooriyado marna dhisma marna liica, oon Yurub iyo Aasiya sida xaal ka yahay waxba u ogeyn. Marka aan ka saarno fargalkii Boortuqiiska ee Angoola qarnigii 17aad, reer Yurub, Carabta iyo Hindidii ka ganacsan jirtay xeebaha Afrika, inta badan may soo dhaafi jirin maraakiibtooda intii qarnigii 19aad ka horreysay.

Wax cirib reeba oy ku lahaayeen ummuuraha siyaasadda Afrikaanka dadkaa shisheeyaha ahi ee ganacsadaa may jirin, dadka Afrikada Waqooyi ee halgan xooggan kula jirey qarammada aan Afrikaanka ahayn, marka laga bilaabo qarnigii 7aad, ee Carabtu soo weerartay, iyaga laftooda ayaaba duullaanno qaaday. Qarnigii 18aad intii u dhexeysay Imberadooriyaddii Turkiga, waxay ku fidday dalka Isbaanishka iyo Suuriya.

Qarnigii 16aad, Afrikada Waqooyi oo idil waxay hoos gashay taliskii Turkiga ee Cusmaaniyiinta. Dalka Masar gaar ahaan, wuxuu ahaa xoog dhexe oo muhiim u ah imberadooriyadda Turkiga, mararka qaarkoodna dalalka Carabta ee Galbeedka ayaaba taliska Qaahira hoos imaan jirey. Waxaad mooddaa in laysku khaldo dadkii Afrika laga dhoofshay ee Maraykan lagu addoonsaday, iyo taliskay reer Yurub Afrika ku yeesheen. Haddii ay madax Afrikaan ahi reer Yurub ka gadeen *"Maxaabiis Dagaal"*; kuwa gafaf galay iyo kuwo kaleba, taasi may ahayn mid wax u dhintay madaxbannaanidii siyaasadda madaxdaasi. Ninka marka iib loo gudbiyo ayuu addoon la gumeysto noqonayey, hase ahaatee, Afrika iskeed bay u madaxbannaanayd. Markaa Xeebaha Afrika meelayowga ay reer Yurub ka ganacsanaayeen tan iyo qarnigii 19aad, waxay u muuqanayeen takar maroodi guud fuushay oo kale. Afrika dhabbaheeda ayey toos u haysatay, iyadoon dan ka lahayn cadaadinta duullaanka kaga imaanayey. Maxaa haddaba, Afrika loogu soo duulay qarnigii 19aad dhammaadkiisii?

Afrika sidii uu shisheeyuhu u xukumi jirey (1830)



Xaalku sidan kor ku sheegnay waa iska beddeley qarnigii 19aad, bilowgii 1900dna si dhab ah ayuu isu beddelay. 1900kii markii la gaaray, Afrika badankeedii duullaan ayaa markii taariikhdeeda ugu horraysay dad shisheeye ahi ku qaadeen, gacantoodana dalal badani galeen. Masar oo lagu soo duulay 1798, ayaa misana 1807kii, Ingiriisku weerar uu ku soo qaaday jabisay, haddana Ingiriiska ayaa 1882kii qabsaday. Dalka Morooko oo mar u talin jirey dalka Isbeyn, ayaa Faransiiska iyo Isbaanishku kala qaybsadeen 1912kii. Meel kasta oo qaaradda Afrika ka mid ah reer Yurub, xeebihii intay soo dhaafeen ayay ooddii gudaha Afrika jebsheen, talis iyo gumeysina sugteen. Maxaa intaas oo dhan sababay? Maxay Afrika mar keliya uun u gaddoontay, markii ugu horreysay; maxayna muddo sidaa u kooban gumeysi u hoos gashay?

Taasi waxay inta badan u muuqataa dhibaato taariikheed. Dad badan ayaana isku dayey in ay jawaab toosan ka baxshaan. Inta badanina waxay fiiro siiyaan waxay Yurub u goosatay in ay Afrika qabsato qarnigii 19aad. Hase ahaatee, fiiro looma yeelan, tan kale ee ku dhafan ee ah maxaa Yurub u suuro geliyey in ay sidaas yeesho. Way fududdahay in layska liqo in Yurub markay doonto uun ay Afrika intay soo gasho dabadeedna qabsato. Sidaa awgeedna aan qaadanno uun wixii reer Yurub soo maan-qaaday. Taasi maaha mid aan garawsan karno. Balse hadda aan falanqayno isweydiinta ah "Maxay Yurub u goosatay in Afrika ay qabsato qarnigii 19aad"?

## HANTIGOOSIGA WARSHADLEYDA

Boqolkii sano ee 1880nnadii ka horreeyey, Yurub adduunka intiisa kale, waxay kaga hormartay habaynta dhaqaalaha iyo taabbogelinta Sayniska iyo Farsamada. Kacaankii Warshadeynta dalka Iglan ayuu ka bilaabmay qarnigii 18aad, waqtigaasoo ay dhismeen magaalooyin, dadka intii warshadaha ka shaqaynaysayna ka bateen kuwa fala beeraha. Warshadaha doorka ahi waxay bilowgii qarnigii 19aad u tabeen Beljimka, waqooyiga Bariga Faransiiska iyo Galbeedka Jarmalka. Dabadeedna waxay u fideen Imberadooriyaddii Habasberg iyo Waqooyiga Talyaaniga qarnigii 19aad dhammaadkiisii. Wakhtigaas isaga ah Yurub waxa maan-qaaday siday u taabi lahayd warshadaheeda iyo saylado ay wax u iib geyso.

Warshadaha reer Yurub 1890nnadii waxay soo saarayeen waxyaabahay bilowgii Kacaanka warshadaha soo saari jireen. Dharka, birta iyo xadiidka ayaana ugu badnaa; Warshadaha intaa soo saarana tiradoodii ayaa si door ah u kordhay, beretan hor lehna waa uu dhexmaray. Horumarka hannaanka wax loo soo saaro kuwa ugu waaweyn ee maalqabeenka ah ayaa kaga gacan sarreeyey kuwa yaryar, sidaa darteedna, waa ay kici jireen ama kuwa waaweyn ayaa liqi jirey. Beretan ayaa markaas dhexmari jirey warshadaha, mid waliba ay ku doonayso in ay iyadu tan waarta noqoto. Giddigood warshadaha waxa ku dhici jirey Busaarad geddis oo xilli xilli ah. Markaas ayaa dad badani shaqo waayi jireen. Wakhtigaas "Tartanka 1884-1885", Warshadaha Yurub Busaarad ayaa haysay, sidaa awgeedna, warshadleyda waxa u darnaa in ay jiraan ee warshadahoodu ayan ka xidhmin. Dawladahooda ayay kaalmo weydiisteen ku aadda in sayladda Qaranku canshuur sare u saaro kuwa shisheeyaha ah si loo eryo. 1880kii, Faransiiska, Maraykanka iyo kuwo kale oo reer Yurub ah ayaa iyana siyaasaddaasi meel-marshay. Taasi waxay joojisay habkii ganacsiga tartanka furan lahaa ee qarnigii 19aad. Waxaana beddelay fiirada ah "Gooni-sugashada hantigoosiga ah".

Fiirada in la ilaalsho Warshadaha Qaranka, waxay horseedday in loo abuuro warshadaha saylado kale oo gooni ugu sugan, taasina dal shisheeye oo la dego ayaa lagu helayey. Qarnigii 19aad dhammaadkiisii fikradaha laga qabay "Mustacmarad" waxay ahayd in ay noqoto meel ay dad reer Yurub ahi degaan sida Kanada, Awstraal-

iya, Niyuusiland ama Aljeeriya. Hase ahaatee, midda sifahaa leh warshadleydu ma doonayn. Isla markaas midda noocaas ah ayey ahayd tuu Bismaark oo Jarmal ahi yiri ma rabo. Misana isla waqtigaas ayaa waxa isbeddelay micnaha Mustacmarad. Waxaana loo rogay dal gumeysi ku dul noolaad ay reer Yurub lacag gashadaan, si markaas wax soo saariddu u korodho. Saylado cusub iyo irmaanno cusubina u abuurmaan. Warshadleydu dhul gumeyso ku dul noolaansho in la abuuro aad bay ugu guuxeen, dadkiina dawladahoodii ayey sidaas ka dalbeen.

## DANO DHAQAALE

Cadaadin xoog lihi waxay dawladaha reer Yurub kaga imaanaysay ganacsatada "waagaas tartanka" ay Afrika lacagi kaga baxday, si ay ku hanti-bursadaan, amase lacag amaaha baxshay, ama dhul ka kiraysatay Masar iyo Waqooyiga Afrika, ama kuwo lacagta ka helayey dheemanka K. Afrika iyo dahabka oo rabay in ay sii wataan. Intaas oo idil oo taageero ka helay xoogga moodka warshadleyda Yurub, si door ah ayey u tabayeen irmaanta moodka lacagta sayladaha reer Yurub oo qarnigaas 19aad si laxaad leh u korodhay una habaysantay si aan hore adduunku u arag. Baananka iyo kuwa amaahsha lacagta si jaban ayey u daymin karayeen, sidaa awgeedna geddisleyda reer Yurub markay lacag amaahdaan wakhti dheer ayey sugi karayeen iibgelinta alaabta ay ka ganacsan rabaan. Reer Yurub markaas si fidsan ayey u dhex-galeen arrimaha bulshooyinka Afrika ee dhaqaalaha ku aada. Kuwaas Masar iyo Afrikada Waqooyi ayaa ka mid ahaa, oo reer Yurub xeer u gaar ah iyo sad-bursi ku lahaayeen.

Afrika inteeda kale sidaas uma abbaarin moodka dhaqaalaha reer Yurub. Afrikada Galbeed, waxa hortaagnaa reer Yurub dad ama qarammo ahaa dillaaliin oo isu tegey gacantana ku dhigay siyaasadda iyo dhaqaalaha meelayowga Xeebaha ah, oo reer Yurub u diiddanaa in ay xiriir toos ah la yeesheen dalka gudihiisa. Afrikada Bari geddisleyda reer Yurub ayaa moodka u isticmaali jirtay in ay ku dhisto ganacsiga xeebta, Sansibaar iyo gudahaba. Koonfur Afrikana waxay reer Yurub ku hanti-abuurteen dheemanka iyo dahabka. Hantigoosatadaasi sifahaa ay Afrika ku gashay ayay dawladahooda ku cadaadinaysay in ay nabad ugu sugaan. Dawladaha reer Yurubse hadba waxay ganacsatadu rabto ume yeeli jirin. Taas waxa xukumayey hadba sida ay dawladdu aragto in qarankeeda dani ugu jirto. Waxaase intaas oo dhan ka weynaa oo reer Yurub ka hortaagnaa in ay xoog milleteri isticmaalaan, ciidammada iyo xoogga dawladaha Afrika. Dadka iyo ciidammada reer Afrika mid aan soo dhiirrigelinayn reer Yurub in ay duullaan ku soo qaadaan ayuu ahaa. Inkasta oo lagu cadaadinayey, dawladaha reer Yurub, kumay dhacayn in ay qaadaan duullaan kharaj kaga baxo, go'aankiisa aanay hore ka ogsoonaan karin.

Waxa kale oo ay dawladuhu ka baqayeen in ay baarlamaannadooda hor-geeyaan ummuuro sifahaas leh, iyaga oo ogsoonaa su'aalaha laga weydiin doono. 1880nnadii sifahaas ayuu xaal ku sugnaa, Faransiiska ha ahaado, Ingiriis ama Jarmalba ha ahaadee. Haddii qabashada Afrika macnaheedu ahaa dagaallo kulul iyo canshuuro kor u kaca, dadka baarlamaannada ku jira mid ay oggolaan lahaayeen may ahayn. Kooxo ayaase jiray rabay in Afrika la qabsado. Dadkuna waa iska rabeen in qaarkoodu fido, laakiin, ma rabin in ay lacag ka baxshaan. Sida runta ah may yeeleen haddiiba dawladuhu weydiin lahaayeen.

Sidaa darteed, dawladaha reer Yurub ee aanay baarlamaannadoodu ka dalbin in lacag loo siiyo qabashada Afrika. Sidaas awgeed, ayaa Ingiriisku Shirkadda Boqortooyada Nayjar, Shirkad Imberadooriyadda Ingiriiska ee Bariga Afrika iyo Shirkadda Ingiriiska ee Koonfur Afrika u fasaxay in ay qabsadaan qaybo ka mid ah qaaradda Afrika. Sidaa awgeed baa Jarmalku isna Shirkadda Jarmalka ee Bariga Afrika ku kallifay in uu qabsado Bariga Afrika, Shirkadda Heer Ludants-na koonfur-galbeed

Afrika, sidaa si le'egna Kaameruun, ayaa shirkadi u qabsatay. Boqorkii Biljimkuna King Leopold, isna isagoo ka madaxbannaan dawladda iyo baarlamaankaba ayuu Koongo qabsaday. Siyaabaha kale ee ay dawladuhu adeegsanaayeen waxa ka mid ahaa dalalkaas ay haysteen in ay ka qaadaan kharajka dhul-ballaarsiga iyo fididda. Taasise way adkayd, maxaa yeelay, wax dakhli ah oy dhul-gumaysiyadu lahaayeen 1880nnadii ma jirin. Mararka qaarkoodna Maraakiibta Ciidammada Badda ayey xeebaha iyo dhulalka webiyada leh, u diri jireen. Ingiriiskuna waxa uu adeegsan jirey askar Hindi ah, Boqorka Leopoldna askarta Biljimka. Siyaabo kale ayaa kharaj lagu raadin jirey si reer Yurub dagaallo Afrikaanka ugu qaadaan. Tan ugu fool-xumaydse waxay ahayd tii 1897kii ka dhacday Benin, markaas oo ay inta la dhacay khasnadihii farshaxanka reer Benin, loo qaaday Miyuusimyada ama Matxafyada Yurub iyo Maraykanka, dabadeedna lacagtii ka soo baxday lagula dagaallamay dawladdii Benin.

Haddase bal aan isweydiinno maxaa Yurub u suuro geshay in ay Afrika qabsato? 1880kiina dhul-gumeysiyo ayey ka hantiyeen Afrika, dagaallana waa holciyeen, hase ahaatee, waxay ku koobnaayeen xeebaha Aljeeriya iyo Koonfur Afrika oo ay si fidsan u degganaayeen maahee; labadaas dalna dagaalladii ay ka galeen dhib xoog leh ayaa ka soo gaaray. Faransiiska waxay ku kalliftay in uu Aljeeriya sannadkii 1847kii, ciidammo gaaraya 100,000. Koonfur Afrika Ingiriiska 1/10 ciidammadiisa ayuu si joogto ah ugu hayey dalkaasi. Ummuurahaasi waxay noqdeen dar aan dhiirrigelinin dawladaha reer Yurub in ay xeebaha ka gudbaan. Reer Yurub waxay ka cabsi qabeen, in ciidammada Afrika ay jabshaan, xataa haddii ay guuleystaan khasaare iyo kharaj laxaad lihi in uu ka soo gaari doono ayey ogsoonaayeen, kaasna ma u jeedin in ay baxshaan.

Intii ka horreysay shirkii Berliin — 1863 ayaa Imberadoorkii Itoobiya xiray Danjirayaashii Ingiriiska iyo Faransiiska. 1867kii ayaa Ingiriisku diray Ciidammo soo daaya labada Danjire. Markii arrintaasi u dhammaatay weliba iyadoon dadku la dagaalin Ciidammadaasi Ingiriiska waxa kaga baxay sagaal malyan oo Gini. Taasina mid ay jeclaayeen dadka iyo baarlamaanka Ingiriiska may ahayn.

## LIICIDDII ASHAANTIGA: 1878kii


1874kii, gudaha Afrika ayaa guuto Ingiris ahi gashay, si markaan ay u taabaan Asante Asante markuu sannadku ahaa 1826kii ayey ciidan Ingiriis ah jebsheen, abbaanduulahoodiina dileen. 1863kii Ciidammada Asante ayaaba ilaa xeebta soo gaaray, Ingiriiskuna dhufaysyada qalcadihiisa ayuu ka daawanaayey. Arrinta hore waxay ku kalliftay Ingiriisku in uu degdeg quursi leh ugula tegin dagaal bulshooyinka reer Afrika.

Cabsi uu qabo awgeedna, 1863kii, dagaal muu soo kicin. 1874kii, ayuuse laba kun oo Ciidammada Ingiriiska ah oo hub cusub ku gaashaaman, iyo kuwo kaloo reer Fante ah ayaa galay Asante, magaalo-madaxdoodiina qabsaday "Kumasi". Inkasta oo Ingiriisku guuleystay misana markay Kumasi gubeen, dib ayey xeebta ugu laabteen. Xooggii iyo geesinnimadii reer Asante Ingiriiska may ku dhiirrin in ay dagaal dambe iskaga hor yimaadaan.

## DHIRBAAXADII ISANDHLWANA 1878

1878, Ingiriisku dagaal ayuu ku qaaday xoog Afrikaan ah oo Suluuga uu kukumayey Ketewayo. Taliyaha ciidanka Ingiriisku aad ayuu isugu kalsoonaa, ciidankiisuna waxa uu ku gaashaannaa hub cusub, hase ahaatee, Sulugu si dhakhso leh ayey u dhaqaaqeen. Ciidammadii Ingiriiska goobtii dagaalka "Esandhaalwana" waa lagu dabar gooyey, intii nolol u guntayteyna nataal ayey u baxsatay. Ingiriiskii dabadeed

ciidammo ayuu soo urursaday, ugu dambeystiina reer Sulugii baa la jabshay. Ingiriiska waxa uu dagaalku ku joogay afar milyan oo Gini iyo kumanaan aadamiya oo labada dhinacba ka baxay. Dagaalkii labaad ee Ingiriiska iyo xoog Afrikaana dhexmaray wuxuu ku ekaa sannadkii 1882kii, markaasoo Ingiriiska oo wata 40,000 oo askari, ciidan u dhigma oo Masaari ah ayey is-heleeleen. Masaarida Qalcadda Tel-El-Kebir ayaa lagu jabshay. Laba sano dabadeed ayaa Ingiriisku ciidammo u diray Suudaan, si Mahdigii loola dagaallamo. Hase ahaatee, Jeneraal Gordon oo Ingiriis ahaa ayaa lagu dilay, ciidankiisiina waa la ciribtiray. 1896kii ayaa misana Ingiriisku guuto kale Suudaan u diray, laakiinse Ingiriiska ayaa ku guuleystay. Si dhib yar loogama guuleysan Afrika intii tartanka ka horreysay.



Faransiisku isna dhibaatooyin laxaad leh ayaa ka soo qabsaday in ay xoog milleteri wax ku meel marshaan. Golaha Guud ee Faransiiska ayaa oggolaaday in Tuunisiya abbaansiga Faransiiska hoos timaaddo 1881kii, hase ahaatee, dawladdii waa lagu kacay markay ciidan 50,000 oo askari ka kooban Tuunisiya u dirtay, si ay u damiso gadoodkii reer Tuunis. Isla markaas dawladdii Faransiiska waa lagala noqday kaalmadii loo siiyey dhismaha jid tareeneedka isku xira Senegaal iyo Nayjar, kaddib markii la ogaaday in lacagtii dano milleteri loo isticmaalay. Sidaa darteed, intii ka horreysay kala qaybsiga reer Yurub way ka cabsi qabeen in ay hore u galaan oodda ubucda Afrika, maxaa yeelay, weli may taabin tab ama xeelad ay gudaha Afrika kaga dagaallamaan oo iyaga raalli gelisa. Markaas waxay isku koobeen xeebaha iyo webiyada oy taliskooda sheeganayeen.

## KACAANKII HUBKA


Hase ahaatee, reer Yurub waxa si dhakhso leh ugu furmay marin ay ku galaan Afrika. Marka laga bilaabo 1860kiina hubka ayaa horumar hor leh loo geystay. Hubka gacanta oo bunduq ka mid yahay ayaa si habsan loo sargooyey dhuuntiisa si uu u dhug wanaagsanaado.

Rasaasta qareexada iyo habka cabbaynta banduuqa ayaa iyana la hormariyey. 1870kii waxa kale oo la hormarshay dhugta xabbadda iyo masaafada ay wax ka dili karto. 1870kii banduqii waxa lagu kordhiyey calool. "Magazina" si xabbado badani ay uga dhacaan, waxaana markii ugu horraysay la isticmaalay 1880nnadii. 1880nnadii waxa la soo saaray bunduq lagu magacaabo "Mashingan" ama bunduqa xabbadihiisu iska dabadhacaan. Faransiiska kooda oo ah "Mitrailleuse" iyo kan Maraykanka oo ah "Gatling gan". Labada noocba waa cuslaayeen, waanay jabi jireen. 1889kii waxa uu soo saaray nin Maaksim ku magac dheeraa Mishingan halis ah, oo kan maanta la isticmaalo waxba ka duwaneyn. "Mashingan" kaas oo markii dambe loo baxshay Maaksim, waxa uu noqday hubkii ugu halisaysnaa ee qof soo saaro, taasina waxay dhalisay, in ciidammadu si door ah u beddelaan farta iyo hannaanka dagaalka.


Intii u dhexeysay 1860 iyo 1890kii reer Yurub warshadahoodii waxay soo saareen hubab cusub. Guutooyin ciidammadooda ka mid ahaa, Afrika ayaa loo soo diray, si hubkaas loogu tijaabiyo. Ciidankii Asante loo soo diray 1874, waxay siteen banaadiiq cusub, madfac fudud iyo gatling-gan. "Mishingan" ka halista ah waxa markiiu ugu horreysay lagula dagaallamay reer Meteble 1893, inkasta oo reer Ugaandhana mid ka mid ah lagu isticmaalay. Ciidammada duullaanka soo qaadayey banaadiiq surgooyin cusub leh ayey tiro badan u siteen. Xoogaggaa soohdinta Afrikada Galbeed ee Ingiriisku 1897kii habeeyey, wuxuu ku gaashaannaa "Mishinganno" iyo madaafiic aad iyo aad u tiro badan. Xataa Ciidammada reer Yurub shan iyo tobankii sano ee ku xigay, may ku dagaal gelin "Mishingaan" tirada le'eg. 1896kii ciidankii Shirkadda Boqortooyada Ingiriiska ee Nayjar, wuxuu galay "Biida", isagoo ku gaashaaman madfac, banaadiiq iyo mishingaan.

Magaaladii Biida bam ayay la dhaceen iyagoo ka ridayey bunduq bir-lab ahaa oo markaas cusbaa; ciidankii reer Nuubna "Nupe" waxay ku qaseen rasaas iyo mishingaan. Taliyaha Ciidammada reer Yurub ma ayan rabin in labada ciidan qof iyo qof gacanta isula tagaan hadday u suuro geleyso. Taasna "Mishingaanka" ayaa u hirgashay. Si u kas ah ayey ciidammada Afrikaanka uga hor-geeyeen farsamada reer Yurub. Inta badanse ciidammada Afrika soo weeraray dad Afrikaan ah ayey ahaayeen, reer Yurubna maamulka iyo hubka ayey hayeen. Xooggii hubka reer Yurub markuu kordhay, qiimihii dagaalka kaga baxay ayaa yaraaday. Niyaddii ciidammadooduna waa ay samaatay, waxayna u haliilayeen, dagaallo ay ku qaadeen Ciidammada Afrikaanka.

Sidii uu gumeystuhu Afrika u xukumi jirey (1891)



Sidii uu gumeystuhu Afrika u xukumi jirey (1914).



## AFRIKA ISKU DUUBNI LA'AAN BAA JEBISAY

Bulshooyinka Afrika si aan habaysnayn bay u kala qaybsanaayeen, taasoo shisheeyaha fulinta danahiisa u dhib yaraysay. Qarnigii 19aad Afrika, waxa ka holcay Kacaanno ku aaddan diinta, siyaasadda iyo qaar milleteri ahba. Bilowgii qarnigii 19aad Galbeedka Suudaan, waxa ka socday jahaadyadii Cusmaan dan Fodio, iyo kuwii Samori Toure oo ku ekaa dhammaadkii qarnigii 19aad. Labadubana waxay dhaliyeen isbeddel siyaasadeed oo ku fiday dalka Nayjar iyo dalalka ka dambeeyaba. Bariga Suudaan Kacaankii Milleteriga ee Maxamed Cali Bashaa, jahaadkii Mahdiga iyo dhaqdhaqaaqii ka dambeeyey ayaa iyana isbeddel fidsan ku abuuray soohdintaasi. Xagga Koonfurta dagaalladii "Mfekane" iyo qarammo milleyeri ah ayaa ku fiday. Isla qarnigaas waxa soo galay dad hub iyo rasaas wata oo liciifiya halgankii kacaannadaasi. Tiradii qarammada Afrika jirtayna way tarmeen. Dhammaadkii qarnigaas qaar ka mid ah qarammada cusub ee waqtigaas dhismay xasillooni ayey heleen, qaar kalena dhul-ballaarsi ayay ku kaceen. Taasi waxay dhalisay in qarammada Afrikaanku iska horyimaadaan kalsoonina aanay ka dhexeyn ee cabsi iyo cadaawad ay ku daris wadaagaan. Gumeysatadu arrintaasi way ka faa'iideysteen, waxaanay itaalsadeen in ay iska hor-keenaan bulshooyinka iyo qarammada Afrika. Taasi waxay dhintay xooggay ummadaha Afrikaanku iskaga difaaci lahaayeen cadowga shisheeyaha ah duullaankiisa, waxaanay soo dedejisay Afrika sifihii lagu qabsan lahaa.

## INGIRIISKA, FARANSIISKA IYO MASAR

Ingiriiska iyo Faransiiska labaduba dano dhaqaale iyo mid dhaqan ayey Masar u lahaayeen. Dalka Masar qaybo ka mid ah ayaa imberadooriyadda Turkiga ahayd. Faransiisku wuxuu rabay in ay Masar ka goosato Turkiga. Ingiriiskuna ilaa iyo 1870kii, wuxuu rabay in uu Masar iyo dalalka Carabta ee kaleba maamulkooda sugto, Suldaanka Turkigana taageero.

Ingiriisku siyaasaddiisii la xiriiraysay Masar way isbeddeshay, kaddib markii awooddii Suldaanka Turkigu ay liicday. 1860kii furitaankii Biyo-mareenka Suweys, waxa uu Ingiriisku u arkayey toobiye aad u muhiim ah, iskuna xiraya Yurub iyo Hindiya, suura geliyeyna in ciidammo dalka Ingiriiska si dhakhso leh looga keeno.

Ingiriisku wuxuu ku sii xoogeystay Masar, kaddib markii uu Khadiif Ismaaciil ka iibsaday Biyo-mareenka qaybtii Masar ku lahayd. Masar ayuu Ingiriisku dabadeedna dhinac saaray, si ay Turkiga uga goosato. Ingiriiska iyo Faransiiskuna waxay isla garteen in ay wadaagaan Masar danaha ay ka fushan rabeen.

1876kii kaddib markii uu Khadiif Ismaaciil kacay, Masar, waxay u gacan gashay Ingiriiska iyo Faransiiska. Faransiiska iyo Ingiriisku waxay ku dirqiyeen Khadiifka laba nin oo dawladahooda ka tirsani in ay maamul dhowraan moodka dawladda Masar. Dhaqaalihii Sifahuu u dhigmay, iyo canshuurtoo kor u kacday, waxa necbaystay beeraleydii, shaqaalihii, ciidammadii iyo dhul-goosatadii. Ummaddii reer Masarna way ku kaceen dawladdii Khadiifka, iyadoo hoggaanka uu qabtay Gaashaanle Sare Curaabi Baasha. Ingiriiska iyo Faransiisku dawladdii Khadiifka ee caroog ay afuuftaan u ahayd ayay taageereen. Curaabi Baashaa markuu isku dayey in uu Biyo-mareenka Suweys taabana Ciidammadii Ingiriiska ayaa dagaal dhexmaray, Qaahira ayey qabsadeen markii Ciidankii Curaabi la jabshay 1882kii.

Qabsashadii Masar, waxyaabahay dhalisay: Dawladda Ingiriisku markay Curaabi jebisay waxay filaysay in ay ka baxdo Masar. Hase ahaatee, markay u muuqatay inaan xiisaha iyo dareenka waddaniga ah ee ka oogmay Masar aannu

damayn, dawlad dadku raacsan yahay oo misana danaha Ingiriiskana fulisa aanay dhismi karayn, ayaa Ingiriisku maamulkii Masar isagu sugtay. Taasi Faransiiskii ayay niyad-jab ku ridday, waxaannu goostay in uu meela kale Afrika isna si dhac ah u qabsado. Ingiriiska mar hadday Faransiiska colloobeen, Jarmalka ayuu taageero ka raadsaday. Jarmalka oo isna dano ka lahaa Galbeedka Koonfur Afrika, Bariga iyo Galbeedka Afrikaba Ingiriiska way isku af-garteen. Dawladdiisii Koonfur Afrika Ingiriisku waxa uu ka dalbay in ay gacanta kala baxdo Galbeed Koonfur Afrika, oo Luderist oo Jarmal ah u daayaan, Danjiraheeda Sansibaarna waxay wargelisay in Karl Betes (oo Jarmal ah) loo oggolaado in uu heshiisyo la galo madaxda Afrikaanka ee Xeebta. Isla markaa dalka Koongo, waxa boqorkii Leopold u hawl-yareeyey in uu dhulkaasi xukunkiisa ku fidsho, tartankay isku hor-joogeen Faransiiska, Jarmalka, Ingiriiska iyo Boortuqiiska. Tartankaasi dhexmaray dawladaha reer Yurub, waxa uu marin u noqday cadaadiskii kaga imaanayey ganacsatadii iyo hantigoosatadii ku baaqaysay in dalalka Afrika la qabsado.

## GEESKA AFRIKA IYO WEBIGA NIILKA

Ingiriisku Masar intaas wuxuu ugu daray in ay gacmaha kala baxdo dalkay xukun sheegan jirtey oo ku sinnaa ilaa Kiinya. Taasi waxay albaabka u furtay dalal Afrikaan ah oo aad u fidsan ay gumeysatadu hunguriyeyso. Talyaanigu Eriteriya ayuu galay, Faransiiska, Talyaaniga iyo Ingiriiskuna Soomaaliya ayey kala qoqobeen. Ingiriisku markuu Masar qabsaday, waxaa uu misana u hanqaltaagayey in uu hantiyo webiga Cad ee Niilka. Kaddib markuu dareemay Faransiiska iyo Jarmalku in ay quud-darraynayaan soohdintaasi ayaa Ingiriisku qabsaday Kiinya iyo Ugaandha.

1885kii reer Yurub markaas uun bay bilaabeen in ay u gudbaan gudaha Afrika, iyagoo iib gelinayey banaadiiq, wararna urursanayey, heshiisyana la gelayey madaxda Afrika. Mararka qaarkood waxay bahaysanayeen qarammada cusub ee xoogga leh oy banaadiiq ka gadayeen; marar kalena, banaadiiq ayay ka galeen qarammadii hore iyo beelaha Afrikaanka ee qarammada cusubi ay rabeen in ay liqaan. Faransiisku dalka Senegaal qarammada oo idil ayuu midba mar dhabarka saarayey, mar Tukulor marna Banbara oo is-hayey. Marna wuxuu taageerayey Samori Toure bulshooyinka ka soo horjeeday ee Sikaaso. Ingiriiska Laagoos degganaa waxa uu isku dayey in uu hadba bulsho raalli geliyo marar kala gooniya. Shirkadaha Boqortooyada ee Nayjar hub iyo rasaasba waxay ka gadday Amiirradii Waqooyiga Nayjeeriya iyo kuwii ka soo horjeedayba. Shirkii imberadooriyadda Ingiriiska ee Bariga Afrika iyo Lugard waxay iska horkeeneen Boqortooyadii Bugaandha iyo tii Bunyoro, madaxdii Bugaandha ee muslina ahayd iyo kuwii Bugaandha ee Kiristaanka ahaa, Kiristaanka brootestanka ahaa iyo kuwii Kaatooligga ahaa.

Wakhtigaasi reer Yurub dab ayey shidayeen kolba meel ay ku oogayeen, iyagoo dal Afrikaana bahaysanayayey marna mid kale abaansanayey, iyagoo isla mar ahaantii xididdaysanayey iskana raadinayey in Afrika qabashadeedu ay dhib yar tahay. Waxaanay iyaga u ahaatay markii ra'yiga dadweynahoodii u guuxay in Afrika lagu duulo. Hase ahaatee, Afrika xooggeedii waxa uu weli khatar gelinayey reer Yurub. Afrikada Bari 1888kii waxa Ingiriiska iyo Jarmalka lagu qaaday Kacaankii "Bushiri" oo ciriiri gashay. King Leopold isagana weerar ayaa dadkii reer Koongo ku soo qaadeen. Samori Toure isna wuxuu xannibay marinkii Faransiisku ku lahaa webiga Nayjar, madaxda Afrikada Barina Ingiriisku taliskuu Harada Nayaasha ka sugo is-lahaa ayaa bay diideen. Dalalkaasi dabka ku shiday reer Yurub waxay ahaayeen dad haystay hub cusub oy ka iibsadeen Ingiriiska, Jarmalka, Biljimka, Faransiiska iyo Boortuqiiska. Reer Yurub waxa u caddaatay in tartankay ku jireen u

suura gelin karayn in ay qabsadaan reer Afrika haddii hubkay haysteen la mid yahay kooda. Sidaa darteed, waxa reer Yurub 1889-90kii qabteen shir lagaga mamnuucay reer Afrika loo iib-geeyo bunduqyadii hore ee ku magacawnaa "Dane" gans. Hubkaas bulshooyinka Afrika mamnuucay wuxuu dhaawacay kacaannadii weerarka gumeysatada lagaga hortegyey. Hase ahaatee, laba meelood ayaanu ka hirgelin joojintii hubka oo kala ahaa Itoobiya iyo Morooko. Taasina waxay suuro gelisay in markii ugu horraysay ee dawlad Afrikaan ah iyo mid ka tirsan gumeysatada oo hub isu dhigma wata ay is-haleeleen. Goobtii dagaalkana Talyaaniga lagu ciribtiray 1896. Marooko markuu Faransiisku isku dayey in uu qabsado 1908, waxa uu keenay taariikhda ciidammadii ugu fara badnaa ee Afrika loo soo diray, oo weliba dirqi ku qabsaday qayb yar oo Morooko ka mid ah. Dalalka Afrika intooda kale hub gadashadii waa laga joojiyey.

Isla markaasi Yurub waxa ku fiday olole ay ula magac baxeen "Ilbixin", fiiradaasi oo ku arooraysay in Yurub xaq u lahayd in ay Afrika qabsato oo ay waajib ku tahay ilbixinteedu. Dagaalladii reer Afrika ay isku hortaagayeen weerarradii gumeystayaasha ayey u dhigeen in Afrika tahay meel dagaal uun iskula jirta oon is-xukumi karin.

Kadib markay reer Yurub hub cusub hantiyeen, waxay ku dhiirradeen horna ka rimeen in ay Afrika qabsan karayaan. Dadka reer Afrika ee ay ka mid ahaayeen Asante, Mahdigii, iyo Zulugu wacdarahay ku dhigeen ciidammadii reer Yurub, way is-illoowsiiyeen.

Dadka reer Yurubna waxay u qaateen gacanta sare ee ciidammada reer Yurub yeesheen caddaantoodu in ay sabab u ahayd ee aanu bunduqa "Maximku" gacanta ugu weyn ee dagaalka ahayn. Waxay isku khaldeen awooddii hubka ay haysteen iyo tan qofku leeyahay. Qarnigii 19aad bartamihiisii waxay reer Yurub qabeen inaan "Jinsiyadaha" adduunku is-dhexgeli karin; waxaanay u kala qaadeen qaybo ay iyagu isugu sarraysiiyeen.

Qarnigii 19aad dhammaadkiisii, markaas oo ay Yurub gacanta ku dhigtay hub cusub, waxay bilaabeen in ay ka hadlaan sarraynta jinsiga cad, oo xaq u siinaysa in uu Afrika qabsado. Kala duwanaanshaha jinsiyada oo markii hore ay ku doodayeen inaan lays dhex gelin karin, ayey markaan u rogteen in aan dadka Afrikaanka ah xukunka dalalkoodii hooyo laga qayb gelin ee lagu addoonsado.

Fiirooyinkaasoo idil ee hor-dhacayey in Afrika lagu duulo, waxay saldhig u noqdeen in reer Yurub ay isu bahaystaan tabtii loo hantiyi lahaa. Dawladaha reer Yurub markay isu diyaarinayeen weerarka dalalka Afrika, waxay u baahdeen lacag. Hantigoosatada danaha ku lahayd Afrika, dawladahooda ayay cadaadis ku wadeen, hase ahaatee, waxa la rabay in dadweynuhu baxsho lacagta. Taasi waxa si been been ah dadweynaha loo geliyey markii laga raariday in lacag la rabo dadweynaha reer Yurub kula dagaallamaan geddiska dadka, dadka reer Afrikaana lagu ilbixiyo. 1890kii Baarlamaanka Jarmalku lacag ayuu dawladda u oggolaaday, si ay ula wareegto Tansaaniya. Isla markaas sifahaasoo kale ayuu Ingiriisku ku helay lacag uu ku qabsado Kiinya iyo Ugaandha 1893.

Guusha reer Yurub ay gaareen qarnigii 19aad dhammaadkiisii waxay ahayd mid ayagoo isku duuban ay Afrika ku qabsadeen. Waxay isla meel dhigeen qaybta qolo waliba ay qabsi u qoondaysatay, waanay ku heshiiyeen in ay isugu ciidmaan Afrikaanka ku kaca. Inta badan qarammadii Afrika kuwii waaweynaa iyo kuwii yaryaraaba gooni-gooni ayaa loo jebshay loona muquuniyey.

1890kii Segoy, magaalo-madaxdii imberadooriyaddii Tukulor, ayaa Faransiisku gacanta ku dhigay. 1881-1898 Samouri Toure, dib ayaa Faransiisku u riixay, kaddibna ciidammadiisii yaa is-dhiibay.

Imberadooriyaddii Moosi ee Ofagadougou, Faransiiska ayaa 1896kii riday, sidoo kale ayaa Ingiriisku isla sannadkaasi Asante u qabsaday.

1892-1894 kaddib markii si xoog leh la isaga hor-yimid ayaa Daahoomi la qabsaday. 1892 IJEN, Boqortooyadii ka taagnayd ayaa Ingiriisku riday. 1896 ciidankii reer Nuube ayaa Ingiriisku jebshay, magaalo-madaxdii Ilorina galay. 1897nna Benin ayaa dhacday. Intii 1901-1903 u dhaxaysay dagaallo halis ah ayaa Ingiriisku ku jebshay Amiirradii Waqooyiga Nayjeeriya kaddib markii Kontagora, Yalaru iyo kano la isku haleelay. 1898kii goobtii Omdurmaan waxa lagu jebshay ciidankii Khaliifka. 1891 ilaa 1901 Ingiriisku wuxuu sugtay Bugandha. Tansaaniya raggii la socday "Bushir" waxa la jebshay 1889-90. Jarmalkuna Siki, oo watay ciidammo reer Nyamwesi ah iyo Meli oo reer Jagga watayba ayuu is-hortaagay. Boqorkii Mkwakwa ee reer Hehe kaddib markuu si geesinnimo leh u dagaallamay ayaa 1898 la jebshey. 1893kiina reer Ndebele ayaa si naxariis-darro leh Ingiriisku u xasuuqay. 1895, Gunguunhane, Boqorkii reer Moosambiik ee Boortuqiiska ciriiri geshay ayaa isna la af-gembiyey.

Wakhtigaas reer Yurub ay duullaanka soo qaadeen waxay ka meelaysteen kala qaybsanaantii Afrika, waxaanay bahaysteen qarammadii Afrikaanka ahaa ee u heeganka ahaa in ay walaalahood dagaal ku qaadaan. Hase ahaatee, inta badan markii kacaannadu ka oogmeen Afrika, kaalmo kamay helin bulshooyinka reer Afrika. Waxa hubaal ah in Afrikaanka qaarkood ku jireen ciidammada iyo booliiska gumeysatada iyagana daba-joogeen. Inta badanna waxay sidaas u yeelayeen iyagoo rabay in ay u muuqdaan kuwa libaysta. Gumeystayaashu markaan faa'iidooyin ayay qabeen horraantii ka maqnaa. Waxa u suura gashay in ay is-gaarsiinta cusub ku adeegsadaan; War-laliyuhu wuxuu awood-siiyay in hadba halkii lagaga kaco ay waqti habboon ku duulaan. Qalcadaha iyo dhismooyinka adagi waxay u suura gelsheen in ay heleen saldhigyo ay ka dagaal galaan. Dakhliga dhul-gumeysiga ka soo baxayey wuxuu awoodsiiyay in ay weerarro u geystaan bulshooyinka Afrika.

Si kastaba haw-haysteen hub cusub e, waxa weli hortaagnaa kacaan ay damin kari waayeen. Dalka Soomaaliyeed Kacaankii Sayidku wuxuu ahaa mid aad uga libaystay gumeysatada, Ingiriiskana umay suura gelin in uu talis gumeysi sugto ilaa iyo sannadkii 1922, markaana guushoodii waxay ku aaddanayd hub kale oo cusub — Diyaaradda qaadda bamka. Sidaas oo kale ayaa Faransiisku ciidammadii reer Marooko uu awoodsiga diyaaradda kaga libaystay.

## SAHAMISKII AFRIKA GUDAHEEDA IYO SABABIHIISII

Ka ganacsigii dadyowga Afrika hawshiisu waxa ay ahayd hawl uu qof qabta ta ugu fool xumayd inta ay taariikhdu og tahay. Inkasta oo dadka hawshaas fulinaayey naftoodu ay dareemayeen fool-xumooyinkaasi, haddana may doonayn in ay faraha kala baxaan.

qarniyaal badan xiriirka u dhexeeyey Afrika iyo ninka cad, waxa uu ku koobnaa ka ganacsiga dadyowga Afrika. Qaaradaha Yurub iyo Ameerika oo hawshaa abbaan-duulayaal ka ahaa, waxa uu xiriirkaasi u soo hooyey macaash la helo kii ugu badnaa uguna weynaa. Kacaannadii sancada ee Yurub iyo Ameerika ka dhashay iyo heerka sare ee nolosha Yurub iyo Ameerika ay maanta joogaanba, saldhigyadooda waxa kaalin weyn ka galay muruqii ninka madow ee la addoonsanaayey iyo ka ganacsigiisii.

Inkasta oo Yurub iyo Ameerika ay qarniyaal badan xiriir la lahaayeen Afrika, haddana aqoon umay lahayn Juqraafiyadeeda iyo sida gidaheeda loogu nool yahay ilaa qarnigii 19aad. Aqoonta ninka cad ee Afrika waxa ay ku koobnayd xeebaha iyo meelo aan ka fogeyn oo muhiim ugu ahaa ugaarsiga dadka madow. Sida ay runtu tahay intii ka horraysay qarnigii 18aad dabayaaqadiisii qaaradaha Yurub iyo Ameerika umay baahnayn in ay Qaaradda Afrika dhex-galaan ama ay la yeesheen xiriir ka baxsan ka ganacsiga dadka madow. Sababtu waxa ay ahayd iyada oo macaashka uu ninka cadi ku qabay ka ganacsiga ninka madow ee Afrika aannu filayn in ay suura geli karto, wax kale oo uu ku beddelaa. Isla markaa, qarniyaashaa badan ma ay jirin wax iska hor-imaad ah oo ku saabsan ka ganacsiga dadka oo ka dhex dhashay dawladihii iyo dadyowgii Yurub iyo Ameerika ee gacanta ku hayey ka ganacsiga iyo addoonsiga dadyowga Afrika, qarniyaal badanna si nabadgelyo ah bay hawshaas u wada maamulanayeen.

Qarnigii 18aad qaybihiisii dambe iyo wixii ka dambeeyey xaalkii wuu isbeddalay, waxaana dawladaha Yurub iyo Ameerika khasab ku noqotay in ay faraha kala baxaan ka ganacsigii dadka madow.

Ka ganacsiga dadka madow joojintiisa, waxa ninka cad kaga lumi lahaa faa'i-idooyin badan, waxana aan shaki lahayn in ay dawladaha Yurub iyo Ameerikaba ay ciriiri weyn ka geli lahaayeen xagga dhaqaalaha iyo nolosha guudba, haddii aanay raadin tab cusub oo ay macaashkoodii ku sii wadaan.

Sababaha keenay dad ka ganacsigu, waxay dalalka Yurub iyo Ameerika soo gasheen hanti badan oo dheeraad ah, taas oo badankeedu ay ka timid macaashkii ka ganacsiga dadka iyo muruqa ninka madow. Hantidaa dheeraadka noqotay waxa ay ay wax weyn ka beddeshay dhaqaalihii iyo noloshii dalalka Yurub iyo Ameerika.

Kacaankii sancada iyo cilmiyada sayniska ee qarniyadii 18aad ka dhashay dalka Ingiriiska, kaddibna ku faaftay dalalka Yurub badankooda iyo Ameerikada waqooyi, waxa ay ahaayeen kuwo heer lama filaan ah gaarsiiyey dhaqaalaha dalalkaas. Kacaannadaas waxa ay keeneen warshado waaweyn oo beddelay dhaqaalihii uu saldhigga u ahaa muruqa dadka gaar ahaanna muruqa dadka madow ee Afrika laga dhoofinaayey. Warshadahaasi kumay shaqaynayn muruqa dadka ee waxa ay ku shaqaynayeen cilmi, kaas oo alaabooyinkii ceydhiinaa ee awal gacanta lagaga shaqaynayey si dhakhso ah ugu beddelay kuwo diyaar ah oo la manaafacaadsan karo.

Isla markaa warshadahaasi waxa ay u baahdeen alaabooyin ceydhiin oo aad uga badan intii loo baahnaa waqtiyadii gacmaha la adeegsanayey, waxana ay si dhakhso ah ugu beddeleen kuwo samaysan oo la manaafacaadsan karo. Warshadahaasi mar walba way soo badanayeen, isla markaana baahidooda alaabooyinka ceydhiin si isdaba joog ah ayey u soo kordhaysay. Inay warshadahaasi alaabooyinka ceydhiin ee ay u baahan yihiin helaan waxa ay ahayd lagama maarmaan, waayo:

B) Waxaa loo baahnaa in macaash badan laga helo;

T) Inay bataan dhibaatooyin is-hortaagana aanay dhicin.

Haddiiba Warshaduhu ay bataan oo heerka la doonayo ay gaaraan, baahidoodana la haqabtiro, waxa haddana lagama maarmaan ahayd in la helo suuqyo badan oo alaabtooda lagu gado, taasina waxay ahayd mid indheer-garatada Yurub aanay indhaha ka qarsan karayn. Waxyaalahaasi waxa ay ka mid ahaayeen waxyaalaha keenay in ay dawladaha Yurub iyo Ameerika dib uga fekeraan xiriirka ay la lahaayeen Afrika ee ku koobnaa ka ganacsiga dadka madow.

Sababaha soo dedejiyey in la beddelo xiriirka ka dhexeeya ninka cad iyo ninka madow ee ku koobnaa ka ganacsiga ninka madow, waxa door weyn ka cayaaray iska hor-imaadyo ka dhex dhacay hoggaamiyayaashii ka ganacsiga dadka madow. Qarnigii 17aad iyo wixii ka dambeeyey hoggaamiyayaasha ka ganacsiga dadka madow, waxa ay ahaayeen dawladda Ingiriiska iyo Ameerikada Waqooyi oo gumeysatada Ingiriiska gacanteeda ku jirtey. Muddo dheer labadaa dal ee Boqortooyada Ingiriiska ka tirsan ayaa afka u dhiganaayey macaashkii laga helaayey ka ganacsiga ninka madow iyo ka faa'iidaysigii muruqiisaba. Qarnigii 18aad bartamihiisii ayey dadka Maraykanku ku kaceen Boqortooyadii Ingiriiska gumeysigeediina dagaal kala hortageen. 1783kii, ayey midowga dawladaha Maraykanku qarannimo buuxda ka qaateen Boqortooyada Ingiriiska. qarannimadaasi ay heleen midowga dawladaha Ameerikada Waqooyi ma ahayn mid ay dawladda Ingiriisku ugu deeqday ee waxa ay ahayd mid xoog ay kaga samaysteen.

Ameerikada Waqooyi ee gumeysigii Ingiriiska ka baxday waxa ay ciriiri weyn xagga dhaqaalaha iyo siyaasaddaba ka gelisay dawladda Ingiriiska. Dawladda Ingiriiska waxa faraheeda ka baxay suuqii ugu weynaa suuqyada alaabada warshadaheeda ka soo baxa loo iib-geyn jirey, isla markaana ahaa suuqa ugu weynaa ee alaabada ceydhiin warshadaheeda looga keeno.

Dhaqaalaha dalalka Ameerikada Waqooyi oo aad u soo korayey waqtigii ay gumeysiga Ingiriiska ka baxeen, waxa uu ahaa ka ganacsiga dadka madow iyo muruqooda jaban. Dawladda Ingiriiska oo ay farxad weyn u ahayd cunaqabataynta dalalka Ameerikada Waqooyi xagga dhaqaalaha iyo siyaasaddaba, taasna umay daymo la'ayn. Dawladda Ingiriiska waxa ay khibrad weyn ku lahayd gumeysiga iyo fulinta siyaasaddiisaba. Waxa sida aynu kor ku soo sheegnay, muddo dheer ay gumeysanaysay dalalka Ameerikada Waqooyi, oo markaas uun gacanteeda ka baxay; waxa ay ganacta ku haysay dalal badan oo ay ka mid ahaayeen dhulbadeedyada Kariibiyaanka, Ameerikada Koonfureed iyo meelo kale oo badan; waxa ay qarnigii 18aad gacanta ku dhigtay Awstraaliya. Waxyaalahaa oo dhammi waxa ay ku dhaliyeen dawladda Ingiriiska in ay dib uga fekerto xiriirka ay la lahayd Afrika. Waxa u muuqatay in ay dhibaatooyinka ka haysta xagga dhaqaalaha ay kaga bixi lahayd qaaradda oo ay gumeysato. Sidaa awgeed, dawladda Ingiriisku waxa ay noqotay tii dawladaha Yurub ugu horreysay ee dagaal kala hor-tagtay ka ganacsigii dadka madow.

Waqtiyadaas indheer-garatada Yurub, gaar ahaan, culimada cilmiyada dhaqaalaha qaarkood, waxa ay isla xulayeen in aannu muruqa dadka la addoonsanayey qiimo weyn lahayn oo ay ka faa'iido badan tahay iyada oo la xoreeyo, dadkaasina ay noqdaan shaqaale madaxbannaan. Fikraddaasi waxa ay aad u hunguriyeysay hantigoosadkii warshadaha waaweyn lahaa iyo dad badan oo siyaasiyiin ahaaba.

Waxa jirey oo aan la dafiri karayn dad badan oo ay dadnimadu damaqday kana yaxyaxay fool-xumooyinka xad-dhaafka ahaa ee lagula kacaayey dadyowga Afrika ee la addoonsanayey iyo sida naxariis-darrada ah ee muruqooda looga faa'iideysanayey. Hase yeeshee, dadkaasi badanaaba may wada ahayn kuwo ay dadnimadu damaqday, waxaana ku dhex dhuumanaayey qaar badan oo la moodayey in ay ceebta Yurub ka haysata arrimaha Afrika ka dhiidhiyayeen, isla markaana gacanta ku hayey qorshaynta gumeysigeeda iyo ka faa'iideysigeeda. Dadka ay lagama maarmaan tahay in aanay Afriki marnaba illaawin waxa ka mid ah ninka la oran jirey Manisfild oo ahaan jirey Guddoomiyaha Garsoorayaasha Ingiriiska, Wilyam Wilbarfooris oo Mudane ahaan jirey, Toomas Kalaarakson, Graanfil Shaarb, Olawda Ekiwaano oo ku magac dheeraa Gustaafus Faada ahaan jireyna nin la addoomeeyey oo muddo kaddib xornimadiisa qaatay. Olawda waxa uu ahaa nin Afrikaana oo u dhashay dalka Nayjeeriya.

1772kii, ayuu Guddoomiyihii Garsoorayaasha Maxkamadaha Ingiriisku caddeeyey in aanu xeerka Ingiriisku aqoonsanayn waxa lagu magacaabo addoon. Wilyam Wilbarfooris, waxa uu marar badan Baarlamaanka Ingiriiska ka jeediyey fool-xumooyinka ku jirey ka ganacsiga dadka madow iyo baahida loo qabay joojintiisa. Olawda Ekwiano waxa uu khudbado ka jeediyey golayaal badan iyo dariiqyada magaalooyinka waaweyn ee dalka Ingiriiska, isagoo ka warramayay dhibaatooyinka dadyowga Afrika ka haysta ka ganacsiga dadkeeda.

Waxyaalahaasi waxa ay ahaayeen waxyaalihii gogol-dhigga u noqday ka ganacsiga dadka madow joojintiisa, waxaana halkaas ka muuqata in aanay ka imaan naxariista ninka cad ee ay lagama maarmaan ahayd.

Gelista Afrika gudaheeda, barashada Juqraafiyadeeda iyo gumeysigeeda ee ninka cad ma ay suuro geleyn in ay si hawl yaraana ku timaaddo. Isla sidaas oo kale xiriir dhex mara Afrika iyo ninka cad oo ku dhisan xaq iyo sinnaan aad buu u adkaa. Sababaha ugu waaweyni waxa ay ahaayeen iyada oo xiriirka qarniyaal badan ka dhexeeyey Afrika iyo ninka cad uu ahaa mid nacayb iyo cadaawad ku dhex abuuray ninka cad iyo ninka madow. Nidaamka dadka madow loo ugaarsanayey sida loo dhoofinayey, sida muruqooda looga faa'iideysanayey, iyo sida loo addoonsanayey intuba waxa ay ahaayeen kuwo dadnimada ka dheeree. Inta yar ee ay caddaanka isku qadhaabanayeen maahee, inta kale waxa ay ku noolaayeen cabsi iyo weerar waqti walba jooga. Dadka la soo ugaarsado kuwa ay qaraabada yihiin badanaaba waa la layn jirey, si aanay cidina isu hortaagin ugaarsiga iyo ka ganacsiga dadkaas.

Inkasta oo dhibaatooyin badani ay jireen, haddana khasab bay ku noqotay dawladaha Yurub in ay dhex galaan oo ka raadiyaan wax ka ganacsiga dadka uga manafacaad badan, ugana macaash badan. Gelista Afrika iyo gumeysigeedaba, waxa ay ka bilaabmeen sahamis si marka hore loo barto Juqraafiyadeeda iyo waxa gudaheeda ku nool.

Sahamiska Afrika waxa horseed u ahayd dawladda Ingiriiska, waxana qabanqaabintiisii hore lahaa ururro dalkeeda ka samaysnaa.

Ururradaas waxa ka mid ahaa ururka la oran jirey «Ururka sahamiska Afrika gudaheeda » oo la dhisay 1788kii. Ururku waxa uu u diray Afrika lix kooxood oo sahmiyayaal ahaa, waxaana sahamiskeedii guul weyn ka gaaray koox uu watay nin la oran jirey Mungo Baark oo 1795-97kii, gaaray webiga Nayjar. Mungo Baark waxa uu sheegay in uu webiga Nayjar u socda xagga bariga. 1805tii, ayey Dawladda Ingiriisku ururradaas kala wareegtay sahamiska Afrika. Isla sannadkaas ayey dib u soo dirtay Mungo Baark dibna looma arag. 1805tii ilaa 1816kii, waxa ay Dawaladda Ingiriisku Afrika u dirtay saddex kooxood oo sahmiyaal ahaa oo laba ay socdaalkooda ka bilaabeen Afrikada waqooyi (Tripoli) midna Afrikada galbeed. Saddexdaa kooxood midina jaangooyadeedii wax guul ah kama ay soo hoyn. Weliba kooxahaas khasaare weyn bay la kulmeen iyada oo ay dad badani socdaalkii kaga dhinteen. 1819kii, ayay koox kale ka tagtay Afrikada waqooyi, taas oo iyana aan wax guul ah ka gaarin sahamiskeedii, dad uu ka mid yahay horjoogahoodiina way ka geeriyoodeen. 1819kii, ayey koox kale oo ay ka mid ahaayeen nimanka la kala oran jirey Dhamme Huuf Kalaabeton, Wooltar Owdney iyo Diksan Denham, ka tagtay Triboli, waxaa ay socotay ilaa bartamaha lama-degaanka u dhexeeya Afrikada waqooyi iyo dhulka Suudaanata galbeed, kooxdaasi ujeeddadii socdaalkooda way gaareen, waxana ay caddeeyeen in afrika laga dhex geli karo jidka Triboli. 1823kii, ayay koox kale oo uu mar labaad hoggamiye u noqday Dhamme Kalaabarton, lana socday nin waqti dambe sahamiska Afrika gudaheeda qayb weyn ka qaatay, ka ambaxday Triboli. In kasta oo kooxdaasi ay socotay ilaa dhulalka Boornuuga iyo Xawsaha, haddana jaangooyadeedii guul kama ay soo hoyn. Kalaabartona socdaalkaas buu ku geeriyooday. Kooxdii ku xigtay oo uu watay nin la oran jirey Goordon ayaa iyana socdaalkeedii ka bilowday Triboli, hase yeeshee intaanay wax badanba la socon Triboli ayaa la dilay hoggaamiyihii Goordon, halkaas bayna kooxdii hawlaheedii ku joojisay.

Dilistii Goordon waxay ay xumaysay xiriirka ka dhexeeyey Dawladda Ingiriiska iyo Liibiya, halkaasayna Dawladda Ingiriisku kaga noqotay qorshaynteedii ahayd inay sahamiska Afrika gudaheeda ka qabanqaabiso Triboli.

Sidaa awgeed tabaabulshihii sahamiska Afrika waxay u beddeshay Afrikada galbeed.

1832kii iyo 1841kii, ayay laba kooxood dawladda Ingiriisku u dirtay Afrikada galbeed. Labadaas kooxood khasaare weyn bay la kulmeen iyada oo sahmiyashii badankoodii ay ka dhinteen wax faa'iida ahana aanay ka keenin hawlahooda. Taasi waxa ay keentay inay dawladda Ingiriisku ka yar hakato barnaamijyadeedii sahamiska Afrika.

Markii Afrikada waqooyi oo dhammi ay si fiican ugu gacan gashay taliskii Turkiga, ayey dawladda Ingiriisku la soo noqotay in ay sahamiska Afriuka gudaheeda ka waddo Afrikada waqooyi. 1854kii, ayay kooxdii ugu horraysay ka tagtay Triboli, hase yeeshee intaanay wax badan ka socon Triboli, ayey saddex meelood marka laga dhigo laba meelood ka geeriyootay, iyaga oo aan hawshoodii wax liibaan ah ka gaarin.

Koox kale oo shan qof oo iayag laga daba diray si ay gacan u siiyaan, iyana afar qof baa ka geeriyootey. 1854kii, ayey dawladda Ingiriisku dirtay nin dhakhtar ahaa oo magaciisa la oran jirey Wilyam Balfor baykiye si uu u soo hubiyo sababaha ay sahmiyayaashu u geeriyoonayeen iyo haddii u suuro gasho uu sameeyo guul laga gaaro.

Labada hawloodba way u suuro galeen. Marka ugu horraysay waxa uu soo hubiyey in ay sahmiyayaashu u dhimanayeen cudurka lagu magacaabo duumada, kaas oo lagaga hor tegi karo kiniinka kaneecada. marka labaadna waxa uu socday ilaa Webiga Nayjar iyada oo kooxdiisu aannu qofna ka dhiman. Baykiye, waxa uu soo caddeeyey in uu dhulkaasi yahay dhul la degi karo laguna noolaan karo. Waqtigaas iyo wixii ka dambeeyey, dawladda Ingiriisjka way u hawl yaraayay sida ay Afrika u degi lahayd una gumeysan lahayd. 1857kii ayay dawladda Ingiriisku nin sahmiye ahaa oo magaciisa la oran jirey Layard, qandaraas ku siisay in uu Webiga Nayjar hareerihiisa ka sameeyo meelo saldhigyo u noqda ganacsigeeda. 1857 ilaa 59, layard waxa uu halkaas ka sameeyey dhawr meelood oo maraakiibtu ay dhuxusha ka qaadato iyo saldhigyo ganacsi.

Sahamiska Afrika ee dawladda Ingiriiska waxa doorka ugu weynaa ka cayaaray nin la oran jirey Dheefid Liifingstoon oo dhakhtar ahaa. Liifingstoon waxa uu doonayey in uu dalka Shiinaha tago oo uu halkaa dhakhtar ugu noqdo wadaaddada Diinta Masiixiga faafinaayey. Hase yeeshee halkaas waxa ka dhacay dagaalkii xashiishada, kaas oo u suuro gelin waayey inay hawshaasi u fusho, awaashina waxa ay ku soo qaadday Afrika. Liifingston, shaqadiisa waxa uu ka bilaabay Afrikada Koonfureed. 1849kii, Liifingstoon waxa uu ka tallaabay lama-degaanka Kalahaari isaga oo doonaya in uu halkaas ka sahmiyo meel ay ku noolaan karaan faafiyeyaasha diinta masiixiga. Liifingstoon waxa uu sahmiskaas ku helay webiga Nagaami, waxana uu ogaaday in meelahaasi ay biyo badan leeyihiin dad badanina halkaas ku nool yihiin. 1852kii, waxa uu sameeyey safar dheer oo uu isaga kala gudbay Badweynta Atlantikada iyo Hindiya. 1856kii, ayuu ku noqday dalkiisii, waxana uu casharro ka bixiyey Jaamacadda Kambrij ee London. Intii u dhaxaysay 1857kii ilaa 1863kii Liifingstoon waxa uu sahan ku sameeyey webiga Saambiis iyo hareerihiisa waxana uu ku noqday dalkiisii. 1866kii, ayuu mar saddexaad ku noqday Afrika, waxana lagu wadaa in uu markaa doonayey in uu sahan wanaagsan ku sameeyo webiga Niilka, hase yeeshee warkiisa muddo dheer lama maqal. Sidaa awgeed ayuu wargeyska la yiraahdo Niyuu Yoork, herald u diray nin suxufi ahaa oo magaciisa la oran jirey Heneri M. Steenli. Steenli 1871kii, ayuu Lifingstoon ka helay meel Taanganiika agteeda ah, isaga oo aad u liita. Steenli waxa uu ka baryey in uu raaco, hase yeeshee wuu diiday. 1873kii, ayaa meydkii Liifingstoon dadkiisii ka heleen isaga oo yaalla buul yar oo uu halkaa ku lahaa agtiisa.

In kasta oo dawladaa Ingiriisku doorka weyn ay ka cayaartay sahamiska Afrika, haddana waxa jirey dawlado kale oo tartan kula jirey. Dawladahaas waxa ka mid ahayd dawladda faransiiska. Qarnigii 17aad ayey dawladda faransiisku gashay Sinigaal, hase yeeshee meelaha xeebaha ku dhow may dhaafin. 1659kii, Sinigaal waxa wakiil ka samaystay shirkad Faransiis ah oo la oran jirey Kambaniga Noomaande. Hase yeeshee shirkaddaasi si fiican umay dhismin, dawladda Faransiiskuna dhaqdhaqaaqyo kale oo ku saabsan sahmiska Afrika may samayn ilaa qarnigii 19aad qaybihiisii hore.

Laba sahan oo muhiim ah ayey dawladda Faransiisku ka samaysay Afrika. Nin la oran jirey G. Molliyen ayaa 1818kii u sahamiyey Gaambiya, Rio Graande iyo Sinigaal gudaheeda. Sahanka ugu muhiimsanaa sahammada dawladda Faransiiska wuxuu ahaa mid uu sameeyey nin la oran jirey Renee Kaaliye oo socodkiisa ka bilaabay Riyo Nunees oo socday ilaa Timbuktu halkaana kaga baxay Taanjiir. Waxa uu Renee ahaa ninka ugu horreeyey ee cad ee tegey magaalada Timbuktu. Hase yeeshee socdaalka ninkaas kuma ay shaqa lahayn dawladdu. Sidaa awgeed dhex gelidda Afrika ee dawladda waxa u saldhig ahayd Sinigaal. Nin la oran jirey Luuwis Faydeheerbe ayey dawladda Faransiisku Sinigaal ugu dhigtay Barasaab, kaasaana Sinigaal oo dhan xukunka Dawladda Faransiiska hoos keenay halkaas ayaanu gumeysigeedu Afrika kaga faafay.

Dawladda saddexaad ee qayb weyn ka qaadatay sahmiska Afrika waxay ahayd ta Jarmalka. Inta badan dawladda Jarmalku waxay isku hawlaysay sahamiska Afrikada Bari. 1847kii ilaa 49kii, ayey laba nin oo Jarmal ahaa oo la kala oran jirey Krambf iyo Rebmaan socdeen ilaa buurta Kalamanjaaro iyo Buurta Kiiniya. 1850kii ilaa 55kii ayuu ninka la oran jirey Henrij Baart galay dhulalaka Suudaanta qaybihiisa galbeed iyo qaybihiisa dhexe, waxana uu keenay warar badan oo ku saabsan dadyowgaas dhaqammadooda, dhaqaalahooda, afafkooda iyo waxyaalo kale oo badan. Intii u dhexaysay 1862kii iyo 1869kii, nin Jarmal ah oo la oran jirey Gerhaard Roolts, ayaa socdaal ballaaran ku sameeyey lama-degaanka Afrikada waqooyi. 1870-1874kii, ninka la oran jirey Gustaaf Najtigaal ayaa markii ugu horraysay sahmiyey dhulka Suudaanta inta u dhexaysa harada Jaad iyo webiga Niilka.

Sidaa halkaas ka muuqata qarnigii 19aad bartamihiisii dawladaha Yurub, gaar ahaan dawladaha Ingiriiska, Faransiiska iyo Jarmalka heer fiican bay ka gaareen sahmiskii Afrika iyo aqoonta gudaheeda. Hawshaasi, waxay ka mid ahayd hawlaha labaad ee qaybta weyna ka qaadatay hirgelintii gumeysiga Afrika waxay ahaayeen ururrada Kiniisadaha Kiristiyaanka ee Yurub.

## BAADARIYADII

Inta la ogsoon yahay taariikhda Afrika ilaa iyo hadda xiriir isweydaarsi ah ayaa ka tabay ugana soo gudbay adduunka. ha ahaato mid ganacsi, oo ah gaddis qarsoon, iyo mid aan qarsoonayn, xiriirkaas oo ahaa mid ka teba badda cad, tan Cas ama badweynta Hindiya.

## DIINTA KIRISTAANKA

Laba aragtiyood oo nolosha Afrikaanka aad u taabtay ayaa kaga yimid Bariga Dhexe. Diinta Kiristaanka oo ka soo gudubtay «Palestine» iyo Diinta Islaamka oo ka soo tabtay Areebiya. Marka laga fiirsho dhinaca dadka, siyaasadda iyo tirokoobiddaba, Islaamka ayaa Afrika kaga hormaray diinta Kiristaanka. Tirokoobta ugu dambaysay dadka Muslimka ee Afrikaanka ah waxa lagu qiyaasay 75 milyan, Kiristaankana 24 milyan. In kasta oo laanqayrtu u u gudubtay maqribka iyo Niilka

boqollal sano ka hor. Islaamka wax yar ku qaadatay inuu masaxo diinta Kiristaanka. Sababaha ay diinta Islaamku uga bilantay tan kale may aha in aan halkan kaga doodno, inkasta oy gumeystayaashu sababo hor ka naca baxsheen, ay ka mid tahay in Islaamka lagu fidshay rasaas iyo seef. Way jirtey middaas marka la eego heeraraka fidinta Islaamku soo maray, gaar ahaan sifaha Islaamku ugu gudbay Afrikaanka ku nool Badda Cad iyo Suudaan. Hase ahaatee Afrikada inteeda kale si nabad ah ayuu ugu fiday iyaga oo ay hor kacayeen wadaddo iyo geddisley. Inaan niraahno fidinta Islaamka xoog iyo muquunshay ku hirgashay waa tilmaansi been ah. Sababo badan ayaase jirey oo Islaamku ku noqday aqoon soo jiidata ummadaha Afrikaanka ah. Haddaba intaynaan ka hadlin soo geliinka Baaderiyada iyo diinta Kiristaanka sida Afriaka ay ku sugnayd aan tusaalooyin ka qaadanno, si markaas aan u garanno kaalinta Diinta Kiristaanku ka gashay gumeysigii Afrika.

## DIINTA ISLAAMKA :

*AFRIKA DADKA MUSLINKA NOQDAY*

Ummadaha Afrika dadka muslinka noqday sadbursi ayey lahaayeen, matalan inuu kula sinmo faafiyayaasha diinta, cashuurna aan laga qaadin. Islaamku wuxuu dhiirrigashay in dadku garasho qoraal ah yeeshaan, cilmina ay helaan. Jaamicadaha Islaamka dad Afrikaan ah baa geli jirey-Kairwan, Cairo-Kastina, Jaghbub. Hase ahaatee, waxa aan oran karnaa Islaamka waxa hormarshay xiriirka dadnimabilka ah ee ay la lahaayeen ummadaha Afrikaank ah. Dadka Muslinka ahi waxay ku baaqi jireen sinnaan iyo walaaltinnimo ku aada nolosha, sidaasna way dhaqan gelin jireen. Barayaasha Diinta Islaamku, dadka Afrikaanka ah, waxay lahaayeen dad la siman, oon sinnaba uga sarrayn.

## DIINTA KIRISTAANKA

Diinta Kiristaanku hadday soo gashay Afrika runtii waxay u muuqatay wax shisheeye ah, damaca Baadariguna wuu shaki gashay caaqilladii Afrikaanka. Qarnigii sagaal iyo tobnaad (19) isaga oo wata fiirroyin ku aada sarraynta diintiisa, jinsigiisa, caadooyinkiisa iyo dhaqankiisa ayuu Baaderigu Afrika soo galay. Wuxuu is gashay hawo sare iyo gooninimo. Cuntadiisa iyo dharkiisuba wax qalaad ayey noqdeen, xataa guriggisu qalcad ayuu u ahaa, halkuu ka ahaan lahaa meel dad nabadgelyo jeceli jooji lahaayeen. Wuxuu ku wacdiyi jirey in ay u noqdaan dad Kiristaan ah. Wuxuu ku wacdiyi jirey in ay iska dhaafaan guurka iyo caadooyinka Afrikaanka. Isaga iyo kan cad ee ganacsadaha ah, isku si ayaabay u arkayaan.

Afrikaanku waxay aqoonsadeen in dadka caddi shinbiro isku baal ah oo wada duula yihiin. Baaderigu wuxuu ku baaqi jirey sinnaan, misana markuu Kaniisadda joogo mudane kama dambayn ah ayuu isu dhisi jirey. Afrikaanka waxa uu ku wacdiyi jirey inay ka fogaadaan «Wasakha Duniyada» lacagta, dahabka iyo wixii la mid ah, misana Baaderiga iyo kuwa cad ee diirkiisa ah ayaa boobi jirey dhulka dheefta iyo macdanta ee Afrikaanka.

Waxay ka wacdiyi jireen cabidda khamrada, hase ahaatee ninka cad baa soo gelin jirey dalka si uu ugu geddisto saliid, ama fool maroodi. Iyaga oo dadka Afrikaanka ah yaqiintooda iyo arwaaxda ay aaminsan yihiin Baaderigu uu cambaareeyo, ayuu haddana isku dayay inuu ka dhaadhacsho Nebi Ciise, Ilaahay iyo Ruuxa muqaddaska ah.

Baaderiga inkastoy u suura gashay in uu gar wadeen u noqdo gumeysigii, dhinaca fidinta diinta Kiristaanka kumuu guulaysan. Markuu arkay inuusan libaysanayn ayay reer Yurub cudurdaarro keensadeen ku aada fiirooyin ay ku yasayaan

Afrikaanka. Kiristiyaaniintana waxa uun garawsan kara jinsiyada sare, maxaa yeelay waxy ku unkan tahay fiiro iyo run «Mataphysical» ah, lana doonaayey qofka qaddaris laxaad leh oo uu raaco; Islaamku waxa uu faafiyaa aragti gaaban, oon qofka ka rabin qaddaris laxaad leh oo ku xirxiran basarkiisa. Hase ahaatee fiirroyinka sifahaas lihi waa dar nacayb iyo yasid itaalsada, caadana reer Yurub u ah marka arrini siday u rabeen u fuli waydo.

Qarnigii sagaal iyo tobnaad (19) markay kiristaanku dhaqdhaqaaqi rabeen Islaamku waa uu ku xoogsatay waqooyiga Afrika. Dalalka ku yaala inta ka sarreysa $12^0$ W. Lool oo dhammi Diinta Islaamka ayay haysteen. Bulshooyinka muslinka ihi soo galliinka gaalada waxay u arkeen xad-gudub, inay dhulkooda ka saaraanna way aqoonsanayeen. Halgamo gobannimadoon ah ayaa ka holcay dalalkaas oo dhan. Baaderigii baahi loo qabo may arkayn, in kastoo gumeystayaashu u fasaxeen Baadariyadoodu in ay dalalkaas laanqayrta la qaadaan, hase ahaatee dadkii marnaba may oggolaan yiqiinta Kiristaanka. Ka dib dalalka Afrikaanku markay madaxbannaanaadeen ummadaha ku nool dalalka dhaca $12^0$ W. waxay wali ahaayeen dad muslin ah, oon sinnaba diinta Kiristaanka u aqbalin.

Afrikaanka dalalaka koonfureed ilaa hadda waxay dadku haystaan diimo Afrikaan ah, in kastoy Baaderiyadu isku daaliyaan xayaysiinta diinta Kiristaanka. Guud ahaan marka la eego Baaderiyada tallaabooyinkoodii si umay wada taaban dalalka Afrika oo idil. Waxaanse ku koobi karnaa siyaasaddii Baaderigu inay ahayd horseedka gumeysiga.

Meelo fara badan oo Afrika ah dhibaatooyin baa food saareeyey. Yomba-land haddii aan tilmaansanno, Baaderiyada dhaqdhaqaaqooda dul ayaa loo lahaa. Waxa ay se ogsoonaayeen in aanay xoog wax ku qaadi karin., sidaa awgeedna dadka caadooyinkooda iyo talada madaxda Afrikaanka ah way xurmeyn jireen si markaas ay nabadgelyo u helaan. Marar badanna waabay laaluushi jireen, caaqillada. Caaqillada iyo madaxda Afrikaanka gacan ayaa Baadariyadu ka dhigteen ay itaalsadaan si himilooyinkooda siyaasiga ah ay u gaaraan.

Baadariyadu kaalin weyn ayay ka cayaareen meelaha ay dhacdo in madaxdu isku qabsato xukunka ama degmooyinka ay iska hor yiamaadaan ummadda deggan. Baadariyadu iskuma koobin fidinta diinta Kiristaanka, ee si taasi ugu suuro gasho ayey qas u galin jireen arrimaha siyaasadda dalalkaas ay fadhiyeen. Baaderiyadu nin wanaagsan oo taageersan ganacsiga qarsoon.

Laagoos (Lagos) Akitoye waxay u arkayeen nin neceb ganacsiga dadka. Reer Laagoos waxay ku tilmaameen dad aad u fiican oo addoonsiga, ganacsiga aadmiga iyo dagaalkaba neceb, diinta kiristaankana ku fidin kara galbeedka Afrika. Baaderiyadu waxay itaalsan jireen dawladahooda si caaqil ama boqor xukunka looga fadhiisiyo ku kalena loogu dhiibo, midna hub iyo rasaas la siiyo ku kalena la muquuniyo.

In kasta oy taasi jirtey, haddana marka ay madaxda Afrikaanku ogaadeen in Baadariyadu horseedeen in dhulkooda lala wareego cadaawad ayay muteysteen. Ugu dambeyn waxay Afrikaanku qabeen in Baaderiyada iyo gumeysigu siyaasad qas iyo gumeysi meeleeyeen. Sidoo kale ayaabay, Bariga Afrika, tan Dhexe iyo Koonfurba gumeysiga hor iyo salba calankiisa u dhidbeen. Aan tilmaanno nin madaxa Afrikaan ah markuu lahaa «hortii Afrikaanku dhulka ayuu haystay» nin cadina «baybalka »ayuu sitay. Ka dib baybalkii Afrikaankii buu u soo wareegay, dhulkiina kii caddaa baa gacanta ku dhigay. Misilkaasi, - Lobengula - wuxu isna ku yiri nin Baaderiya, «Waligaa ma aragtay jirjirroole qabsaday dukhsi ? Jirjirrooluhu dukhsiga

ayuu isdabataagaa markaasuu in muddo ah aanu isdhaqaajin, dabadeedna waa uu soo dhaqaaqaa isaga oo kolba lug qaadaya, markuu ku soo dhowaado ayuu carrabkiisa gana dukhsigiina waa u libdhaa. Baaderigu waa jirjirroolahaas aan tilmaannay».

Bugaandhadu madaxdoodii waxay islahaayeen Baaderiyada ku adeegsada, hase ahaatee waxay arkeen Baaderigii «Protestant» ahaa oo ka shaqeeyey sidii dalku uga mid noqon lahaa imbiradooriyada Ingiriiska, kii Roman catholic ahaana la rabay faransiiska.

Madaxdiina waxay u kala baxeen dad Faransiiska raacsan iyo dad Ingiriiska raacsan, intii muslinka ahaydna iyana way ku dhex wareegeen. Yugaandha iyo Kiiniyaba Baaderiyada ayaa gumeysiga u soo hogganshay. Malaawi iyo Mosambiikna Baaderiyadu, dawladaha iyo shariikadihii baayac mushatariga ahaa, waxay ka ahaaueen saddex gacmood oo kala dhig ah una wada guntanaa dhidibka gumeysiga.

Baaderiyada waxa loo aaneeyaa inay hor kaceen waxbarashada, arday badanna indhaha u fureen. Hase ahaatee, Baaderiyadu may ahayn tay u yimaadeen inay hirgeshaan, haba iyo hannaan waxbarasho cid ay la waayeen, ee ulajeeddadu waxay ahayd inay ummadaha Afrika dhaqan rogaan, dad kiristaan ahna ka dhigaan. Sifaha ay u cambaareynayeen ahaanshaha qof Afrikaan ah, si ruux kiristaan ah loo noqdaa maaha mid muujinaysa inay waxbarid iyo barbaarin u yimaadeen Afrika. Ujeeddadoodu caddi waxay ahayd fidinta diinta Kiristaanka. Afrikaanka ayaa dabadeedna iyagu waxbartay - taasna waxa lagu tilmaamay Cirib laab qarsoon oo marna hiyiga Baaderiga ku jirn.

## SIYAASADIHII DAWLADAHA GUMEYSIAGA IYO MAAMULKOODII

**A R A R :**

Inta aynan ka hadal siyaasadihii Gumeysiga iyo habkay wax u maamuli jireen waxa lagama maarmaan ah in aan isla garanno oon si cad u qeexno «Gumeysi». Gumeystayaashu inta badan waxay inaga dhaadhiciyeen gumeysigu inuu keenay ilbaxnimo, ulajeeddada weyn oy reer Yurub Afrika ka lahaayeenna ahayd ilbaxgelin iyo ilbixin. Si aan Gumeysi u qeexno, wixii aynu ahayn aan soo hormarinno. Guud ahaan, gumeysigu marnaba ma ahayn mid u guntaday inuu soo koobo soohdimaha aqoondarrida, cudurka iyo gaajada, ama mid hor Ilaahay waxtar u qaban rabay, ama xeer iyo xasillooni fidin rabay. Gacanta weyn ee gumeysiga waxa ahaa doolaalaha, Badmaax qawlaysataha, ganacsadaha, markab, bunduq iyo baaderi, hunguri iyo xoog. Intaas oo u adeegaysay ilbaxnimo dhaqaalaheeda isku lidka ahi keenay, in dawladaha hantigoosiga ihi ay ku tartamaan adduunka.

Haddaba ulajeeddada gumeysigu hor iyo salba waxay ahayd ku dulnoolaansho, dalalka la gumeystana ay ka dhigaan harooyin ay u soo aroorshaan alaabtooda farsamatuman. Warshadleyda hantigoosiga ah ee Ingiriiska, Faransiiska, Talyaaniga iyo Biljimku dalalka ay gumeystaan iyo khayraadka laga soo saaro mar waxay habeeyeen warshadahooda, marna waxay u noqonayeen saylad ay ku iib geshaan alaabtooda. Dalalka la gumeystaa, reer Yurub waxay u ahaayeen irmaan ay ka daldashaan alaabta cayriin, shaqo jaban iyo saylado ay ku gadaan waxyaalo farsamotuman oo qaaliya.

Sidaa darteed ayaa dalalka la gumeystaa ay noqdeen marin ay ku hayn iyo hantibuurtaan gumeystayaashu iyagoon marnaba dalalka faa'iido la rabin.

### WAA MAXAY GUMEYSI ?

Habka gumeysigu wuxuu taabba galay dhammaadkii qarnigii 19aad, kaddib markuu hantigoosiga goonisugadka ihi beddelay hantigoosiga tartanka furan leh. Intii hore dalalka Afrika, Aasiya, Ustareeliya, Waqooyi iyo Koonfur Ameerika reer Yurub waxy u qabsadeen si ay uga samaystaan goobo milateri, xarumo ganacsi, iyo si ay u dhacaan dahab iyo lacag iyo dad ay gataan, iyo si ay u dejiyaan dalalkaas dad cad oo reer Yurub ah. Intaasi waxay qayb weyn ka gashaa horumarkii hantigoosigu kaga hanaqaaday Yurub. Qarnigii 19aad horumarkii farsamada, iyo warshadaha iyo xooggii dhaqaalahaa oo u gacan galay dad Sharikado iyo Baanan tiro yar leh ayaa isbaddal ku keenay xiriirkii reer Yurub iyo dalalka Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika. koriddii wershadaha reer Yurub waxay u baahdeen alaabta cayriin oo iyana korodha, alaabta farsamotuman waxay iyana u baahatay saylad gadata. Si intaasi u suura gasho reer Yurub adduunka ayay weerar ku qaadeen. Dalalka intaan u gacan gelinna dagaal iyo xoog milatari ayay ku qabsadeen, qaarna heshiisyo been ah iyo khiyaamo ayay ku galeen. Sidaa awgeed intii ka dambaysay Shirkii Guud ee Baarliin 1885, ayaa Afriki qoqobantay. Bilowgii qarnigii 20aad Itoobiya iyo Laybeeriya oo qur ah ayaa dalalka Afrika ka madaxbannaanaa. Sidoo kale ayaa Bariga fog iyo Koonfurta Bariga Eeshiya loo galay. 1900kii Jabbaan - Tayland iyo Shiinaha ayaa ka baxsanaa Taliska gumeysiga - inkastoo dalka Shiinaha gumeystayaashu qayb ka mid ah haysteen, si bareer ahna u fara gelin jireen.

Ahaanshaha siyaasiga ah ee gumeysiga waa hoos dhig toos iyo guudba ah ee dal mid kale kula dhaqmo, awoodda qarannimaduna gacanta ugu jirto kan gacanta sare leh ee shisheeyaha ah. Sidaa darteed ayaa shaqalaha dalalka la gumeystaa u ahaay-

een dad shisheeye ah, golayaasha sharcigana iyagu u maamuli jireen. Waxa nabadda u sugi jirey ciidammo reer Yurub ah, ama dad ka tirsan dalalka.

Garsoorayaashu reer Yurub ayaa ahaayeen xeerkuna mid ay iyagu dajiyeen buu ahaa. Shaqaalaha inta maamulka sare haysay kuwaas shisheeyaha ah ayay ahaayeen, waxbarashaduna gacantooda ayaa bay ku jirtay. Baaderiyada Diinta Kiristaankuna iyana waxabay tartan kula jireen Diinta Afrikaanka iyo tan Islaamka.

Awooddaa siyaasiga ihi waxay ku aadaysay in ay hirgesho laba danood : in dadka la gumeysto aanay siyaasadda gumeysiaga ka bixin, iyo in heer sare la gaarsiiyo ku dulnoolaanshaha dadka iyo irmaanta khayraadka dalalkaasi. Taasi waxay si cad uga muuqanaysay xeerarka iyo garsoorka gumeystayaasha. Sharci fidsan ayay u dhigeen surmaynta talis wadaagga ama dimoqraadiyadda. Waxay xaaraameeyeen shaqo ka fariisadka, ururrada shaqaalaha, axsaabta siyaasiga ah, wargeysyada, waxaanay xireen madaxda dhaqdhaqaaqyada; cod dhiibaal iyo aaye tashigii dadka la gumeystana may oggolayn. Sidaa waxay u yeelayeen si ay dadka u gacmo xiraan, ku dulnoolaanshuhuna u waaro. Mushaharka uu ninka shaqaalaha ihi qaadanaayo heer baa u go'naa, cashuurta madaxu khasab ayay ku ahayd ninka beeraleyda ah, shaqo-qasabkuna wuxuu ahaa mid lagu dhacayey dalka iyo ciidda Afrikaanka. Habkaas siyaasiga iyo dhaqaalahaba ihi wuxuu ahaa mid ay ku sugteen awoodda qaranka ee gacanta u gashay.

Waa ay jirtey in dalalka qaarkood aanay u qabsan ulajeeddo dhaqaale, hase ahaate, waxay u haysteen iyaga oo dana milateri ka leh si ay u ilaashadaan dalalka kale ee ay dhaqaale miirtaan . Waxaana ka mid ahaa Giblartar, Maalta, Qubrus iyo Cadan. Guud ahaan danta gumeysigu mid dhaqaale ayey hayd. Gumeysigu wuxuu siiyey reer Yurub awood wajiyo badan leh oy ku dhacaan dadkay gumeystaan, waxaanay hantiyeen dhul jaban iyo irmaan jaban. Waxaa u furmay inay miraha beeraleydu soo saarto qiimo hoose ku qaataan, inay Saylad goonisugad ah u helaan alaabta farsamotuman, dabadeedna ku hanti abuuraan macaashkaas dheeraadka ah. taasi dhibaato qoto dheer ayay u gaysatay dhaqaalihii dalalkaasi.


## GUMEYSI IYO IMBIIRIYAALISIM

Guud ahaan Imbiiriyaalism waa siyaasad ku aadda inay Imbaayar abuurto, nidaamiso oy hayso : Waa qaran aad u fidsan, oo ka koobma ummado kala gaar ah oo hoos yimaada awoodda dhexroorsan. Waa dad kala duwan oo xoog lagu hoos keenay awood dhexe: aragtida imbiiriyaalism waxay ku aroortaa fikrddii «Alexander the Great» oo ahaa kii abuuray «Garaeco-Asiatic Empire». Wuxuu qabsaday dunidii markaa la yiqiin oo dhan dabeedna intuu fadhiistay ayuu ooyay kolkii uu waayay dal uu qabsado oo kale. Hase ahaatee, imbiiriyaalism macnaheeda cusubi waa ka duwan yahay, tii ummadaha hore, ee Alikasandar iyo Siisar loo aaneeyo. Imbiriyaalism macnaheedu waa dal dhac qaran ummad kale ku qaada iyo taabbo gelinta farsamo uu u ilaalshado si ummad kale uu u gumeysto una dhaqaale miirto. Sidaa darteed, waxa si cad uga hadlay Xoghayihii dalalka la gumeysto ee qaranka Faransiiska, Albert Stuart 1923kii isaga oo yiri: «Maxaa ka faa'iido ah in runta la maldaho ? Bilowgiiba, gumeysigu muu ahayn gudbin ilbaxnimo amase ilbixin lala rabo Afrika. Wuxuu ahaa sandulleyn, dano dhaqaale oo gaar ahi laablulayeen. Dadkii u xusul duubay taabidda dalal la gumeysto, lafahooda ayay ka fakarayeen, iskood bayna awood u rabeen, ka faa'iideysad bay dalalku u qabsadeen». Xoghayaha hadalkiisu wuxuu burinayey maaweelada beenta ah ee reer Yurub ku andacoodaan «xil ilbixin ihi inuu saldhigga u ahaa siyaasadda gumeystaha». Gumeysigu wuxuu ahaa meel marinta dano gaar ah iyo muquuninta ummadaha xoogga yar. Sidaas darteed ayaa

gumeysiga hantigoostada Yurub loogu magacaabay «Imbiiriyaaliyadda Gumeysiga-». Taasna waxa marag kac u ah sifihii reer Yurub u qabsadeen Afrika.

1881kii Faransiisku Tunis ayuu taabay, sannadkii ku xigayna, Ingiriiska ayaa Masar maamulkeeda sugtay. 1884, Jarmalka yaa isna Galbeedka Koonfur Afrika gacanta ku dhigay, Kaamaruun iyo Toogana waa uu ku xigsiistay. Faransiiska guuto ka tirsan ayaa qabsatay dalka Koongo (French). 1849na Timbuktu, Dahomay iyo Xeebta Foolka ayaa faransiiska ayuu hoos yimid. Galbeedkana Suudaan oo dhan Faransiiska ayuu hoos yimid. 1885na Madagaskar ayaa abbaansiga Faransiiska hoos timi.

Sidii uu shisheeyuhu Afrika u xukumi jirey (1924).



Faransiiska iyo Ingiriiska ficilladii iyo tarankii ka dhexeeyey ayaa xoogaystay. Faransiisku markaa wuxuu galay Marooko. 1882kii Talyaaniga ayaa Casab degay. 1889, Soomaaliya ayuu soo galay. Kolkii dagaalkii koowaad ee adduunka dhammaaday sida tan hoos ku qoran ayaa gumeystuhu Afrika u kala qoqobatay :

**Waqooyi :** Rio de Oro (Spanish) Marooko (Faransiis) Aljeeriya-Tunis (Faransiis), Liibiya (Talyaani) Suudaantii Masar iyo Ingiriiska.

**Bari :** Kiiniya (Ingiriis), Afrikada Bari ee Bortiqiiska (Portugues East Africa), Abasiiniya (Xor), dalalka Soomaalida (Ingiriis, Faransiis, iyo Talyaani).

**Koonfur :** Koonfur Afriaka dawladda Midabtakoorka ee Koonfur Afrika, Galbeedka Koonfur Afrika dhiibaal.

**Afrikada Galbeed :** Sinigaal-Ivory Cost (Xeebta Caaga) (Faransiis), Gini (Bortaqiis), dalalka Suudaan (Faransiis), Libeeriya (Xor), Dahomay (Faransiis) Igwatooriyaal Firenj (Faransiis), Kongo (Biljim), labada Kamaruun (ingiriis, Faransiis), Angoola (Bortaqiis), Gaambiya (Ingiriis), Siralyuun (Siera Leone), (Ingiriis), Gold Cost ama Xeebta dahabka (Ingiriis) Toogo (French manadate) Nayjeeriya (Ingiriis).

Ulajeeddada gumeystuhu ka lahaa dalalkaas waxay ahayd inay sugtaan alaab cayriin. Si taasi ugu suura gasho waxay meel mariyeen :

1. Dalalka la gumeysto in laga dhigo dad baahan oon soo saari karin alaab farsamotuman.
2. In laga ilaasho waxbarashada, aqoonta iyo tabaha cilmiga ee lagu hormarsho warshadaha.
3. In dadka la gumeysto laga dhigo qaar soo saara alaabta cayriin si jabbaanna ay ku shaqeeyaan.
4. In dalalka la gumeysto aanay la ganacsan cid kale iyagoo gumeystahooda sii mara maahee.

Dhaqaalaha gumeysatada haddii aan raad raacno, saddex heer uu soo maray ayaan sooyaalkiisa ka garan karnaa. Intaasoy tabantaabinayeen, hantida ganacsatada, hantida warshadalayda, iyo hantida moodka. Falanqayn qoto dheer waxa ka baxshay Maarkis oo yiri, «gumeysiga dhaqaalihiisu ma aha heer dabiici u ah horumarka nidaamka hantigoosiga, ee waliba waa heerka ugu sarreeya ee isburiska iyo iska hor imaadka nidaamku leeyahay, ee hor dhaca baaba'a hantigoosiga». Maraka tirada dalalka hantigoosiga ah ee ku abaaba sayladaha shisheeyaha iyo ku dulnoolaanshaha dalalkaasu korodho, tirada meelaha la gumeysan karaana ay yaraato ayaa baratan xoog lihi dhex maraa hantigoosatada, kaasoo u horseeda dagaallo yar yar oo ku aada qabsashada dalalka, misana fida oo ku dambeeya mid adduunka aafeeya.

Sidaas darteed, xogtu waxay tahay, dalalka reer Yurub Afrika waxay ka dhigan rabeen irmaan ay ku noolaadaan, warshadahoodana ka habtaan, si nidaamka hantigoosiga ahi u sii waaro. Dadkii Afrikaanka ahaana waxay u cesheen shaqaale iyo adeegayaal la qandaraasto oon marna samaysan karin Ururro. Waxay reer Yurub u fiiganayeen in Afrikaanku sifa midiidsiya ugu shaqeeyo kuna niyad samaado. Kol haddii dalalkaasi aanay horumarin karaynin warshadaha, hantigoosatadu waxay Afrikaanka ku dirqiday in ay jeclaadaan alaabta reer Yurub ee farsamotuman, si ay macmiil joogta ah ugu noqdaan. Markaas inta mushaharo loo siiyo ninka shaqaalaha ah, waxay kaga baxaysay alaabta debedda looga keeno. Taasoo ah gambadii mushaharka loo siiyay ninka Afrikaanka inay misana dib ugu noqoto jeebka gumeystaha.

Haddaan soo koobno, dhaqaalaha gumeysigu wuxuu ku aadayay; dadka Afrikaanku inay qiima jaban ku shaqeeyaan, alaabta cayriinna qiima jaban ku iibshaan, qiima qaaliyana alaabta farsamotuman Afrikaanka kaga gadaan. Haddaan tusaale soo qaadanno: Gaana waxay dhoofinaysay loox, iyo Bauxite (Bugsayt), waxaana dib looga gadi jirey kuraas, miisas, xaashiyo, kilaadhi, iwm.

Reer Yurub dal wal oo Afrikaan ahba waxay ka hormarsadeen irmaan gaar (Soomaaliya: Muus, Ari iyo Geel. Suudaan: Cudbi, (Suuf). Kiiniya: Bun. Tansaaniya: Xig. Nayjeeriya: Saliid Qumbe. Gaana: Kooko iwm.

Dalalka Afrikaanku intaanay gumeystayaashu iman ciid hodan ah oy ku abuurtaan miro cunno ugu filan ayay lahaayeen. Gumeystayaashuse may u jeedin taas, hortiiba dhulkii ayay qaybsheen waxaanay ka samaysteen beero waaweyn iyo goobo ay macdanta ka qotaan. Dalakla ay caddiinku degeen, judhiiba ciidda intii hodanka ahayd ayay seerteen. Ninka Afrikaanka ahna waa loo diiday inuu fasho ama ku noolaado isaga oo adeege ahaan ku shaqaynaya maahee. Koonfurta Afrika iyo Koonfurta Roodiishiya ayaa sifahaa tusaale cad u ah, Kiiniya iyo Aljeeriyana way ku dhadhawaayeen. Markii la gaaray 1951kii sidii Afrikaanka Koonfur Afrika looga duudsiiyay dalkiisa boqolkiiba 9.6% bedka dalka marka la eego ayaa degaanka Afrikaanka lagu magacaabay.

Siyaasadihii dawladaha gumeysiga iyo habkii ay wax u maamuli jireen waxay ifsanayeen falsafadda sadbursiga horukaca ninka cad iyo ninka madow. Renan, oo ah (Humanist idealist Philosopher), Buuggiisa «la Reforme Intellectuelle et morale», wuxuu ku caddeeyey siyaasadda gumeysatadu ay tahay in ay raacdo. Wuxuu qoray «waxaana higsanaynaa maaha sinnaan ee waa muquunin. Dalka jinsiga shisheeyaha ihi waa inuu noqdaa, dalka midiidinnado, kan beero adeegeyaasha, iyo kan shaqaalaha warshadaha. Ulajeeddadu maaha in la tiro sinnaan la'aanta ee waa sii dhidibka iyo xeer loo sameeyo walibana la dhaqan geliyo. Taas ayay reer Yurub tuurta u riteen, Afrikana waxay ku faleen, falsafaddaa ayay ka soo maaxdaa. Aan soo qaadanno nidaamkii gumeysatadu maamulka ku fidsatay 1900-19 dalalka Afrikaanka sidii ay jedwel raacayeen mid walba sannad gaar ah may qaybsan. Afrika inay qabsadaanse waxay u suura gashay ka dib markii ay iyagoon u aabe yeeleyn dad badan oo carruur, dumar iyo cirrooleba leh bunduq caaraddii ay ku muquuniyeen.

Jahaadkii Sayidka ee 1898kii, gadoodkii-Ashaantiga ee 1900, 1905 kacaankii Maji-Maji ee Tansaaniya, 1906 gadoodkii Zulu, 1917-20 Kacaankii Mahombe ee reer Moosaambiik, amase kii reer Hareero ee Galbeedka Koonfur Afrika, dar taariikhdu illaabi karto maaha. Koonfur Galbeed Afrika 90,000 ayaa qudha laga jaray, 120,000 oo reer Tansaaniya ahna waxa unuunka ka gooyaya Jarmalka; in kasta oon tiro koob la hayn waxa uun la ogsoon yahay in dadka reer Koongo kala bar oo bar la ciribtiray intii 1900 iyo 1930 u dhaxaysay.

Sidoo kale ayaan la garan karin intii kaga le'aatay dadka Bantuuga ku hadla, dagaalladii Kaafir «Kaffir Wars». Nin gabayaa ah oo ka horjeeday gumeysiga, sifihii Afrika lagu galay wuxuu ku soo koobay :

Wax kasta oo dhaca waxaan haysannaa bunduqa Maaksiin iyana ma haystaan».

Afrikaanku horay bay waxay ka soo doogteen naxariis darradii ganacsiga aadmiga, xusuuqii gumeystahana way ka jiiral gudbeen, ka dib markay u jilib dhigeen sutidana u qabteen duullaannadii gumeystaha. Dalalka qaarkood in door ah ayay ku qaadatay sidii xukunka gumeystayaasha loo hoos keeni lahaa. Soomaaliya - qaybta waqooyi - Ingiriiska umay suuro gelin inuu taabo ilaa dhammadkii dagaalkii koowaad ee Adduunka.

## AFRIKADA BARI IYO KOONFUR AFRIKA
## QAYBTA DHULKA IYO SHAQO-QASABKA

Dhulka sidaan horayba u tilmaannay gumeystayaashu ninka Afrikaanka ah way ka duudsiyeen xaquu u lahaa in uu beerto, amase dego dhulkiisii. Maxaa yeelay, dhulka waxay reer Yurub rabeen inay iyagu macdan ka qotaan ama beero waaweyn ka samaystaan, si ay macaash xoog leh uga durdurtaan. Si taasi meel mar ugu noqotona, siyaado fool xun oo dhac ah ayay ku kaceen. Ingiriisku siyaabuhu u dhacay dhulka dalalka uu gumeysto aan tilmaansanno. 1890kii waxa uu caddeeyey in «si kastaba awoodda Boqortooyada Ingiriisku ha ku timaado, ha noqoto mid ku timid mucaahado, siin, ama siyaabo kale oo sharciya, dhulku wuxuu hoos imanayaa dawladda Ingiriiska sidiiyoo, dhulkaas loo soo gooyay amase la qaybsaday». Sidaas awgeed Ingiriisku wuu ku xadgudbay macaahadooyinkii uu la galay dalalkaa, dhulkoodiina isaga ayaa yeeshay. Sifaha kale ee Ingiriisku dhulka ku qaadanayey wuxuu ahaa «Ordinance» waxayna ku aadayeen in dhulka si been ah loo seero.

Inta badanna dhulkaas oo ahaa meelaha macdanta lagu tuhmayey, ayaa si qasab ah ninka maamulka hayaa uga saxiixi jirey dadka waraaqo ah kiraynta dhulka oo (90) sagaashan sannadood ah, amase Mileteriga ayaa loo qoondeyn jirey qaybo dhulka ka mid ah. Afrikada Bari iyo Koonfur Afrika dadka iyadoon la tixgelin ayaa maalin cad laga qaaday dhulkoodii. Kiiniya, Ingiriisku wuxuu seeray dhul aad u fidsan si dadka caddi u degaan kaddib markii uu dagaalkii koowaad ee adduunku dhammaaday 1932 amar Ingiriisku soo saaray wuxuu ka mamnuucay ninka madow iyo kan Eeshiyanka ah inuu dego, ama kiraysto dhulka lagu magacaabay dhulka sare ee dadka cad loogu tala galay.

Roodiishiya sida Koonfur Afrika, ayaa dadka Bantuuga ku hadla xuquuqdoodii iyo dalkoodii laga duudsiiyay. waxa lagaga mamnuucay shaqooyinka farsamada, xukunkii macdanta iyo shaqada iwm.

1930kii, xukunkii qaybinta dhulka, wuxuu dhulka Roodiishiya u qaybshay laba : Qayb ka kooban magaalooyinka reelwayda iyo dhulalaka la beeran karo caddaanka ayaa isku qoray. Dhulka qaybtiisa kalena Afrikaanka ayaa lagu sandulleeyey inay degaan tallaabana aanay ka soo kicin.

Waxaa kale oo laga mamnuucay inay samaystaan ururro, inay shaqo farsamo bartaan, ama xuquuqdoodii u hadlaan. Midabtakoor hor leh ayaa Roodiishiya ka hirgalay, sidoo kale Kiiniya, Cadan, Eeshiyan iyo Afrikaan aan is dhex geli karin ayay ku sugantay. Dadka Afrikaanka ah ee Roodiishiya, Kiiniya iyo Koonfur Afrika si midiidsiya ayaa loola dhaqmay.

Soomaaliya gumeystaha Talyaanigu wuxuu soo rogay, in dhulka in alla intii aan cidi degganeyn uu yahay hantida Dawladda Talyaaniga, awoodna u leedahay in ay ka qodato macdan ama ka falato beero. 1907, 46,800 oo hektar oo ku yaal labada webi dhinacyadooda ayaa Shirkado Talyaaniyu qandaraas loo siiyay. Shanti sano ee horreysay cashuurtu waa laga dhaafay, labaatankii sano ee ku xigtayna hektarkiiba 2 liire ayuu ku cashuurnaa. 1933, 60,995 hektar ayaa sifahaas oo kale Talyaaniga deggan Soomaaliya loo siiyaya, 20,142 hektar oo kalena ganacsato yar yar oo Talyaani ah ayaa la siiyay. Sharikadahaas SAIS ayaa ugu hanti badneyd waxaanay ka hanti-abuurtay ciidda, dhididka iyo dhiigga dadka Soomaaliyeed. SAIS waxay midiidsan jirtey shaqaale 6 kun kor u dhaafay, oo u falaayey beero cudbi, Sonkor iyo wax la mid ah isugu jira.

Intaas waxa soo raacayey Beeraha Asandaha la magac baxay uu Talyaanigu Janaale iyo Kismaayo degaankooda uu ka samaystay. Ninka ka shaqeeya Asandaha waxa mushharo uu u qaadan jirey sannadkii 25 liire, ama guri cariish ah.

Talyaanigu ninkaas uu midiidsado wuxuu u oggolaa in uu qoto nus hiktar la waraabsho, ama uu hiktarkii dheeraad ah ka baxsho 100 liire. Intaas waxa u soo raacayey 4 digaagadood iyo sac. Toddobaadkii shan casho ayuu qofku shaqayn jirey. Ninku maalintii wuxuu qaadanayey 2.50 liire, naagtuna 2 liire.

In kasta oo Talyaanigu ku andacoonayey in dadka uu gumeystaa yahay qayb ka mid ah Talyaaniga, hase ahaatee, dadka Soomaaliyeed sifahaa ulama dhaqmin, dhulkana uma hormarin. Siday u nool yihiin, sidey u dhashaan amase u dhintaan cidina dan kama lahayn. Caddaanku dan kama lahayn dhegna umay dhigayn xuquuqda ninka madow.

Dhulka iyo macdanta ay caddaanku dhaceen waxay abuurtay in dad badan oo Afrikaan ah laga dareersho degmooyinkoodii, si ay ugu shaqeeyaan gumeysatada reer Yurub. Dalalka la gumeysto intooda badan gumeystayaashu dadka ayay qasab kaga dhigeen inay u shaqeeyaan caddiinka beeraha leh, ama kuwa macdanta qota. Koongo, dalalka Boortiqiiska, iyo «French Equatorial» si aad iyo aad u laxaad weyn ayaa dadka loo sandullayn jirey. Caddaanka Koonfur Afrika, iyagu waxaabay la ahayd dadka madow in addoon Eebbahood ugu tala galay ay yihiin, niyo sifaha lehna way ula dhaqmeen. Tabta kalee gumeystayaashu shaqada midiidsiga ah ugu qasbi jireen Afrika waxay tahay tan lagu tilmaamo sandullayn dadban.

Taasi waxa ahayd in ninka cashuur lacag ah lagu soo rogo. Iyadoon ogsoonnahay ninka Afrikaanka ahi in aanu lacag haysan, dhulkiisana laga dhacay. Taasi waxay keentay in Afrikaanku uu shaqo raadsado si uu cashuurta u baxsho, haddii uu bixin waayo Booliiska ayaa xabsiga u taxaabi jirey. Labaduna u kala dhig ayey ahaayeen. Shaqaynta qasbiyada ahi waxay keentay in Afrikaan tiradoodu malaayiin gaarto ay u doolaan shaqo qasab ah. Haddaan tilmaan u soo qaadanno Nayaasaland oo iminka ah Malaawi; xogwarran 1935kii soo baxay wuxuu sheegay, in nidaamkii habeynta bulshadu uu dhaawacmay, marka ay boqolkiiba 30% 60% ragga qaangaarka ahi ay ka maqan yihiin, guryahoodii, degmooyinkoodii iyo qoysaskoodii. Dadka ree Malaawi waxa loo shaqo gayn jirey macdanta «Rand» iyo goobaha maarta ee Roodiishiya, iyagoo ku shaqaynaya sifo midiidsiye loona oggolayn (Shaqo farsamo) aadminnimana loola dhaqmayn. Haddaan tusaale labaad u soo qaadanno dalalka Boortiqiisku gumaysan jirey, xogwarran soo baxay 1947kii wuxuu sheegay in Angoola xaalkeedu ka daran yahay kan addoonsiga.

Addoonka waaba la iibsadaa sida xoolaha oo kale, ninka lihina sida faraskiisa ama saciisoo kale ayuu u dhaqaaleeyaa. Angoolase ninka lama iibsado, dawladda ayaa laga kiraystaa, inkastoo loo qabo inuu yahay nin madax bannaan. Ninka uu u shaqeeyaana dan kama yeesho haddii uu bukoodo, ama dhinto inta uu u shaqaynayo, maxaa yeelay, markuu jirrado ama dhinto mid kale ayuu soo ijaaranayaa». Dadka Afrikaanka ahi iyagoo u badan beeraley, markii laga qaaday dhulkii, gumeystayaashu dabadeed waxay u rogteen beero waaweyn iyo goobo macdanta ay ka qotaan, dhibaato ayaa ku timi nolol-raadcaysigoodii ku xirnaa beeridda.

Faransiisku Aljeeriya dhulkii laga beeri jirey sareenka, ariguna daaqi jirey, waxay u rogteen beero canab ah si ay khamri dibedda ugu dhoofshaan. 1953kii intii ay ku beereen canabka 4,000 oo ektar ayey ahayd 1953 waxay kor u dhaaftay 750,000 Akres.

Dadkii reer Aljeeriya gaajo ayaa soo foodsaartay. Isticmaarka ka hor ninka Aljeeriyanka ihi wuxuu guran jirey 5 kiintaal. 1900, 2 1/2 kiintaal iyada oo tirada intaa heshaa ay si yaraatay, maxaa yeelay, Faransiiska ayaa yeeshay dhulka inta la beeri karo. Sidaa awgeed malyuun ku dhowaad qoys oo reer Aljeeriya ahi ayaa dhulkoodii waayay. Dhibaatada sifahaas lihi inta badan waxay ugu laxaad weynayd dalalka ay caddaanku degeen. Hase yeeshee, dalalka kale qudhkoodu dhibaato kumay yarayn. Nayjeeriya inkasta oo falidda beeruhu ka doogatay siyaasadaha gumeystaha, xog-warran ka soo baxay 1951kii wuxuu tusayaa in 51% carruurta waddanka Nayjeeriya dhimato intaanay lix sano gaarin, iayagoo 70% carruurtaa Bariga nayjeeriya ee Cusbitaallada la dhigaana ay nafaqo-kadmeen.

Dhibaatadaas Afrikaanka ka abbaartay cuntada waxa u sabab ahaa gumeys-tayaasha oo u jeeday in waxa la soo saaro dibedda loo dhoofsho, halkaana lagu illabay soo saaridda dadku waxay cuni lahaayeen.

Masar halkay cunno ka soo saari jirtay cudbi ayaa gumeystuhu ka fashay, Gaanana (Kooko), Roodiishiyana Buuri (Koongo sidoo kale) ayaa loo rogtay xarun waxa laga soo saaro dibadda loo dhoofsho, dalalka Boortaqiisku gumeysto iyana ilo cudbi shuba ayaa laga dhigtay. 1950kii Baadari ka tirsan Beira oo ka warramay Moosambiik wuxuu sheegay «Goobaha cudbiga laga beero la iskuma shuqliyo sidii cunto looga soo saari lahaa. Kaddib markii gobollada ololaha cudbiga lagu qaaday, ciiddii hodanka ahayd ee miraha bixin jirtey iskeed ayey u gudhay. Intaan anigu-xukumo gobollaa jira dadku muddo lix bilood ah ay gaajo haysay ka dibna dhintay». Ulajeeddada aan u soo xigannay waraysiyadan maaha inaan canbaareyno, ama gafafkii gumeystayaasha isu dhulbuuxinno ee waa inaan ogaanno baahida jirtay inaan u aragno xaaladdu caynkay ahayd ama ilaa imminka ka tahay dalalka qaarkood.

Nololraadcaysigii ku xirnaa Beeridda Afrikaanka wuu ka dhintay, marinka qur ah ee u furmayayna wuxuu noqday shaqo addoonsiya. Kala bar oo ragga reer Basutland koonfur Afrikay ka shaqayn jireen. Malaawina intaa in ka badan ayaa laga dool qasbi jirey. Tansaaniya 40,000 baa kaga imaan jirey Burundi, Urundi iyo Moosambiik. Xeebta foolka Ifori Kost shaqaale badan ayaa kaga iman jirey Fooltada Sare sida si le'eg ayaa Gaana ay woqooyiga Foltada Sare shaqaale loogu soo qasbi jiray. Inta badan dadkaas la qasbay muddo 6 ilaa 12 bilood oo qandaraas ah ayey ku shaqeyn jireen, mushahar aad ugu yarna waa la siin jiray. In lagu qayaaso toban malyuun oo ka tirsan Afrikada lama degaanka ka hoosaysa ayaa ku shaqayn jirtay sifaha shaqo-dool qasabka ah, 3 malyuun oo kalena waqooyiga ka sarreeya lama degaanka ayay jireen.

## SIYAASADIHII GUMEYSTAHA

Afrika saddex siyaasadood ayaa gumeystayaashu ku maamuli jireen : Dhul-addoonsi, Abbaansi iyo Dhiibal. Intubase isku mid ayey ahaayeen, in kasta oo iyaku magacyo u kala bixiyeen. Dhul addoonsi walba waxa si toos ah maamulka ugu hayay Xafiiska gumeysiga ee ku yaal hadba dawladda dalkeega Rooma-London-Baariis. Sharciga iyo xeerka Barlamaannada gumeystayaasha ayaa dajin jirey, dadka la gumeystana kolnaba looma oggolayn lagamana garwaaqsanayn gobannimadoon.

Inkasta oo ay gumeystayaashu kala saaraan dhul-addoonsi iyo dhul-abbaansi wax u dhexeeya ma jiro markaan ku qiyaasno garta caalamiga ah. Dhulka dhiibaalka ah waxa la abuuray D.I.A. ka dib markii dalalkii Jarmalku gumeysan jiray Ururka Ummadaha loo dhiibay. Falsafadda hoostaalka u ah, dhulka dhiibaalka ah waxay

ahayd fiirada, in horumarinta dadkaasi ay abuurtaa ilbaxnimo la aamino. habkaas dhiibaalka ihi waa dhexdhexaadinta aragtida aayetashiga iyo fiiradda amaansiga oo dhinac ka soo jeedda iyo hungurayn daldhac ah, gumeysi iyo ku dul noolaansho oo dhinac kale ka soo jeeda.

Waa dhexdhexaadinta aayatashiga dalalka la gumeysto iyo gumeysiga imbiiriyaaliistaha. Fikradda amaansiga waxaad mooddaa in ay ka dadnimobiilsan tahay tan dhiibaalka ah. Waxayu ku aaddaa dadka la gumeysto in la dhaqaale miirto, lana «ilbixiyo». Hase ahaatee, la xurmeeyo xuquuqdooda, lana tixgelsho, lana ilaasho. Falsafadda hoostaalka u ah aragtida amaansiga waxay ina xusuusinaysaa oraahda Soomaaliga ah ee ah «jiirku markuu ku qaniino ayuu misana halkuu kaa qaniinay kuu afuufaa si xanuunka uu kuu ilowsiiyo. Amaansi macnaheedu waa in dadka la gumeysto la dhaqaale miirto, hase ahaatee, aan gumeystayaasha marna laga garan ayuu la rabay. Haddiiba reer Yurub ay dadnimo iyo ilbixini laab luleysay maxay dhaqaalaha iyo bulshadaba horumarin hor siyaasaddaas ay fushanayaan.

Waxaan ogsoonnahay caddeyna u haynaa in sababta ugu weyn ee soo laba kicisay ay ahayd mid dhaqaale ee ayan ahayn mid dadnimo-biil ah. Horumarinta waddooyinka, railweyada, buundooyinka, dugsiyada iyo cusbitaalladu waxay ahaayeen dad waddada u waarayay hirgelinta ku dulnoolaanshaha gumeysiga. Wax lagu tilmaami karo horumarin, oo gumeystayaashu ka qaateen dalalka ay gumeysanayeen, waa mid iyagu ay ku manaafacaadsanayeen; waddooyinka iyo isgaarsiinta ha noqoto ama cusbitaallada iyo dugsiyada. Maxaa yeelay dadka la gumeysto ayay ahaayeen kuwii ku baaqayey dhismaha dugsiyada; gumeystuhuna kii ka diidayey ayuu ahaa, Afrikaanka ayuu ahaa kan ku dooday marsooyin iyo waddooyin, ninka cad baanu ahaa ka hortaagnaa, ninka madow ayaa rabay horumar, gumeystaha caddina dib u dhac ayuu la rabay. Haddii reer Yurub ay dadnimo iyo ilbixini laab lulaysay maxay dhaqaalaha iyo bulshada horumarin hor leh ugu geysan weyday ? Haddiiba cusbitaallo ay dhiseen ulajeeddadu waxa ahayd gumeystayaashu in ay lafahooda daryeelaan, isla markaana aanay iska lumin awoodda ku dulnoolaanshaha. Dugsiyada waxay ku abuuran rabeen adeegayaal uga shaqeeya maamulka xafiisyada. Waddooyinka inta ay dhiseen jidad ayay u ahaayeen goobaha macdanta iyo beeraha waaweyn. Aan soo qaadanno siyaasadihii dhaqaalaha ee Faransiiska iyo Ingiriisku ay ka dhaqan gasheen Afrikada Galbeed.

### SIYAASADIHII DHAQAALAHA

Ingiriiska iyo Faransiiska aragtidooda ku aaddan dhaqaalaha iyo horumarinta isku mid bay ahayd, labaduba waxay rabeen in dalalka Galbeedka Afrika u habaan warshadahooda; waxay arkoonayeen in dhoofinta alaabta cayriin lacag gacmaha u galinayso dadka reer Afrika, taasina ay u suuragelinayso inay gataan alaabta reer Yurub ee farsamotuman, siyaasadda dhaqaalaha ee labada dalba waxay ahayd mid ay lafahooda uun ugu faa'iidayn rabeen. Miraha dhoofiska ee gudbaya ayay si aad ah u daba taagnayeen, hase ahaatee, dadka miraha cunta joogta ah u noqon kara uma fiiro lahayn. Sidaasi si le'eg ayey u hortaagnaayeen in warshado laga dhiso dalalka ay gumeystaan. Kookoo, Loox, Qumbe, Laws, Saan, Cudbi iyo Rabar ayaa galbeed Afrika beeri jirtay, reer Yurubna qiime jaban lagaga gadi jirey. Inta warshadaha reer Yurub lagu soo farsamotumo ayaa misna qiime qaaliya lagaga iibsan jiray dalalkaasi.

Bilowgiiba reer Yurub tallaabooyinka ay qaadeen waxay ku aadayeen ku dulnoolaanshaha dadka iyo irmaanta dalka. habkii gaddiska iyo lacagtii Afrikaanku isticmaali jiray hab iyo lacag ay leeyihiin bay ku baddeleen. Si ganacsigoodu u fido una baaho ayey ku dhaqaaqeen horumarinta isgaarsiinta, sidaa darteed waxay dhiseen reelweeyo iyo waddooyin. Intii u dhexaysay 1882 - 1906 Faransiisku wuxuu dhisay «Jid - tareen» 320 mayl fidsan oo isku xira Kays oo Webiga Sinigaal ku taal iyo Bamaako oo Maali ku taal.

Haddana wuxuu iskuxiray Seyntulwis iyo dakar. 1923na wuxuu isku xiray afartaas magaalo. Waxa kale uu ka sameeyey Reelweeyo Koonaakari, Abidjaan, Koloono. Ingiriiskuna 1896kii ayuu Siiraaliyoon ka bilaabay, Xeebta dahabkana 1896kii Nayjeeriyana 1896. 1932kii Siiraaliyoon waxay ka jirtay 311 mayl. Xeebta dahabka 512, Nayjeeriyana 1,905 oo mayl. Sida kan Faransiiska oo kale Jidtareennada ujeeddo gaar ah ayaa laga lahaa, reelweyga Siiraaliyoon ee sida xarafaka «Ya'» u dhigani gobollada qumbuhu ka baxo ayaa laga soo shexmadi jirey. Xeebta dahabka sidaas oo kale ayaa kan isu mar Takooraadi, Kumaasi iyo Ankaarana gobollada Kookaha beera laga sameeyey. Nayjeeriya sidaa si le'eg ayaa Jid-tareenku ku aadi jiray gobollada Qumbuha, kuwa Saanta iyo Hargaha soo saara. Horumarinta waddooyinka iyo reelweeyadu himilo dhaqaale oo keliya may lahayn ee waxay Ingiriiska iyo Faransiiska u suura gelin jireen in ay ciidammadooda hadba u qaadaan gobolka ama degmada gadood ka dhaco.

Dhinaca dugsiyada ama waxbarashada haddaan soo qaadanno gumeystayaashu intee bay hormarsheen ayaan isweydiin karnaa.

Iyada oo dhismaha iyo qalqaalinta waxbarashadu bilaabatay 1945-51 ardayda waxbarashada u aadday dalka Ingiriiska waxay ku dhoweyd 10.000, iyada oo Faransiiskana intaa in le'eg ay joogtay.

Dalalka Boortoqiisku gumeysto ayaga qaddar ayaa heerka Jaamacadda gaaray. Angoola iyo Moosaambiik carruurta dugsiyada Hoose-Dhexe gashaa way ka yar yihiin 1% ilaa hadda. Dugsiyada Sare wax galaana maba jiraan. Beljimka iyo Talyaaniga sidaas oo kale ayeyna u dhiirri galin jirin waxbarashada.

Dawladda Beljimku iyada oo maamuleysay dad aad u hodan ah, markii Koongo madaxbannaanaatay 20 Jaamici ah ayey lahayd.

Tanganiika waxay hoos timi xukunka Ingiriiska 1919kii, 40 sano ka dib tirada dadku 10.000.000 ayey gaartay. 1959 ardayda ku jirtay dugsiyada Sare ilaa fasalka Afraad tiradoodu waxay dhammeyd 318, inta shahaado heshayna 245. Isla waqtigaas Kiiniya iyada oo dad (8.000.000) malyuun ah, 860 arday ayaa Shahaado ka qaatay dugsiyada Sare 1960kii.

Waqooyiga Soomaaliya oo ku hoos jirey addoonsiga Ingiriiska 100 arday ayaa galay dugsiyada dhexe. 20na dugsiyada sare 1958kii.

Tiro koob haddii aan kala soo baxno waxaan arki karnaa in ummadaha Bariga Afrika oo (26.000.000) malyuun tiro le'eg, iyaga oo sanooyin badan ku hoos jiray maamulka gumeysiga, ay muteysteen 2000 iyo dheeraad shahaado oo u dhiganta 120.000kii qofba shahaado bar inay ku soo hagaagto.

Roodiishiyada waqooyi oo hodan ku noqotay dhiigga iyo dhididka Afrikaanka 1958kii waxay lahayd dugsi sare oo keliya. 1958kii, 1214 inan oo Afrikaan ah ayaa galay dugsiga hoose, inta fasalka Afraad ee dugsiga sare gashayna waxay dhammaayeen 13 ruux. Kiiniya haddii aan tusaale u soo qaadanno dugsiyo gaar u ah

carruurta caddaanka ayaa Ingiriisku dhisay, Afrikaankana kuwa baadarigu maamulo ayay wax ka baran jireen.

1930kii reer Kiiniya waxay dhisteen dugsiyo u gaar ah carruurtooduna wax ku bartaan. Siyaasadda Faransiiska ee ku aadda waxbarashada waxa ay ahayd inaan inta wax barataa marnaba dhex gelin dadweynaha. maxaa yeelay faransiisku wuxuu si been been ah uga raariday inay yihiin niman la mid ah, oo Faransiis ah. Maamulka xafiisyada lagama qayb gelin jirin, intooda badanna dalka Faransiiska ayaa shaqo laga siin jirey. Ingiriisku sidaa oo kale ayaanu u dhiirrigelin jirin dadka waxbarta inay dalkooda u shaqeeyaan. Waxbarshada farsamada gacanta aad buu u hortaagnaa, dadka ku shaqeeya cilmiga farasamadana ilquursi iyo takoor buu ku eegi jirey. Ninka Afrikaanka ah looma oggoleyn inuu darajo xil leh ku shaqeeyo. Beljimka iyo Talyaaniga waxay himiladoodu ahayd waxbarashadu inayna dhaafin heerka hoose, si ay u helaan dad uga shaqeeya beeraha, isgaarsiinta iyo warshado yar-yar ah.

Haddiiba waxbarashadu ay tahay kaalinta ugu weyn ee horumarinta lagu gaari karo gumeystayaashu waxbarashada way cuna qabateeyeen.

Inta waxbaratana waxay ka dhigi rabeen niman Ingiriis, Talyaani ama Faransiis ah oo u socda una fikira una noolaada sidooda.

Xiriir dadnimo ah muu ahayn kan kulmiyay labada dhinac, ee wuxuu ahaa xirirr muquunsi iyo hoos u dhigidda ninka la gumeysto oo loo rogay horjooge, saajin, jeel-ilaashe, Boy iyo qalab wax soo saare.

Ingiriiska, Faransiiska, Isbeyn, Talyaaniga iyo kuwa kaleba aragtidooda ku aadda sida dadka la gumeysto uga qayb gelin lahaayeen talada, waxay ahayd in dadka la gumeysto horta ay gaarsiiyaan heer ay xil iskuxukun muteystaan. Heerkaas goorta la gaarayana iyaga uun baa sheegi karayey. Faransiiska siyaasaddiisu waxay u taagneyd tan la yiraahdo «Assimilation». Taasoo ah, dawlad dhexroorsan oo leh siyaasad isku mid ah Baariisna talada looga gooyo. Dalalka Faransiisku gumeystaana waxay ahaayeen qayb ka mid ah dalka Faransiiska. Af faransiiska in la hirgesho, lana kala sooco dadka inta yar ee indheer-garatada ah oo iyagoo leh sadbursi, iyo dadweynaha intiisa kale ee dalalka la gumeysto oo ku tilmaansan inaanay garasho lahayn. Bulshada ku nool dalalka la gumeysto waxay u qaybsanayd «Citoyens» oo ahaa dadka Faransiiska ah, «Assimiles» oo ahaa dadka Afrikaanka ah ama iska dhalka ah ee dhaqanka Faransiiska qaatay una badan dadka ciidammada ama xafiisyada ka shaqeeya.

Waxa intaa soo raacayey «Sujets» oo ahaa shaqaalaha iyo beeraleyda. Ninka «Assimiles» wuxuu noqon karayey Faransiis «Citoyen», hase ahaatee kan «Sujet»ya ihi ma noqon karo ilaa uu horta noqdo «Assimile».

Waxaa soo raaca «Tranje» oo aan halkaas kaba gudbi karin. Nidaamkaas ayey bulshada dalalka Faransiisku gumeystaa u dhisnayd, sidoo kale ayey u sugnaayeen dalalka Bortuqiiska iyo Isbaanishku gumeystaan.

Ninka Afrikaanka ihi kolna muu noqon kareyn nin Faransiis ah, sidaa awgeed ayaa xeer u yiil ahaanshaha nin Faransiis ah, mid kalena u yiil ahaanshaha qof dadka la gumeysto ah.

Ingiriiska siyaasaddiisu waxay u fiiganayd dhexfur iyo kala jabin ku dhisan xukun dadban iyo dhiirrigelin waxay ku tilmaamay «Afrikaanku inuu ahaado Afrikaan». Si been been ah ayuu Ingiriisku isugu dayey inuu dhiso hiddaha, dhaqanka, iyo ilbaxa Afrikaanka isaga oo hiyiga ku haysya in uu Afrikaanka qaybsho dabadeedna xukumo. Baraarujinta qabyaaladda iyo siyaaso qabiilka iyo baab'inta farshaxanka iyo farsamada Afrikaanka, ayuu ku adeegsan jiray. Had iyo jeer gumeysiga

waxa jiraalkiisa suuragelinayey heshiiska uu la lahaa dad ka mid ah dadka la gumeysto. Kuwaasi waxay ahaayeen dad awood ku leh bulshadaasi - Sheekh - Amiir Caaqil - kuwaas ayaa si been ah Ingiriiska uga raariday, in ay iyagu dalkooda xukumaan, hase ahaate Caroogga uu isagu afuufo ayey ahaayeen. Si aan u garanno siyaasadihii Faransiiska iyo Ingiriiska, aan hadda bal tilmaansanno nidaamkay Afrikada galbeed ku maamuli jireen.

## MAAMULKII GUMEYSATADA AFRIKADA GALBEED

Jarmalka, taliskii Afrikada galbeed wuxuu ku ekaa sanooyin gaaban. Dagaalkii koowaad ee Adduunka ayaa Ingiriiska iyo Faransiisku qabsadeen Toogland (1914) iyo Kaamaruun (1916). Jarmalku intii u dhexaysay 1884 - 1914 wuxuu ku fooganaa qeexidda soohdinta labaad dal iyo hirgelinta taliskiisa gumeysiga. Sidaa darteed raad cad oo la tilmaansan karo muu yeelan maamulkiisi. 1919kii ayaa Ururka Ummaduhu, Kamaruun iyo Toogoland u qaybshay Faransiiska iyo Ingiriiska, qaybta bariga ee labada dal Faransiiska ayaa loo dhiibay, qaybta galbeedkana Ingiriiska. Ingiriisku qaybihiisa Toogoland wuxuu la maamuli jirey Xeebta dahabka, qaybtiisa Kamaruunna Nayjeeriya. Faransiisku gooni ayuu ugu talin jirey labada dal. Si kastaba ha ahaatee, labada dal Ingiriiska iyo Faransiisku habkay dalalka ay gumeystaan ku maamulaan ayey Toogo iyo Kamaruun ku maamulayeen. Hase ahaatee, kol haddii ay labada dal ahaayeen «Dhiibal». Faransiisku kumuu fulin siyaasaddiisi shaqo.qasabka iyo sandullaynta ahayd. Sidii tartankii loo galay kala qaybinta iyo qodobka Afrikaba u ahaa, ayaa taariikhda maamulka gumeystadu u tahay sooyaal la xiriira maamulka Ingiriiska iyo Fransiiska.

## FARTA MAAMULKII FARANSIISKA IYO INGIRIISKA

Senegaal waxay ahayd dalkii ugu horreeyey ee Faransiisku ka gumaystay Afrikada galbeed. 1983kii Xeebta Caaga iyo Gini, 1900kii Dahomi iyo Suudaan ayuu mid walaba u sugtay dal uu gumeysto. Afrikada Galbeed ee Faransiisku gumeysto ciidammada Faransiiska ayaa fadhiyey ilaa iyo dhammaadkii dagaalkii koowaad ee adduunka, markaas oo Faransiisku taabay Nayjar, Fooltada Sare iyo Muritaaniya. Faransiisku Afrikada galbeed siddeed dal-gumeysi ayuu u qaybshay. Hase ahaatee nidaam siyaaso, dhaqaale iyo maamul isku mid ah ayuu ka hirgashay. Si aan markaasi u garanno maamulkii Faransiiska ee Afrikada galbeed waxa horta inala gudboon inaan falanqayno fiirooyinkii taageerayey.

## SIYAASADDA FARANSIISKA EE «ASSIMILATION» (DHAQAN-ROGGA)

Siyaasadda Faransiisku waxay ku dhisnayd fiirada «Asimileyshan», oo ah in dadka la gumeystaa qaataan dhaqanka Faransiiska. Ka dib markuu hirgalay Kacaankii Faransiiska ee 1789kii dadka Faransiisku waxay qabeen in aadamigu isku mid yahay oo uu siman yahay. Waxa lagu dhawaaqay in ninka Faransiiska ah iyo kan ka tirsan dalalka la gumeystaa siman yihiin, ahaanshaha nin Faransiis ahna waa loo gudbiyey. Fiiradaasi waxay ka biqishay yaqiinta faransiisku u qabay dhaqankoodu inuu yahay mid adduunka oo dhan ugu hodansan uguna sarreeya, sidaa darteedna waxay rabeen inay ka qayb gashaan dadka ay gumeystaan. Si taas loo helo waxay la ahayd in dadkaasi horta la baro af Faransiiska, lagulana dhaqmo xeerka Faransiiska, loona gudbiyo xuquuqda siyaasadda iyo bulshada Faransiiska. faransiiska siyaasaddaas iyada ah wuxuu si door ah uga dhaqan gelshay dalka Senigaal oo keliya. 1848kii ayaa Faransiisku u gudbiyay dadka reer Senigaal ahaanshaha niman Faransiis ah,una oggolaaday inay doortaan mudane uga qaybgala Golaha Guud, ee Ummadda Faransiiska ee ku yaal Baariis. Senegaal wuxuu Faransiisku qaadsiiyey Habka Dawl-

daha Hoose ee Faransiiska oo ku dhisan Beelo. 1872kii Senigaal waxa ka jiray laba beelood, hase ahaatee 1880kii waxa la sameeyey Beesha Rufsique, 1887na Beesha Dakaar. Beel waliba gole u gaar ah ayay lahayd oy soo doortaan raggu iyo guddoomiye golaha madax u ah. 1879 gole guud ayaa la abuuray, oo ka koobnaa dad ka tirsan beelaha. Beelahaasi Senigaal ka jiray aad bay uga duwanaayeen dalalka Afrikada Galbeed ee faransiisku gumeysto.

Senegaal dadka deggana waxay la mid ahaayeen kuwa Faransiiska ah. Hase ahaatee, ninka ka tirsan dalalka galbeed Afrika ee Faransiisku gumeystaa isagu muu noqon karayn nin Faransiis ah ilaa horta uu akhriyi karo af Faransiiska, qorina karo kuna hadli karo; loona aqoonsado inuu Faransiiska daacad u yahay, muddana u shaqeeyey dawladda. Ninkase ku dhasha afarta beelood ee Senegaal toos ayuu u noqon jirey qof ka tirsan dadweynaha Faransiiska.

## FIIRADA URURKA

1880kii ayaa fiiradii «Assimilation» ay dadkii Faransiisku cambaareeyeen. maxaa yeelay hortiiba Faransiisku himiladiisu mid dhaqaale ayey ahayd. Sidaa darteed ayaa ganacsatadii Faransiisku ku kaceen fiiradaas iyada ah, iyaka oo tay rabeen ahayd siyaasad qabiil iyo hoosdhigid ay ku fuliyaan ku dulnoolaanshaha dadka iyo irmaanta dalalka. Waxay ka baqeen in rag la tartami karaa ka soo baxaan dadka Afrikaanka ah. Waxay markaasi ku andacoodeen in Afrikaanku yahay duul gooni ah oo aanay suura geli karin inay ku biiraan dadweynaha Faransiiska ah. 1905tii ayaa Faransiisku beddelay siyaasaddiisii «Assimilation» ka halkeediina wuxuu geliyey tan la yiraahdo «Asosiyeshan». Siyaasadda aragidani waxay meel marinaysay in dadka la gumeysto la tixgelsho dhaqankooda, qayb walbana loo agoolaado inay ku hormarto sifahay rabto, halkii lagaga qasbi lahaa dhaqanka Faransiiska. Taas haddaan u soo oo qabyaalad iyo siyaaso qabiil saldhig u ahaa. Tusaale haddan u soo qaadanno Xeebta Soomaaliyeed ee Faransiisku gumeysan jirey wuxuu u baxshay «Cafar iyo Ciise» isaga oo tuu hiyiga ku hayey ahayd in qabiilku surmeeyo baraarujinta siyaaso, gobannimadoonka iyo qarannimad dalka Soomaaliyeed. Nidaamka sifaha le ayuu ahaa, waxaanu adeegsan jirey caaqillo kala sarreeya. 1) Madaxda dalka ama gobolka, 2) Madaxda beesha.

Dadkaas Faransiisku ku adeegsanayey waxay guri jireen cashuurta, xeerka iyo sharciga Faransiisku dajiyana waa ay fulin jireen, dadka ciidammada loo qorayo iyo kuwa shaqada sandullaynta ah loo dirayana iyaga ayaa ku taageeri jirey gumeystaha.

Maamulka Faransiisku mid aad u dhexroorsan ayuu ahaa. Waxaanay Faransiisku qabeen in dawladi ay yeelato xukun adag oo dhexroorsan.

Taas waxay u yeelayeen iyaga oo ka baqo qabay xoogga ay yeelan karto dawlad hoose oo qaranka Faransiiska hais gelin karta. Dalalka galbeedka Afrika iyagoo is barbar yaal waa ay ka suura gashay in awood dhexroorsan lagu maamulo. Marka Senegaal laga reebo, dalalka uu Faransiisku gumeystaa bulshadeedu waxay u kala baxaysay kuwo Faransiisnimo loo aqoonsan yahay iyo kuwa faransiisnimada ka baxsan. Kuwa dambe waxay ahaayeen qayb bulsho oon xuquuq la wadaagi karin kuwa ku tilmaaman Faransiiska. Waxay ahaayeen qaybta dhaqanka Faransiiska aan weli liqin, oo xeer iyo sharci ka duwan kan loo dhigay Faransiiska lagu qaado.

Ninka Faransiiska ah ashaqada qasabka ihi may haysan hase ahaatee kan kale waa lagu sandulleyn jirey, ciidammadana muddo dheer ayaa laga rabay inuu ka shaqeeyo. Galbeedka Afrika ee Faransiisku gumeysto iyo kuwa kaleba sifahaa dadka loo kala sooco, dar mudam oo Faransiis ah, iyo kuwo aan garasho lahayn oo hoos u dhigan ayaa ka hirgalay.

## XUKUNKII DADBANAA EE INGIRIISKA

Ingiriisku, sida Faransiiska oo kale ayuu qabay in dhaqankiisa iyo Farsugyada bulshadiisu adduunka ugu wanaagsan yihiin. Ingiriiska waxay la ahayd in Afrikaanku dib u dhacsan yahay, sidaa awgeedna aanay wax ku qabsan karaynin u gudbinta farsugyada bulshadeed ee Ingiriiska. Hase ahaatee, waxa Ingiriisku watay in Afrikaanka loo tabiyo waxa uu ku tilmaamay fiirooyibka cusub ee dawladda, taasoo uu ula jeeday fikradda Ingiriisku ka qabo dawlad. Sidaa awgeed wuxuu Ingiriisku ku dhaqaaqay inuu joojiyo waxyaabo ay ka mid yihiin ganacsiga dadka, hurida iyo ururrada qarsoodiga ah. Ingiriisku dabeed wuxuu isku dayey inuu xukumo dalalka uu gumaysto isaga oo adeegsanaya farsugyada siyaasadda ee Afrikaanka. Taasi waxase sabab u ahaa, isaga oo Ingiriisku aan haysan dad ku filan oo uga taliya dalalka uu gumeysto, iyo isaga oon diyaar u ahayn in ay lacagi kaga baxdo maamulka dalkaasi uu gumeysto.

Iyadoo aan ogsoonnahay in ulajeeddada weyn uu lahaa ahayd mid dhaqaale, wuxuu rabay inuu saylad u abuuro alaabtiisa farsamotuman, dadka galbeed Afrikana u lisaan irmaanta dhulka. Si taasi u hirgasho wax dhaafsiisan talis gumeysi muu rabin inuu maareeyo.

Sidaas darteed ayaa Ingiriisku dhaqan gashay xukunka lagu magacaabo «Xukun dadban». Wuxuu ku andacoonayey inaanu isagu dalalkaasi u talinin ee dadkoodu ka taliyaan, kuwa talada lihina ay yihiin caaqiollada iyo Salaadiinta. Hase ahaatee, runtu waxay ahayd in Ingiriisku talada lahaa, cuqaasha iyo Salaadiintana uu ku adeegsan jirey. Odayaashaasi waxay qayb ka heli jireen maamulka dawlad hoose, gaar ahaan dhinaca xeerka iyo sharciga.

Haddaan tilmaan u soo qaadanno Nayjeeriya, 1900kii marka laga bilaabo ayaa Ingiriisku caaqillada ka qayb gashay maamulka dawladda hoose. Ninkii barasaabka ka ahaa oo magaciisu ahaa LUGARD ayaa meerisyada u tolay siyaasadda xukunka dadban. Isaga oo aqoonsaday maamulkii dhexroorsanaa ee amiirrada, dad Ingiriis ah oo u shaqeeyana aanu lacag u ahayn, isgaarsiinta iyo waddooyinkuna aanay hormarsanayn, waxa uu LUGARD, awoodsaday farsuga siyaasiga ah ee amiirrada. Wuxuu oggolaaday inuu tixgesho diintooda muslinka ah, inya gurtaan cashuurta ay qaadan jireen, isla markaana ay maxkamadahooda maamushaan. Gobol walba wuxuu ka abuuray maxkamad abbaansi oo ahayd maxkamadda racfaanka. Ingiriisku waxa uu ku dadaalay inaan waqooyiga Nayjeeriya xeerka Ingiriiska laga hirgelin. Lacagta maxkamadaha ka soo baxda rubuc ayaa dawladda dhexe u gudbi jirtay. Ninka amiirka ah, waxa ku xigay odayga degmada, kaasna waxa ku xigay odayga tuulada. Ingiriisku wixii uu rabo in la fusho amiirka ayuu u sheegi jirey hadba waxa laga dooni rabo, isna madaxda gobolka, kaasina ka degmada. Ingiriisku wuxuu qabay in dhibaatooyinka maamulka dalalka la gumeystaa ay ku dhammaan karaan, habkaas uu LUGARD hirgashay ee xukunka dadban 1931kii Xeebta dahabka ayaa laga hirgashay, 1939kiina Siiraliyoon, 1933na Gaambiya. Si kastaba ha u meel maro ee Ingiriisku muu mahadin habkaasi uu is lahaa ku xeel bax.

## TAKOOR IYO MIDAB-TAKOOR

Dalalka ay gumeystayaashu ka dhaqan-geshaan Takoor iyo Midab-takoorba waxay ahaayeen kuwa ay degeen dadka reer Yurub: Aljeeriya, Kiiniya, Waqooyiga iyo Koonfur Roodiishiya, Mosambiik, Angoola, Koonfur Afrika iyo Galbeed Koonfur Afrika.

Koonfurta Afrika bilowgiiba dadka caddaanka ahi «Dhaj» dhulkii intii ugu hodansanayd ayaabay isku qoreen. Ninka madow ama kan midab cad aan lahayn waa laga xarimay inuu dego ama fasho dhulkii uu ku dhashay kuna barbaaray.

Ninka madow waxa laga mamnuucay inuu qabto shaqo farsamo, si loo hubiyo inaanu nin cad nin madow weligii ka hoos shaqayn, amase ay shaqo isku mid ah qabteen. Waxa si tifaftiran loo hirgeliyey nidaamkaas shaqada 1926kii ka dib markii la soo saaray «Xukunkii Shaqada». 1950kii dawladda Koonfur Afrika waxay soo saartay «Xukunkii deggaanshaha», kaasoo dhulka qaybtiisii sii adkeeyey kuna aaday in qolo waliba ay degi karto uun inta loo qayday, isdhexgalna aan loo oggolayn.

Sidaa darteed, ayaa caddaanka, Eeshiyanka iyo dadka Afrikaanka loo kala qoqobay. 1936kii iyo 1951kii waxay dawladdu mamnuucday liistadii guud ee wax lagu dooran jirey. Liiskii dadka madow iyo dadka midabka leh gooni ayaa loo qoray codkoodiina waa la dafiray. 1959kii dawladda Koonfur Afrika xeer cusub ayey soo saartay si ay siyaasaddeeda foosha xun ee midabtakoorka ah dhidibbada ugu adkayso. Iyada oy maan qaadday falsafadda sadbursiga ninka cad ayey misna si been ah ugu andacootay inay hore u marinayso nolosha dadka madow. Waxay soo saartay nidaam ay ku tilmaantay horumarinta dadka Baantuuga ah 1959kii.

Nidaamkaas, oo si cad loo arki karo inuusan marnaba dadnimobiil ku lug lahayn, wuxuu si been been ah ugu hawoonayaa dadka madow. Wuxuu amrayey inay ku dhaqmaan goobaha loo seeray, halkoodaasna horumar ay ka samaystaan, beero, macdan, xeer iwm, is xukunna isgaarsiiyaan.

Nidaamkaasi waa mid la yaab leh, maxaa yeelay, dhulka inta ku magacaaban dadka madow wuxuu baaxad le'ekaa boqolkii 9.6%, marka dhulka guud ahaan badkiisa la eego. Ka dib markii Koonfur Afrika nidaamkaas loo yaqaan Baantustaans samaysay wax yar ayaa dhulkii madowga loo qoondeeyey ku kordhay, waxana laga dhigay 12%.

Iyada oo dadka madoobi tiro le'eg yahay 8 malyan, kuwa cadina 2 malyan, qaybta sifahaa lihi waa mid aan la qaadan karin.

Koonfur Afrika sababta ugu weyn ee ka indha tirtay xuquuqdooda bini'aadanka waa hamuun ay u qabto hanti abuur iyo sedbursi. Maadaama dadka madoobi ka badan yahay waxay caddaanku u fiigteen inay ku dul noolaadaan xoogga dadka madow iyo khayraadka dalka. Sidaa awgeedna ayey u sameysteen sharciyo, hub lixaad lehna u qaateen si ninka madow loo cadaadsho looguna shaqeysto iyadoon marnaba loo oggolayn inuu ka qayb qaato nolosha horumarsan ee isaga tacabkiisa iyo dhididkiisu abuuray.

Intii ugu horreysay gumeystada Koonfur Afrika waxay soo galeen 1653kii. Sidii Ingiriiska waqooyiga Ameerika degay ula baxay bulsha cusub oo la yiraahdo «Maraykan, »ayaa nimanka Dhajka ihi Faransiiska iyo Jarmalku ula magac baxeen Afrikaanars «Boers». Maraykanka way u suurogashay in ay dadkii Hindida ahaa ka dhaceen, kalana wareegaan dhulkoodii runtiina ciribtiraanba. Hase ahaatee ninka madow xasuuqii lagu qaaday waa uu ka doogtay, ilaa haddana afar laab ayuu uga badan yahay kan diirka cad leh. Dadka madow iyo kuwa cadi inay isdhexgalaan si xoog iyo tab leh ayey isu hortaagtay qawleysatada Koonfur Afrika.

Magaalooyin iyo Dugsiyo yar-yar ah ayaa dadka madow u gaar ah kuwa waaw-eyn ee nalka iyo laamiga lihina dadka cad.

Si aan laysu dhaxgelin dhismaha fagaaraha ku yaal, Basaska iyo Tareennada, midab waliba meel gaar ah ayuu leeyahay.

1954kii dugsiyo ay dhiseen baadariyo kiristaan ah ayaa dawladda koonfur Afrika xirtay si aanay dadka madow waxbarasho sare u helin. In yar ka sokow, Afrikaanka

looma oggola inuu cilmi ama farsamo barto si aanu markaa u helin shaqo mushaar fiican laga siin karo. Magaalooyin dhan ayaa la xasuuqay iyadoo lagu maagay dadka oo is dhexgalay, kuwaas waxa ka mid ah magaalada Sofiya oo Joohaanisbeerj u dhow.

Sida dadka loo kala soocaa aad bay u yaab badan tahay. Shiineesku waxay xasaabsan yihiin Eeshiya, Jabaaniiskuna Yurubiyan. Nin wal oo koonfur Afrika ku nool xaashi aqoonsi ayuu leeyahay oo tilmaameysa hadba in uu yahay Yurubiyan madow ama Eeshiyan. Dadka madoobi waa inay sitaan goor walba si ay hadba u soo galaan ugana baxaan meelaha caddaanku deggan yahay. Nidaamkaas qaabka daran ee midab-takoorka ah waxaa lagu fushaa xeerar aad u qallafsan.

Koonfurta Afrika waxay ku tilmaanto «Xukunkii burburinta Shuucinimada», wuxuu mamnuucay in lays hortaago «nidaamkii kala saarka dadka» waxaanay Shuucinimada ku fasireen wax allaaliyo wixii caddaanka iyo madowga qoonsimaad dhex keeni kara. Dadka inta la qabta ayaa la xiri karaa muddo 90 casho ah inta aan maxkamad la hor keenin.

1960kii bulshada reer Shabarfiil ayaa ka gadooday sharcigaas isaga ah. Booliiska Transfaal ayaa dadkii soo bannaan baxay rasaaseeyey, halkaasna 69 qof qudha ka jaray, 20.000na xabsiga u taxaabay. Caddaanka koonfur Afrika midabtakoorkoodu wuxuu shaabbahaa kii Naasiga Jarmalku ay kula kaceen dadkii Yuhuudda.

**Kiiniya** ka dib markii dagaalkii labaad ee adduunku dhammaaday afar kun oo caddaan ah ayaa yeeshay 1/4 dhulka inta beermi karta, shan malyuun iyo barna oo madow ah dhulka intiisa kale.

Xukunka iyo taliska dhulka, sidaas oo kale ayaa dadka yar ee caddaanka ahi gacanta sare u lahaayeen. Golaha sharciga, dadka reer Yurub ee cad ayaa kaga badnaa dadka Afrikaanka dhaladka ah. Nayroobi caddaanka degganaa waxay si badheedh ah ugu taamayeen Kiiniya inya si joogta ah midab-takoor uga dhaqan geshaan.

Ururkii la odhan jirey «Ururka Dhexe ee Kiiniya» ayaa dagaalkii labaad hortii unkumay si loola dagaalo takoorka iyo caddaalo darrida. Kaddib waxaa aasaasmay K.A.N.U. Dabeedna 1952kii, dhaqdhaqaaqii Maw Maw ku magac dheeraa ayaa dhirbaaxooyin u geystay gumeysatadii. Ingirrisku markaa ayuu ciidammo keenay, Kiiniyiintana jeelka loo taxaabay. Sannadkii ka dambeeyey in lagu qiyaaso 10,000 oo caddaan iyo Afrikaanba leh ayaa dabkii Maw Maw ku dhintay. Inkastoo ururkii Maw Maw dhaqdhaqaaqiisii damay Ingiriisku waxa uu aqoonsaday inaan midab takoorka iyo sarreynta ninka cadi uga hirgeleynin Kiiniya. 1963kii ayaa K.A.N.U. doorasho ku guuleystay Kiiniyana madaxbannaanaatay.

1953kii Ingiriisku wuxuu abuuray xidhiidhkii Afrikada Dhexe ee ka koobnaa waqooyiga Roodiishiya, Koonfurta Roodiishiya iyo Naysalaand.

Hodannimada saddexdaas dal ayuu Ingiriisku rabay inuu gacmaha u gasho caddaanka tirada yar ee dalkaas degganaa. dadku madow ee degganaa waqooyiga Roodiishiya iyo Naysalaand aad bay u diiddanaayeen xidhiidhka Koonfur Roodiishiya. Maxaa yeelay, waxay dalkaas u arkayeen meel dadka cadi iska leeyahay, oo si naxariis darro ah loogu daadiyey dhiiggii rerr Matabela. Nidaamka siyaasiga ah ee Koonfurta Roodiishiya waxay ku unkanayd sad-bursiga ninka cad. Boqolkiiba 5% dadka cad ee Koonfur Roodiishiya degganaa ayaa 2/3 laba dalool lahaa dhulka.

Beeraha Buuriga ee caddaanku leeyahay, rag iyo dumar madow ayaa maalintii ka shaqayn jiray, habeenkiina ku noolaa xerooyin dadka madow u gaar ah. 1960kii ayaa Ingiriisku u diray guddi loo xilsaaray inay baadho hirgelinta xidhiidhka Afrikada Dhexe. Waxaa guddidii u caddaatay inaanay marnaba suuragal noqonayn saddexda dal oo laysku daraa. 1964kii woqooyi Roodiishiya ayaa gobannimo qaadatay iyadoo la magac baxday Saambiya, Naysalaandna waxay la baxday Malaawi.

## DAGAALKII KOWAAD EE ADDUUNKA

### A R A R

Dagaalkii kowaad ee adduunka oo ka bilowday qaaradda Yurub wuxu socdey sannadkii 1914kii ilaa iyo 1918, waxaa sidaa loogu magacaabay in dawlado badan ay ka qayb qaateen. Waqtigii hore qaaruumuhu waa dagallami jireen, hase yeeshee dagaalkii kowaad ee adduunku kuwaas waa uu ka duwanaa. Dagaalkaas waxaa lagu dagaallamay hub iyo habab aan ku koobneyn goobaha dagaalka, wuxuu ahaa dagaal gaarey qaarad kasta oo aduunka ah.

Sannadkii 1914kii gobollada adduunku aad bay isugu dhawaayeen, intooda badanna waa la helay. Imbiriyaaliistayaashii reer galbeedka Yurub xukunkoodii foosha xumaa meel walba wuu gaaray. Dagaalka waxaa dagaallamay gumaystayaashii reer Yurub, waxaana ay ku dagaallameen qaaraddoodii, hase yeeshee dadweynaha adduunka lagu gumaysanayey iyo kuwa kale oo reer yurubka xiriir la lahha ayaa iyana ka qayb qaatay. Dagaalka kowaad ee adduunka lama garan karo haddii raadkii dhaliyey aan farta lagu fiiqin. Qorayaasha taariikhda badidoodu waqtigan aan joogno waxay u kala bixiyeen sababo hore u bilawday sannadkii 1870kii iyo sababo dagaalka dillacshay sannadkii 1914kii markii la dilay ninkii la oran jirey Archduk Francis Ferdinando oo ahaa ninkii lahaa Taajka Dhaxaltooyada Boqortooyadii Austeriya-Hungeeriya, bishii Juun 28-1914. Waxyaalihii aan ku magacaawnay in ay yihiin sababihii hore waxa ka mid ahaa tartan iska hor immasho dhaqaaleed hore dhul gumeysi, igaashaan buureysi iyo waddaninimo. Markii aynu qorno sababahaas waxa inaku habboon in fiiro gaar ah aynu u yeelanno wixii dhibaato uu dagaalkaasu u geystay dadyowga dhulalkooda la gumeysanayey, siday dhulkaasi qayb uga qaateen, dhaqdhaqaaqa askartii Afrikaanka ee dibedaha loo diray iyo wixii waayoaragnimo u soo kordhay afrikaankii ka qayb qaatay dagaalka.

**1) Tartan dhaqaaled.**

Dawladaha reer Yurub waxay iskaga hor yimaadeen tartan dhaqaaleed, kaas oo lixaad lahaa. Taas oo ku xirneyd dawlad waliba in guul weyn ay ka gaadho xagga dhul gumeysiga, suuqa ganacsig, hodannimada iyo danta u gaarka ah. Sannadkii 1870kii ka dib kacaankii farsmadu waa sii kordhay, dawladaha reer Yurub badigood waa yar yaraayeen taas oo ujeeddadoodu tahay in suuqooda waddanku uusan ku filnayn.

Waxyaalaha warshaduhu ay soo saaraan baa batay, gaar ahaan kuwa Jarmalka o markaas farsamadiisu degdeg u koraysay. Taasoo Ingiriiska cabsi gelisay, in Jarmalku uu ka qabsado suuqa adduunweynaha, Laatiin Ameerika, Bariga Dhexe iyo Bariga Shishe ee markaas Ingiriisku haystay.

Tartan suuqa ganacsigu aad buu xiriirka labada waddan u xumeeyey. Taas oo ku kalliftay in dawlad waliba maraakiib dagaaleed ay dhisato si ay ku ilaashato waddooyinka badeeda ee ay maraan maraakiibta ganacsiga iyo si ay ugu ilaashadaan dhulalka iyo dadka ay ka gumeystaan qaaradaha Afrika, Laatiin iyo Eeshiya.

**2) Tartan dhul gumeysi :**

Markii tartanka dhaqaaleed si daran ay isaga hor yimaadeen, waxay taasu dhalisay in dawladaha reer galbeedka ay suuqa dhulalka ay gumeysanayeen ay ka ilaashaan dawladaha kale ee dhibaato u geysan kara.

Midda kale ee iska hor imaanshada dhalisay waxay ahayd kacaan farsamadeed oo heer sare gaarey, lama huraanna ay noqotay in lacagta lixaadka leh ee ka soo gashay dibedda lagu kharaj gareeyo si ay shaqadooda ku ballaarsadaan. Sida la ogsoon yahay Jarmalku waa ka dambeeyey dawladaha kale ee ay ka midka ahaayeen Ingiriiska, Beljimka iyo Faransiiska xagga dhul gumeysiga, hase yeeshee, xagga farsmada aad buu horey ugu maray. Jarmalku, Ingiriiska oo dhulala badan gumeysan jirey wuxu u arkayey inuu yahay kan ka hortaagan siduu meelahaas ula ganacsan lahaa. Taasu waxay dhalisay in Jarmalka iyo Ingiriisku isnacaybsadaan. Tartanka dhul gumeysiga kuma koobneyn Ingiriiska iyo Jarmalka oo keli ah, ee waxaa kale oo iskaga hor yimi dawlado ay ka mid ahaayeen Ingiriiska iyo Faransiiska oo isku haystey Niilka, Ingiriiska iyo Ruushka oo isku haystey Iiraan iyo Afganistaan, Jarmalka iyo Faransiiska oo isku haystay Marooko iyo Afrikada Galbeed.

**3) Isgaashaan buursi :**

Si ay danahooda u ilaashadaan dawladaha reer Yurub, dawlad waliba waxay xiriir difaac la sameysatay dawlado kale. Isbahaysigaasuna wuxuu bilawday sannadku markuu ahaa 1879kii. Markuu nin la yiraahdo Oto Foon Bismark oo Jarmal ah, uu heshiis isgaashaan buursi uu la yeeshay dawladda Awsteriya-Hangeeriya. Ujeeddadii heshiskaasuna waxay ahayd mid ku koobnaa difaac, kana horjeeday Faransiiska oo laga qabtay dhul la yiraahdo Alsays-Loorayn, iyo Ruushka. Isbahaysigaas oo Faransiiska iska hortaagay arrinta Tuuniisiya ee isaga iyo Talyaaniga isku hayeen. sannadku markuu ahaa 1894kii xiriirkii dawladaha reer galbeedka aad buu u sii xumaaday, taas oo keentay in ay laba gaashaanbuurood u kala baxeen. Faransiiska iyo Ruushka oo sameysteen xiriir isgaashaan buursi ee difaac ah, si ay isu hortaagaan gaashaan buurtii kale.

Sannadku markuu ahaa 1907kii Ingiriiska ayaa ku soo biiray, ujeeddadii u weyneydee isbahaysigaasuna waxay ahayd gumeysi. Waxanu keenay heshiis ay yeeshaan Ingiriiska iyo Faransiiska oo qodabbadii u waaweynaa ahaayeen in dawlad waliba danaheeda gaarka ah aan la fara gelin. Kuwaas oo ay ka mid ahaayeen danihii Ingiriiska ee Niilka sare iyo kuwii Faransiiska ee Marooko. Waxa kale oo soo baxy heshiiskii ka dhexeeyey Ruushka iyo Ingiriiska ee ahaa in Iiraan iyo Afgaanistaan ay u kala qaybsadaan meel awood ilaalin danaha ah. Labada isgaashaan buursiba mar kasta ee adduunka qalaanqal ka kaco waxa dhici jirey in ay isku yimaadaan iyaga oo qolo qolo isku taageersna, taas oo dhalisay xiriirkii dadweynaha adduunka oo sii xumaaday, una dhowaaday dagaal.

**4) Waddaninimo :**

Sannadkii 1870kii dadka reer Yurub garteen macnaha murtida qarannimada, taas oo ahayd fikrad ku abuurtay waddaninimo, kuna faaftay qaaradda Yurub badideeda.

Dawladaha waqtigaas asaasmay waxa ka mid ahaa Talyaaniga. Waddaninimada ujeddadeedu waxay ahayd in dadka isku afka, diinta danta ahi ay isu aqoonsadaan in ay yihiin qaran.

Taasu waxay dhibaato u geystay imbaradooriyadihii joogi jirey oy ka mid ahayd imbaratooriyadda. «Habsburg» oo xukumeysay Yurubta bari ito tan Dhexe.

Qoysaskii yar yaraa oo ay ka mid ahaayeen Serbiyiinta, Kroot iyo Islofaak, kuwaasoo ku hoos noolaa imbaradooriyaddaas waxay bilaabeen dhaqdhaqaaqyo madax-bannaan. Dawladaha kale ee waaweyn ee taageerayey qoysaskaa yar yar waxa ka mid ahaa Ruushka, Faransiiska iyo Ingiriiska. Sidii dawlad waliba tan kale u sheeganeysay, ayaa nin waddani ah oo reer Serbiya ahi u diley ninkii lahaa dhaxalka imbaradooriyadda Husburg oo la oran jirey Faransiis Ferdinando, bishii Juun 28dii 1914kii.

## SABABAHA ISFOODSAARIDDA DHALIYEY

Sababaha aan horey u soo sheegay oo wax badan socdey ayaa dhaliyey dagaalkii 1aad ee adduunka, waxase ka dambeysay xaaladdii oo sii xumaatay.

Dawlad waliba tan kale ayey iska ilaalineysay iyadoo xooggeeda ku kalsoonayd dagaalna filaneysay. Sida runta ah meesha waxa ka maqnayd xoog adduunweynuhu leeyahay oo nabadda ilaalinaya, markii isafgaranwaa dhaco. Sannadkii 1914kii waxaa caddaatay in ammaanka adduunku ku baabi'i karo shil yar oo dhaca.


Bishii Juun 28-1914kii nin dhallinyara ah, ahaana reer Serbiya, kana tirsanaa qolo la yiraahdo Gacan madow, wuxuu dilay ninkii lahaa dhaxalka Boqortooyadii. Awsteriya-Hangeeriya, oo la oran jirey «Archiduke Faransis Ferdinando» iyo xaaskii iyagoo booqasho ku yimid magaala madaxda gobolka Basiniya ee la yiraahdo «Saarajiifo ». Shilkaas meesha ka dhacay Jarmalku waxay ku dadaaleen in halkaa oo qura uu ku ekaado, hase yeeshee, taas waa suura geli weyday, waqti yar kaddibna waxaa bilowday dhaqdhaqaaqyo is diyaaris ah. Bishii Juulay 23kii dawladda Awsteriya waxay Serbiya u dirtay digniin oo ay ku weydiisaneysay sida ay dilmadaasu ku dhacday iyo inay ka istaagaan liidista ku qoran wargeysyadooda una oggolaadaan inay qayb ka qaataan baaridda sababihii lagu dilay Boqor sugaha iyo qoladii dishayba. Markii hore Serbiyiinta war celintoodu waa iska wacnayd, hase yeeshee ka dib, waxaa caddaatay in ayan ahayn sidii la filayey, taas oo dhalisay in Awsteriya xiriirkii siyaasadda ay ka goostay Serbiya, bishii Juulay 28dii 1914, kuna dhawaaqay dagaalkii.

Bishii Juulay 30dii, Ruushku wuxuu ku dhaqaaqay isdiyaaris milateri. mallintii labaad Jarmalku wuxuu digniin u diray Ruushka in ay isdiyaarinta joojiyaan muddo 12 saacadood ah. Markii jawaabo Ruushka laga waayey, Jarmalku wuxuu ku dhawaaqay inay la dagaalaan. Bishii Agoosto 1dii 1914. Sidaas oo kale Faransiiska ayaa ku dhawaaqay dagaal bishii Agoosto 3dii. Isla maalintii Jarmalku wuxuu ku duulay Beljimka, siday horeyba u qorsheeyeen, taas oo sabab u ahayd in Ingiriisku uu dagaal ku dhawaaqo 4tii bisha Agoosto 1914kii. Sidaas awgeed dawladaha reer Yurub si rasmi ahaan ah ayey dagaalka u galeen shan toddobaad ka dib markii la diley ninkii lahaa dhaxaltooyada imbaradooriyadda Awsteriya-Hangeeriya.

## D A G A A L K A

Waddaninimada iyo sharaf dooniddii ay ku noolaayeen reer Yurub waxay u soo jiidday dagaallo lixaad leh oo ay isku curyaamiyeen. Dagaalku markii uu bilowday waxaa meel kasta ka muuqanayey waxyaalo aad u fool xumaa, taas oo ay ka mid ahayd ragga, dumarka iyo carruurta oo lagu kallifay in ay ka qayb galaan dagaalka. Waxa kale oo dhacday in siyaasaddii, dhaqaalihii iyo arrimihii bulshadu ay isbeddeleen.

Dalalkii Jarmalku xukumi jirey (1942).




Dalalkii Jarmalku xukumi jirey | Gaashaanbuurtii Isbahaysiga | Dhexdhexaad.

## ISBEDDELKA SIYAASADDA

Markii aynu gaar ahaan u eegno waxaa dhacday in soohdin dawlad madax bannaan oo dhisnayd ka hor sannadkii 1914kii aan la aqoonsanayn lana ixtiraami jirin, ciidan dawlad shisheeye ayaa ku duuli jirey waddan dawlad kale leedahay. Xasilloonidii siyaasaddana waxaa lagu beddelay cabsi iyo amni darro, meeshii faraxana (raynraynta) waxaa beddeshay tiiraaniyo, sidaa awgeed ayey dawladihii reer Yurub ay isu beddeleen dawlado ku dhisan xoog iyo sharci darro,taasoo ay dadkii xabsiyada ka buuxsheen.

Waqtigaas dad socdaal (safar) ku soo maray qaaradda Yurub waxay sheegeen in meel walba lagu arki jirey dadyow badan oo lagu xereeyey silig, kuwaas oo ahaa maxaabiis.

Dhibaatada dadweynaha gaartay dhinac kasta markii laga eego aad bay u weynayd, ha noqoto xagga dhaqaalaha, bulshada iyo guud ahaan iyagoo aad u liiteen. Dadka reer Yurub waxay u maleynayeen in dagaalku deg-deg u dhammaan doono sidii dagaalladii hore ay u dhici jireen oo kale,hase yeeshee, taasi waa ay dhici weyday. Waxaa run ah oo caddaatay in dadkii dagaalkaas dheer ay khasaaro ku gaadhay, kuna baabe'een dad iyo duunyaba, dagaalku sidaas oo kale wuxuu burburiyey wixii horey u soo dhisnaa, nolosha bulshada iyo xagga siyaasaddaba.

## DHIBAATO DHAQAALEED

Wixii adduun ahaa ee waddammada Yurubta galbeed ay ku dhisnayeen waxaa lagu isticmaalay arrimihii dagaalka. Dawladihii, dadweynihii Yurub iyo adduunweynihii kale dhaqaalahoodu wuu sii xumaaday, taasoo ka dhalatay shaqadii oo istaagtay ka dib markii shaqaalihii warshadaha iyo kuwa ganacsiga la qoray Askar.

Dadkii magaalooyinka ku noolaa waxay u curyaameen baahi, waxayna ku dhawaadeen dhimasho. Waxa kale oo dagaalku keenay qalanqaak ka dhashay markii nin iyo qoyskiisii uu xiriirkii ka go'ay, dumarkiina lagu kallifay in shaqadii ragga ay qabtaan, taas oo ka timid markii raggii ciidammada loo qoray, dhimashadiina sii korodhay. Qiyaastii malyuun ruux ayaa ku dhintay dagaalka. Magaalooyinkii la dhisay oo la wanaajiyey ka hor 1914kii waa la burburiyey. Dhulkii beeraha cuntada soo saari jireyna waa la jiiray, taasoo dhalisay in noloshii hoos u dhacdo.

Dagaalka waxaa lagu dagaallamayey laba geesood, kuwaasoo ahaa geeskii Bariga iyo tan Galbeed, Jarmalka waxaa lagu joojiyey bilawgii dagaalka 6dii bisha Sebteembar ilaa iyo 14kii sannadkii 1914kii ka dib markii taliyaha ciidammada Jarmalka lana oran jirey «Fon Kluk» uu u diray ciidammadiisii xagga bariga ee ku xumaatay. Taas markii ay dhacday Ingiriiska iyo gaashaan buurtiisii waxay ku ciriiriyeen xagga galbeedka. Markaas ka dib labadii ciidamba waxay galeen difaac adag, kaasoo dheererkiisa lagu qaddarey 500 oo kiiloomiitir.

Sannadkii 1915kii geeskii galbeedka Yurub way xasiloonaatay. Ingiriisku wuxuu ku qulqulinayey dalka Faransiiska, Talyaaniga wuxuu ku soo biiray gaashaan-buurtii Ingiriiska iyo Faransiiska, iyadoo taas ku raadsaneysay dhulka ku wareegsan badda la yiraahdo «Adriyaatik». Sannadkii 1916kii Jarmalku wuxuu isku dayey in uu jiiro difaacii la oran jirey «Ferdun», hase yeeshee labada qoloba waa ku khasaareen. Ingiriisku markaas ka dib wuxuu ku dhaqaaqay in uu Jarmalka ka colaadiyo xagga badda si uu uga joojiyo dhaqdhaqaaqa maraakiibtiisa, taasoo dhalisay in bishii Maajo 1916kii ay dagaal maraakiibeed iskaga hor yimaadeen meesha la yiraahdo «Jutaland». Labada qoloba guul bay sheegeen, hase yeeshee, maraakiibta Jarmalku waxay iska fariisteen meesha la yiraahdo «Keil» ilaa iyo markuu dagaalkii istaagay.

## ISBEDDELKA DAGAALKA

Dagaalku wuxuu isbeddeley bishii Abriil 1917kii markii dawladda Maraykanka ay ku soo biirta isbahaysigii Ingiriiska, Faransiiska iyo Ruushka.Xooggaasi cusub oo gaashaanbuurtaas ku soo biiray waxay dhalisay in xoogga Yurubta dhexe ay awooddiisii yaraatay. Bishii Juulay - Agoosto 1918kii markii labada ciidan ay iskaga hor yimaadeen meesha la yiraahdo «Marne» Jarmalku wuxuu ku dadaalay inuu guul gaaro, hase yeeshee, nasiib darro askartiisii waa kala carareen, taas oo ku timid xoog lixaad leh oo la hor keenay bishii Nofeembar 1918kii markaas oo saxiixii dagaal joojinta la kala saxiixday.

## DAGAALKA OO QAARADAHA KALE KU FIDAY

Dagaalkii ilaa 1917kii wuxuu ku ekaa qaaradda Yurub, hase yeeshee dhibaatadiisii meel kasta ayay ku faaftay, gaar ahaan waddanka Ruushka. Sideedaba maamulkii dawladda Ruushku wuu fool xumaa, waxayna dhibaatadii dagaalku ay ku sii kordhisey gaajo iyo cudur. Arrimahaasu waxay dhaliyeen labo kacaan, mid ahaa bishii Maarso iyo mid ahaa Noofembar. kacaannadaas waxay keeneen isbeddel xagga dagaalka, taariikhda adduunweynaha iyo bulshadaba ku dhacay. Sida runta ah 1917kii waxaa lagu tilmaamay in ay ahayd sannadkii isbeddellada, taasoo u ahayd sababo labo arrimood oo adduunka ka dhaceen.

Mid waa dawladda Maraykanka, oo aan ahayn Yurub kuna soo biirtay dagaalka-,kan kalena waa dhalashadii kacaanka Hantiwadaagga ee Ruushka, kacaankaas oo ku soo kordhiyey fikrad cusub iyo aydiyolojiyada hantiwadaagga oo ka duwan tan hantigoosadka ee horay dalka u maamuleysey.

Markii hore dagaalka kowaad ee adduunka dadka Ruushku waa ay jeclaayeen; ka dib markii kacaanku curtay ee Lenin xukunka la wareegay, wuxuu dagaalka ku tilmaamay in uu yahay dagaal imberiyaaliistada reer Yurub ay ku dagaallamayeen, suuq, dhulgumeysi iyo danahooda kale.

## RAADKII DAGAALKU UU KU REEBAY ADDUUNKA

Raadkii dagaalkii kowaad ee adduunku uu reebay waxaa ka mid ah afar imberadooriyadood oo burburay, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen imberadooriyada Ruushka, Awstro-Hangeeriya iyo Turkiya kuwaas oo ku tirsanaa bariga Yurub iyo Jarmalka oo hal lug ku lahaa bariga Yurub, midda kalena ku lahaa galbeedka oo iyaduna si daran u hoobatay.

Reer Yurub, oo 1900kii adduunweynaha gumeysan jirey, wuxuu dagaalkaas foosha xun oo xaq darrada ahi uu u geystay awooddoodii oo hoos u dhacay ilaa iyo intii imberiyaaliistada maraykanku ay gacan gargaar ah u fidisay. Qaaradda Yurub dagaalkii ka dib waxay u ekaatay geed caleentii ay ka dhammaatay.

Dagaalka markii la joojiyey Madaxweynaha Mareykanka, Wilsan wuxuu ku dhawaaqay qodobbadii ku magac dheeraa 14kii qodob, ka dibna saldhig u noqday isu imaanshadii dadweynaha adduunka iyo Lenin oo u horseeday kacaanka hantiwadaagga isagoo dadkiisa ku guubaabinayey in adduunweynuhu ku biiraan sidii imberiyaaliistada dhiigmiiratayaasha ah loo baabi'in lahaa beddekoodna loo dhisi lahaa dawlad shaqaale ah oo adduunweynaha hoggaamisa.

## WIXII DAGALKU DHULALKII LA GUMEYSANAYEY UU GAARSIIYEY

Araggii u horreeyey oo dhexmara Afrikaanka iyo gumeystayaasha reer Yurub waxay ahayd mid aad u fool xun iyo caddaladdaro ku dhisan. Reer Yurub waxay Afrika u soo galeev in ay dadkooda addoonsadaan si beerahooda dhulalka cusub ee

qaaradda Maraykanka uga shaqeeyaan. Reer Yurub markii ay ka laabteen ganacsiga dadka waxay ku soo jeesteen dhul qabsasho iyo dhiig-miirasho; jahliga waxay ku beddeleen midab gumeysi iyo arrimaha dadka in la fara geliyo. Nimanka la yiraahdo Dhajka iyo Jarmalku waxay degmo ka dhigteen koonfurta, meeshaas oo ay ka bilaabeen midab kala soocid, iyagoo Afrikaanka u haystay in ay yihiin dad aan ahayn ilbax, Yurubiyiintu waxay lahaayeen fikrad ahayd in midabka cadu uu ka sarreeyo kan madow, qaarna waxay u qabeen in Afrikaanka Rabbi uu u uumay in lagu shaqaysto, sidaas awgeedna la addoonsado. Waxay u kala qaybsheen sida jab rooti ah oo miis lagu qadeynayo saaraan, Afrikaanka dhulkoodii ayaalaga eryey oo markaas waxa la dejiyey dhul bannaan oo ayan waxna ka bixin.

Reer Yurub oo jeclaa in ay Afrika ku waaraan, khayraadkana ka gurtaan, waxaa dhacday in qaarkood dagaal ay iskaga hor yimaadaan si ay u ballaarsadaan danahooda. Sidaa awgeed dagaalkii kowaad ee adduunka way ku khasaareen si lama filaan ah bayna u dhacday. Waxaa runtii ka dhashay waxyaabo saldhig u noqday dhaqdhaqaaqyadii madaxbannaanida ee dhulalka la gumeysanayey, dhaawacna u geystay dadnimadii. Arrin kale ee dagaalkaasu ku dhaliyey reer Yurub waxay ahayd askartii dagaalka loo diray in ay ka qayb qaataan, oo waaya-aragnimo soo kororsaday, taaso dhalisay in gumeystayaasha reer Yurub laga horjeestay xukunkoodii fashiistannimada ahaa.

Fikradda cusub oo askartaasu ay la yimaadeen waxay ahayd in ay ogaadeen in waxa lagu dagaallamayaa ay tahay waddaninimo, dan dhul gumeysi, suuq ganacsi iyo dad addoonsasho. Fikraddaasu waxay noqotay saldhigga ay ka abuureen dhaqdhaqaayada kacaannimada reer Afrika, Eeshiya iyo Latiin Ameerika.


## AFRIKA INTII LABADA DAGAAL U DHEXAYSAY DUULLAANKII TALYAANIGA IYO XABASHIDA

Ururkii Ummadaha, ee la dhisay dagaal weynihii adduunka markii uu dhammaaday waxay ahayd inuu ilaaliyo nabadda adduunka, si xasilloonna ku dhammeeyo danaha dhexmara dawladaha. Qodobbadiisa waxaa ka mid ahaa inaan dawladdiina kaashanin hub iyo xoog toona ee arrinteeda lagu baaro Ururka Ummadaha, iyada oo ururku ka caalwaayo mooyee.

Hase yeeshee, Ururkaasi ma noqon mid taabba geliya himiladii adduunweynaha. Tabar darridiisuna waxay muuqatay markii uu wax ka qaban waayey weerarkii Jabbaan ay ku qaadday Gobolka Manshuuriya, iyadoon marnaba ururku aanu gacan ka geysan. Taas baa waxay dhiirrugelisay keligii taliyihii Talyaaniga ahaa Benito Musoliini. Musoliini wuxuu ku fekerayey imbaradooriyadda Talyaaniga siduu ugu celin lahaa dawladdii Roomaanka ee magaca iyo haybadda lahayd. Musoliini, siyaasaddiisa dibeddu waxay ahayd weerar iyo dhul-ballaarsi, iyo siduu uga dhigi lahaa Badda Dhexe bali biyo ah oo ku dhex yaal qaranka dawladda Itaaliya. Hase yeeshee, tallaabadaas taagteeda ma uusan lahayn.

Sidaas darteed wuxuu u soo indha taagtay Bariga Afrika iyo dhulka Xabashida, oo loogu tilmaamay tabar yari xagga dagaalka, hodannimo xagga dhaqaalaha iyo meel ku wanaagsan xagga istaraatijiyada. Intaas waxa dheeraa iyada oo uu isku xiri rabay labada dal ee ku jirey gacanta Talyaaniga.

Sidii uu Gumeysigii Reer Yurub uu ugu fiday Bariga Afrika.




Xadadkii waayadaas jirey.

Sidii ay Ingiriiska iyo Masaaridu u qabsadeen dadka Suudaan marka laga bilaabo 1896.

Sidii Talyaanigu u soo galay Geeska Afrika iyo Ereteriya.

Talyaaniga isaga oo haysta Soomaaliya iyo Liibiya, waxa si gaar ahaaneed u dhiiri gelinayey Musoliini, isagoo rabay inuu ka mayro sharafta qarankiisa ceebtii ka raacday dagaalkii Xabashidu ku jebisay Talyaaniga (Cadwa 1896) iyo arrintii Wal Waal ee 1934kii.

Bilowgii sannadkii 1933 buu ka heshiis iyo oggolaansho ra'iisal wasaarihii Faransiiska Biyeer Layaal, in uu furto Itoobiya. Bishii Oktoobar 1935 ayuu Musoliini askartiisii wadatay hubka culus iyo layliska cusub u diray Itoobiya. Hubaalna waxa ahayd in xabashidu aanay lahayn awood ay ku hor istaagto Talyaaniga.

Boqorkii Itoobiya, Xayle Selaase waxa uu kaalmo u doontay dawladihii Ingiriiska iyo Faransiiska markuu ka caalwaaweynaa waxa uu hortegey Ururkii Ummadaha. Ururkaas oo aan lahayn awood uu ku fuliyo go'aannadiisa. Tallaabadii u horreysey ee Ururka ka qaaday Talyaaniga waxa ay ahayd in laga cuna-qabateeyo xagga dhaqaalaha iyo hubka, markii laysku raacay in ay tahay dawlad duullaan ah. Hase ahaatee, waxba kama suurto gelin, sababta oo ahayd dawladihii Ururka ee reer Galbeed oo u hoggaansami waayey go'aankaas. 9ka Maajo 1936 baa duullaankii talyaanigu hantiyey dhammaan Itoobiya, Xayle Selaasena waxa uu u fakaday Iglan. Boqorkii Talyaaniga «Figtor Kammanweel», baa isku magacaabay boqorkii Itoobiya. Sannad ka bacdi 1937kii, Ururka Ummaduhu waxa uu soo bandhigay tababarrdiisii markuu ku baaqay in cuna qabatayn laga qaado Talyaaniga.

Dagaalweynihii kowaad waxyaabihii uu dhaxalsiiyey Afrika waxa ka mid ahaa iyadoo dhulalkii Afrika ee Jarmalku gumeysan jirey ku wareegeen gacan gumeysi oo kale. Dagaalkii ka oogmay Yurub bilowgii Agoosto 1914kii, kuma ekaanin dawladihii Yurub, ee Ingiriiska, Faransiiska, Beljimka iyo Jarmalka dhexdooda ee si laxaad leh buu ugu fiday dhulkay u talin jireen ee Afrika, Aasiya iyo bariga Dhexeba iyada oy dawlad waliba dagaalka gelinayso dad iyo duunyo waxay u taliso oo dhan.

Afrika gabi ahaanteedna waxa ka oogmay dabkay isku shideen gumeystayaashu. Waxaana dagaallo layskaga hor yimid Afrika meelihii jarmalku heystey. Waxaana hortiiba laga qabsaday Togoland markii uu ka soo weeraray galbeedka ciidankii Gaana ee Ingiriiska, dhanka waqooyiga iyo barigana ay ka timi askartii Faransiiska u fadhiday Maali iyo Daahomi oo soo weerartay. Bil ka dibna Jarmalkii waa laga saaray dhulka Toogo.

Kaameruun iyada dhulkeedu wuu ka ballaarnaa Toogo, waxaana ku badan qarar keyn leh. Hase yeeshee, Ingiriiska iyo Faransiiska baa iyaga oo kaashanaya askartii ay ka qorteen dhulalka Afrikada galbeed, la galay Jarmalka dagaal lagu baabi'iyey oo socdey tan iyo bishii Febraayo 1916kii. Dhinaca Koonfur Galbeed Afrika waxa Jarmalkii ka soo weeraray dawladda Koonfur Afrika oo dhammaan kala wareegta Juulaay 1915kii.

Xagga Afrikada Bari dagaalku aad buu laxaad u lahaa bilihii horena Ingiriiskaaba halis ku galay in laga furto Ugaandha, ilaa ciidammo laxaad lihi gurmad ugu yimaadeen Koonfur Afrika, Galbeed Afrika, Hindiya iyo Koongo oo Beljimka u talinayey.

Ciidammadaas oo dhan guul fudud oo dhan ma gaarin tan iyo dhammadkii dagaalka 1918kii. Ddwladaha gaashaan-buurta ee ku adkaaday Afrika iyo dagaalkii guud ahaanba, waxyaabaha libinta raacsiiyey waxa u weynaa dadkii iyo hoggaamiyaalkii ku hoos noolaa gumeysiga oo yididiiladooda xornimo ku xiray jebinta Jarmalka taas oo ka timid baaqii Madaxweynihii Maraykanka, Wilson. Baaqaas oo ahaa in dadyowga kala duwan ee ku hoos jiray gumeysiaga, loo ogoolaado siday rabaan,

Wilson markuu ku dhawaaqay arrintaas, waxaad mooddaa, inuusan maskaxda ku haynin dadyowga Afrika, ama uusan ku tala jirin in xornimo la siiyo Afrikaanka.

Taas waxaa inoo caddeyneysa, in markii dagaalku dhammaaday la abuuray dawlado badan oo ky yaallaa Bariga Yurub oo ku jiray gacantii Jarmalka iyo dawladihii la halmaali jirey ee Turkiga iyo Awsteriya. Dadkii Afrika ee hiil iyo hooba ku siiyey gaashaanbuurta waxa haleelay niyad jab iyo gumeysi isku beddelay.

## QAYBSASHADII LABAAD EE AFRIKA

1884kii, waxay dawladaha Yurub ku shireen Berliin si ay u qaybsadaan Afrika oo markaas ahayd dhul dihin. Waxana mar labaad shirkii 1919kii lagu qaybsadey dhulkii Afrika ee ku hoos jirey Jarmalka. Hase yeeshee, qaybsigakan cusubi waxa uu ahaa mid loogu soo gabbanayo midab sharci.

Nidaamkaas asaga ah waxa uu ka yimid «qodobka 22» ee Xeerkii Ururkii Ummadaha waxaanu codsanayaa in dawladaha horey u maray ee reer Yurub, ay gacanta qabtaan dadkii gumeysan jirey Jarmalkii la jebiyey oy gaarsiiyaan heer ay ku hanan karaan gobannimadooda.

Xagga dhaqaalaha, siyaasadaa, tacliinta iyo bulshadaba, waxay ahayd in ay la socodsiiyaan Ururkaas sannad walba tallaabooyinkay ka hirgeliyeen arrintaas. Si kastaba ha ahaato ujeeddada qodobku, waxase jirtay in dawladihii Yurub ee maamulkii dhulalkaas la wareegay, ay u qaateen gumeysi cusub iyo hanti ay dagaal ku furtaan, waxayna kala qaybsadeen : Toogo iyo Kaameruun, oo ay kala qaateen Faransa iyo Ingiriiska, Namiibiya ama (Koonfur-galbeedka Afrikadii Jarmala) waxa qaatay dawladdii Koonfur Afrika.

Dhulalka Afrikada Bari ee Jarmal waxaa qaatay Ingiriiska. Gobol yar oo Tanganiika ahaana waxaa la siiyey Beljimka oo ku darsaday Koongo.

## MASAR IYO GUMEYSIGA INGIRIISKA

Masar oo ahayd Gobol ka tirsan Boqortooyadii Cusmaaniyadda, waxaa ugu horreyntii hunguriyeystay dawladda Faransiiska. Sannadkii 1798kii baa waxaa soo weeraray ciidammadii Faransiiska oo uu hoggaaminayo Nabilyoon. Tallaabadaas baa ku baraarujisay Ingiriiska ahmiyadda dhulka masaaridu u leedahay. Waqtigaas wixii ka dambeeyey siyaasadda Ingiriisku waxay ahayd inaan dawlad oo Yurub ahi ka amarku taagleynin dhulka Masar. Saddex sano kaddibna waxaa la raacdeeyey ciidammadii Nabilyoon, Masarna waxaa goostay Maxamed Cali Baasha oo ka dawlad ay u taliyaan isaga iyo carrurtiisu.

Isla markaasna raacsan Taliyaha Muslinka, oo ah boqorka Cusmaaniyiinta. Ingiriiskuna wuxuu ku dadaalayey in uu talada iyo awoodda runta ah ee Masar gacanta ku dhigo. Wuxuuna isku dayey inuu ciidan ku qabsado 1807. Inkasta oo Ingiriisku qabsaday Masar haddana ma baabi'in dawladdii uu ka tegey M. Cali, waxayna weli raacsanaayeeyn magac ahaan boqortooyadii Cusmaaniyiinta ee Turkiga ilaa uu shidmay dagaalkii kowaad 1914kii. Dagaalkaas oo Turkiga garab istaagtay Jarmalka, oy ku dhawaaqday in muslinku jihaad ku qaadaan Ingiriiska iyo wixii la bahaysta, wuxuu khatar geliyey nabadgelyadii Ingiriisku ku joogay bariga Dhexe iyo waddooyinkii Hindiya loo mari jirey. Taas baa waxay dhalisay in dawladda Ingiriisku ku dhawaaqdo waxay weligeed u mar-marsoonaysay oo ah inay kaligeed ka taliso Masar waxayna ku dhawaaqday bishii Diseembar 1914kii in Masar ay ilaalin Ingiriis tahay.

Isla mar ahaantaas inkastoo Masar dhulkeeda dagaal aan laysugu imaanin, haddana si laxaad leh bay ugu jirtey dagaalka. Sababtoo ah dadkeedii iyo duunyadeedii oo dhan baa heegan u ahaa oo u darbanaa askarta Ingiriiska. Hoggaamiyeyaashii Masaariduna waxay ku guubaabin jireen dadkooda, in loo dulyeesho danaha dagaalka oo u huraan waxay askarta Ingiriisku uga baahato koley ku tahay gaaridameeryaday ku xoogsan jireen oo askartii Ingiriisku gaadiid ka dhigteen.

Dhibaatooyinkaas Masartu kala kulantay dagaalka uma muuqan, sababtoo ah, waxay u hanqal taagayeen oo ku niyo samaayeen inay helayaan gobannimo buuxda oy ka bixi doonaan gumeysiga iyo ciriirigaba, iyagoo cuskanaya baaqii Isbahaysiga Galbeed oo ahaa, sidaan horey u sheegnay, in dadka gumeysia ku hoos jira loo oggolaado say u rabaan danahooda. Hoggaamiyeyaashii Masar, wax kasta oo ay soo mareen, markii dagaalkii dhammaaday waxay isu diyaariyeen madaxbannanidooda iyo in maamulka dalka ingiriisku ku wareejiyo. Hase yeeshee, markay arrintaas ula tageen dawladdii Ingiriiska dhagahey ka laabatay, kumana hoos qaadin taasina waxay tustay Masaaridii inann gumeystuhu ab lahayn.

Waxayna bilaabeen halgan iyo bunduq caaraddii in ay ku doontaan gobannimadooda. Sacad Saqluul iyo xisbigiisii ku magacaanaa Al-Wafdi baa u guntaday hoggaaminta dadkii Masar.. Ingirriskuna wuxuu bilaabay inuu cadaadiyo xoogna ku baabi'iyo halgankooda, isagoo illowsan in dadka u dagaallama xornimada, xoog baabi'in karaa uusan jirin. Wafdi uu hoggaaminayo Sacad Saquul baa aaday Baariis si ay ugu bandhigaan arrintooda waxay Ingiriiska ka rabeen, oo ahaa :

1) Masar in ay xornimo hesho, lagana qaado ilaalinta Ingiriiska.

2) Dadka shisheeyaha ah in Qawaaniinta masar qabto.

3) Ciidammada Ingiriiska in la koobo. Suweysna ay ku akaadaan.

4) Masaaridu inay la qaybsato Ingiriiska maamulka dalka.

Ingiriisku waa uu diiday, ka dibna mudaaharaadyo iyo qas ayaa dhacay 1922kii. Dawladihii ogaadey e Isbahaysiga Yurub shirkoodii 1919kii, waxay kala kulmeen dhega awdan iyo shirkii oo lagu taageeray Ingiriisku inuu maamulo Masar. Soo laabadkoodii buu Sacad Saqluul shaaca uga qaaday Masaaridii in cid wax u oggoli ayan jirin, waxay muruqooda ka helaan mooyee. Tawrad laxaad leh baa meel walba ka dillaacay, Sacad Saqluulna inta la xiray baa dibadda loo dhoofiyey.

Wax kastoo xukunka Ingiriisku sameeyey uma suurto gelin inuu qaboojiyo amase baabi'iyo codkii dadkii Masar ilaa uu sandulle u oggolaaday inuu u yeelo codsashadooda ah xornimo.

28kii Febraayo 1922kii buu Ingiriisku ku dhawaaqay Masar in ay madaxbannaan tahay. Doorashadii u horreysay ee dhulkaas laga dhigayna waxaa ku guuleystay Xisbigii Al-Wafdi. Sacad Saqluul baa loogu yeeray inuu dhiso dawladda Masar. 15kii Maarso 1922kii bay dawladdii iyo dadweynihii Masar u dabbaaldegeen gobannimadooda.

## WADDANIYADDA

Waddaninnimo waxay tahay hab midow, bulsho iyo siyaasad dad wadaaga qiimo iyo himilooyin isku mid ah. Shaqada waddaninnimada waxa ka mid ah in ay abuurto dareen ujeeddo leh, bulshadana ku dhaqaajiso ujeeddadaa siday u gaari

lahaayeen iyo habkay u raaci lahaayeen. haddaynu si kale u eegno waddaniyaddu waa sinnaan doonis ha noqoto dhaqaale, dhaqan, ama xuquuqda bani'aadamka. Dadka reer Afrikana gobollada u waaweyn ama ugu horreyn jirey dana raadiskooda markuu dareenkaasi ka bilaabmay waxay ahayd sinnaan. Haddaynu soo qaadanno qore reer Saambiya ahaa lana oran jirey «Ndabaningi Sithole» isaga oo dood ka celinayey fikrad qore Afrikada koonfureed ah oo caddaan ah, yirina mar uu ka hadlayey ninka madow iyo wuxuu ka qabo.

«Yeynan khayaal iyo ma jirto isku maaweelin, runtu waxay tahay, ninka madoobi wuu necb yahay ninka cad, caadadiisa ayuu ku neceb yahay oo qura, taas oo ninka madow weligii heleyn».

Ndabaningi Sithole oo muujinayey ujeeddada ninka madoobi uu leeyahay wuxuu yiri : «Bani'aadannimada darteed ninka madoobi ma dafiri karo jiritaanka ninka cad. Sida badan waa ninka cad ka aan oggolayn ninka madow, sababta oo ah isaga ka baqa in maamulkii gumeystaha ee ninka cadi sarreyey lumo. Ninka madoobina gobannimadiisa u isticmaalo aargudasho. Dhabse waxa ah inuu ninka madoobi ku neceb yahay takoorka bulshada, dhaqaalaha, siyaasadda iyo tacliinta. Taasoo ninka madow dhaxalsiisay in uu noqdo heerka labaad ama ka saddexaad ee dhalashada isaga oo jooga dalkiisa hooyo».

Ninka caddi siyaasad ahaan, wuu gumeystay, dhaqaale ahaan wuu addonsaday, bulsho ahaan hoos buu u dhigay ninka madow. Sidaa darteed buu ku neceb yahay ninka cad ee kuma necba caddaantiisa oo qura.

labada fikradood waxaynu ka arkaynaa siday dadka Afrika iyo gumeystayaashii u kala fakirayeen. Afrikaanku waxay doonayeen heeryada gumeystaha inay tuuraan, madaxbannaanina helaan, siday ahaayeen intaan gumeystuhu waddankooda soo gelin. Barwaaqada iyo khayraadka arligoodna iyagu isu qaataan. Fikradda ninka cadina qabay waxay ahayd in ninka madow dhaqankiisa, dhaqaalihiisa, dadnimadiisa iyo garaadkiisuba ka hooseeyaan ninka cad. Sidaa darteed ay tahay mid habboon in la xukumo ninka madow.

Haddaba, si ninka madoobi uu fikradda sheeka baralayda ah u tiro dhaqdhaqaaq iyo halganno hor leh ayuu bilaabay.

### U JILIB-DHIGGII GUMEYSTAHA

Afrika guud ahaan gumeystayaashu markuu soo galay si fudud kumuu soo gelin ee dhibaatooyin culculus ayaa ka qabsaday. Taasoy keentay ururradii, dhaqankii iyo dawladihii Afriki lahayd ka hor.

Haddaynuse meel meel u qaadno meelaha qaarkood hawl yari buu u soo galay gumeystuhu. Meelahaa oo ahaa meelaha gumeystuhu soo galay ka dib markay ka oogmeen dagaallo toleedyo fara badan. Dagaalladaas oo liciifiyey xooggay dadkaasu lahaayeen oo uu ka faa'iideystay gumeystuhu, itaal is hortaagana uu waayey. Meelaha qaarkoodna wuxuu gumeystuhu u dhabba galay inuu ogaado siday dadka reer Afrika isu xukumaan, iyo qof qofka awood xukun oo tiir adag lagana dambeeyo ku leh dhexdooda. Ka dibna tabihii gumeysiga ayey adeegsadeen, taasoo ahayd xukun dadban.

Intabadanse gumeystayaashu waxay la kulmeen u jilib dhig laxaad leh iyo is hortaag adag, dhaliyeyna gadoodyo waaweyn, oo ay horkacayeen siyaasadda iyo diinta ay hiddaha u lahaayeen dadka reer Afrika. Gadooddadaasi way tira badnaayeen waaney kala duwanaayeen. Inta badan waxa keeni jirey cadawtinnimada iyo sida foosha xun oo ay u leyn jireen gumeystayaashu dadka reer Afrika. Waxa kaloo keen

jirey tixgelin la'aan, maamuus la'aan iyo quursi dadka reer Afrika la quursan jirey. Tusaale waxa u ah 1809kii, mar lagu soo rogay cashuur la oran jirey cashuurta Carshaanta, dadka reer Siiraliyoon wey diideen, waayo lagalama tashan. Waxaanay u arkeen in meel lagaga dhacay sharaftoodii, dadnimadoodii iyaga oo rumeysan, sida Afrika inteeda kale, inaan hoos loo dhigi karin, gadood baanay ka sameeyeen.

Gadoodyada waxa kale oo keeni jirey iska hor imaadka arrimaha ku saabsan diinta sida gadoodkii Ashantiga ee 1900. Waxaanu ka kacay mar badhasaabkii Ingiriiska halkaa u fadhiyey isaga oo khalad ka fahamsan arrimahooda diinta, uu ku ceebeeyey dhawr jeer meelo fagaara ah. Qodobkaas oo diintooda ku weyna wuxuu ahaa isticmaalka «Gambarka dahabka ah». Gambarkaasoo u taagnaa midnimada Ashantiga.

Gadooddadii kale ay dadka reer Afrika sameeyeen waxa ka mid ahaa gadoodkii la oran jirey «Maji-maji» 1905, ee Bariga Afrikada Jarmalka xukumi jirey, godoodkii Suluga 1906 ee Nataal iyo gadoodkii dadka Makombe 1917-20 ee Bariga Afrikada uu xukumi jirey Boortaqiisku. Intuba waxay ka dhaceen weerarradii cadawtinnimada ahaa ee gumeystuhu ku soo qaaday. Weerarradaas oo ay dhulkoodii ku waayeen , cashuuro culus lagu saaray, laguna khasbay shaqaale sandulle ah in ay noqdaan, iyaga oo gumeystayaashu danahooda ka jirayeen, dadka Afrikaanka ahna indhaha ay ka qabsanayeen.

Xammaasadda ay ku dagaallamayeen iyo doorka gadoodyada ay ka qaateen wadaaddada diinta, geedagooyaha, dhaqtarrada, arwaxda ama qardhaasaha gaarka ah oy u xidhan jireen in uu rasaasta ka celiyo waxay inta tusayaan sida ay ula weynaayeen diinta iyo awoowayaashood dhaqanka ay ka soo gaareen, uguna dagaallayeen oo aanay u tirmin. Waxa kale oo aynu arkaynaa gadoodyada in dadkii faraha badnaa ee la laayey, dhiiggii badnaa ee laga daadshay iyo ciidammadoodii faraha badnaa ee u jilib dhigayey gumeystaha ay tilmaan u ahaayeen, xoogga dadka reer Afrika ay lahaayeen, midnimada dhaqanka, hiddaha iyo ilbaxa qotoda dheer ee ay lahaayeen marka gumeystaha loo eego. Taas oo gundhig u noqotay dareenkii dambe oy gumeystaha kaga saareen carradooda.

## BILOWGII WADDANIYADDA AFRIKA

Gadoodyadii aynu soo sheegnay waxay ka joogeen dhinac qura is-hortaaggii ama la dagaallankii reer Yurub, waxaanay ku koobnaayeen meelaha ka durugsan ilbaxa gumeystuhu keenay xeebaha Afrika. Halkaasoo dhaqanka Afrika ku dhowraa, dhaqan dad kale galay, sida magaalooyinka la samaysmay imaatinkii gumeystaha, dekedaha, meelaha warshaduhu ka sameysmeen ama macdanta laga qodo waxa abuurmay dareen cusub; meelaha oo dad shaqaale u badani isugu yimaadeen, kana socda dhaqanno, qolooyin iyo gobollo kala geddisan. Magaalo markaynu macnaheeda eegno kumay cusbayn Afrika. Magaalooyinkii Jenne, Walata, Timbuktu, Goa, Kano iyo qaar kaloo fara badan oo la mid ihi waxay lahaayeen ilbax soo jirey. Waxaanay ahaayeen magaalooyin isku xiran, bulshooyin madaxbannaan, ganacsi, dawlad iyo aqoon cilmi intaba leh. Midka keliya ay kaga duwanaayeen magaalooyinka dambe sida Dakaar, Abijaan, Nayroobi, iwm waxay ahayd dhaqaalaha iyo wax soo saariddooda oo ku xirnaa baahida gumeystada, taasoo ahayd in ay noqdaan meesha laga dhoofiyo lawska, bunka, kakawga, macdanta iwm, lagana soo dejiyo alaabta Yurub warshadaheeda lagu sameeyo.

Magaalooyinka sidaynu hore u soo sheegnay waxa ka sameysmay ururro u abuurmay in ay iska gaashaabuureystaan ka hortagga addoonsiga gumeystaha ha noqoto midabtakoor, ciriiri dhaqaale ama dhaqan geddis. Waayo waxaynu ognahay in gumeystuhu degmooyin gaar ah samaystay, si aanu u dhex gelin dadka reer Afrika, dhaqaalihiisuna ka sarreeyey ka Afrika, dhaqan ka duwan ka Afrikana la yimid.

Ururradaasi sida la rumeysan yahay waxay ka unkameen meelaha dadku ku kulmo sida kiniisadaha, dugsiyada, makhaayadaha iyo sinimayaasha. Isku imaatinka dadku wuxuu suura geliyey in ay samaysmaan ururro siyaasi aan ahayn, sida kuwa shaqaalaha, cayaaraha iyo wixii la mid ah. Hase yeeshee ururradaasi ugu dambeyntii waxay isu rogeen ururro siyaasadeed, kuwaasoo u meel mariyey dadka reer Afrika in ay ku soo nooleeyaan danahoodii awal ay ku maamuli jireen qoloqolo.

Waxa kale oy ururradaasi ku soo kordhiyeen dadka reer Afrika waayo-aragnimo hor leh oo xagga is xukunka ah, iyada oy hoggaamiyayaal habka cusub wata ay sameysmeen. Arrinta kale ay ururradaasi curiyeen waxay ahayd inay ahaayeen xudunta dhaqdhaqaaqa laga bilaabo, dadkuna ka dhiidhiyo, taas oo u suura gelisay in ay gobannimadooda ku gaaraan.

Waxa caawiyey halgannadooda saddex qodob oo u waaweynaa. Ta u horreysa waxay ahayd in waqtigii Afrika gumeystuhu qabsaday dhoweyd marka adduunyada kale loo eego, taasoo gumeysigoodii noqday mid aan qoto dheer lahayn, markiibana xididdada loo saaray. Ta labaad Afrika 1950kii dadka ku noolaa waxa lagu qiyaasay 200 oo milyan, gumeystaha rigliga u joogayna wuxuu ahaa 5 milyan. Marka waxaynu garan karnaa in awood iyo tiro badnaanba dadka reer Afrika ka lahaayeen. ta saddexaa inta gumeystaha Afrika ka joogtay waxay u badanaayeen Afrika labadeeda cirif, gaar ahaan Aljeeriya iyo Afrikada koonfureed. Taasu waxay fursad siisay Afrikada inteedii kale si ay u abaabulaan ururrada, danahoodana isugu geeyaan.

Haddaba markuu dareenka Afrika xoog yeeshay, siiba dagaalkii labaad, waxaynu ognahay in meelihii gumeystuhu ku yaraa uu awood u waayey uu isku hortaago, gobannimadoodiina degdeg ay ku heleen. Meelihii uu ku badnaana, sida Aljeeriya oo kale, waxa ka dhacay dagaallo qaraar markuu gumeystuhu isku deyey inuu sii haysto, inkastoo ay u suura geli weyday. Gobolladay gumeystayaashu tiro ahaan gaarayeen ilaa shan dalool, sida Afrikada koonfureed, wey diideen in xukunka ay u dhiibaan, ama ay la qaybsadaan dadka reer Afrika. Arrintaas waxay la kaashanayeen, garabna kaga helayeen, dawladihii gumeystaha ahaa.

Taasi waxay ina tusaysaa in dadka reer Afrika dagaal u soo galeen kuna dhacsadeen xoog iyo tamar gobannimadooda. Taasuna waxay ka dambeysay dagaalkii labaad ee adduunyada markaas oo uu taabba galay gobannimadoonkii Afrika.

## TALLABOOYINKII GOBANNIMADOONKA AFRIKA

Dagaalkii labaad ee adduunyada laba siyood buu u saameeyey dhaqdhaqaaqii waddaniyadda Afrika. Midi waa dhaqaaqii oo dagaalku markuu dhammaaday intii hore ka ballaartay. Ta labaadna waa dhaqdhaqaaqii oo xoog weynaaday markii tiradii dadka ee hore uga qayb qaadan jirey ay badatay ilaa intii gobannimo buuxda ay ka gaareen.

## RAADKII DAGAALKII LABAAD UU KU LAHAA WADDANIYADDA AFRIKA

### WARQADDII ATLAANTIGA :

Gaashaanbuurta Yurubta galbeed waxay ka faafiyeen Jarmalka iyo intii la socotay dacaayad oranaysa in xooggooda bani'aadanka la itaasho si loo naco laguna kaco. Dadweynaha adduunkuna dhinacooda uga soo jeestaan. Haddaynu soo qaadanno qodobka saddexaad ee warqadda la yiraahdo «Warqadda Atlaantiga» waxay gaashaanbuurtu Allies ku sheegeen in ay xushmaynayaan danaha bani'aadanka oo dhan, una oggolaanayaan in ay doortaan dawladdooda, iskuna xukumayaan sidii raalli gelisa. In kasta oy maskaxda markaa ku hayeen reer Yurub oo qura lagama maarmaan waxa noqotay in ay arrintaasi adduunyada inteedii kalena saamaysay. Ballanqaadkaana hoggaamiyeyaashii halgannada gobannimadoonka Afrika wey riyaaqeen waayo waxay ahaayeen niman aan addunyada ka xirxirnayn ee og wixii ka socda. Isla markaa waxay rumeysnaayeen marka dagaalku dhammaado in ay weydiisan karaan, lana siinayo isxukun iyo gobannimo. Dawlado badanina sida Ruushka way taageereen ra'yigaa, waayo waxba kamay xukumi jirin Afrika. Gumeystayaasha naftooduna waxay arkeen in aanay is-hortaagi karayn, ha noqoto iyagoo itaal darreeyey ama taageeraba ka rabay dadka reer Afrika si dagaalka ay u adkaadaan.

### DHAQAALE BALLAARATAY IYO WAAYO-ARAGNIMO CUSUB

Raadka dagaalkii labaad uu ku yeeshay Afrika waxa kale oo ka mid ah dhaqaale ballaaratay. Gaashaanbuurtii dhulkii bariga fog ay xukumayeen waa laga qaaday 1941.

Ilaa waqtigaa ka dib si dhab ah ayey uga tirsanaayeen qaaradda Afrika. Waxaana ugu sii weynaa alaabta ceyriin oy uga baahan yihiin warshadahooda, taasoo markaa meel kale aanay ka heli karin. Waxay dhalisay alaabtii la dirayey iyo tii la soo dejinayey oo bata, dhaqaalihii oo kordha, hantidii dadka iyo awooddiisii wax gadashada oo kor u kacday, iyo magaalooyin cusub oo samaysmay.

Waxa kale oo kordhay tiradii dadka iyo carruurtii dugsiyada tegi jirtey, taasoo keentay in heerkii aqoontu sare u qaadnay, lana helay indheer garato u jilib dhigta xukunka shisheeyaha kana dhaadhicisa dadka xumaanta gumeystuhu leeyahay. Indheer garatada waxa weheliyey shaqaale iyo askar badan, oo ka dagaallamayey ama ka shaqaynayey Afrika dibeddeeda,, in ay soo laabteen iyaga oo xambaarsan ra'yi iyo fikrado iyo sheekooyin cusub; tusayana in dadka reer Yurub dadka reer Afrika ayan waxba dheereyn ee ay sidooda ka samaysan yihiin jir, lafo iyo dhiig. Inay leeyihiin dad cuntada kariya, dad dhulka xaara, iyo dad masaakiin ah oo wax baryaaya.

Barashada dadka Afriki barteen reer Yurub waxay hoos u dhigtay yareyseyna xishmaddii iyo baqdintii dadka caddaanka ah ka fili jireen dadka reer Afrika. Isla markaa waxay ka hortimid fikradday dhisayeen ee ahayd in ninka caddi ka sarreeyo ninka madow.

### JIMCIYADO SAMEYSMAY

Waddaninnimadii oy hoggaaminayeen indheer garato dad u badani, inkastoo halgankoodu u xoog badnaa magaalooyinka haddana may ilaabin miyiga, taasoo ay ku fidiyeen, heleenna kalsoonidii reer miyiga.

Xagga magaalada qudheeda waxa caawiyey Jimciyado kale oo sameysmay intii dagaalku socday. Shaqaalaha qudhoodu waxay sameysteen ururro, sababta oo ah qiimaha nolosha oo sare u kacday awgeed. Waxay doonayeenna inay ururro danwadag ah sameystaan, si ay ugu dacwoodaan isku duubni mushaharada oo loo kordhiyo, isla markaa aan mid mid loogu haldhab-laysan,ama loogu ugaarsan, oo markaas culays ay u dulsaaraan gumeystaha.

Jimciyadaha waxa kale oo sii caawiyey warsideyaal farriimaha siyaasiga ah laysku gaarsiiyo. Warsidayaasha waxa kale oo dheeraa waddooyinka, gaadiidkii iyo qalabka warisgaarsiinta ee gumeystuhu isugu tala galay oo ay ka faa'iideysteen, una sahlay kala war haynta ama ololayaasha siyaasaddaba.


**HORSEED GOBANNIMO**


Gobannimada Afrika waxa u horseeday waddanka la oran jirey Xeebta Dahabka una beddelay magaciisii Gaana. Sannadkii 1948kii ayaa waxa dhacday iyadoo guud ahaan hantidii beeraleydu aad u kordhay, in haddana alaabta la iibsan karayey ay yareyd, qaalina ahayd. Sidaa darteed, beeraleydii waxay fahamtay in gumeystuhu alaabtiisa uu qaaliyeeyey si uu macaash badan u helo. Taasna dadkii reer Gaana wey ka gilgisheen, si dhaqso lehna waxa looga abaabulay bannanbaxyo magaalooyinka, isla markiina waxay ku fidday miyiga.

Dhaqdhaqaaqyada waxa si fiican ugu soo baxay «KUMAME NKRUMA». Kuwame Nkruma wuxuu wax ku soo bartay Jaamacadaha Mareykanka iyo Ingiriiska, halkaas oo mabda'a Hantiwadaagga xiisa gaar ah isaga oo u haya awgeed ugu bartay. Waxa kale oo Nkruma arliyada kula kulmay madax ka mid ah madaxda gobannimadoonka Afrika sida Jomo Kenyaata oo kale. Halgankii Nkruma si deg-deg ah ayuu isla markiiba u hadheeyey halgankii kale sababta oo ah wuxuu gumeystaha ka doonayey gobannimo deg-deg ah wuxuuna sameeyey xisbi la yiraahdo «Xisbiga Dadweynaha» saanadku markuu ahaa 1948kii, kaasoo ku dhisnaa dadweynaha. Mar doorasho guud laga sameeyey 1951kii xisbigaasi wuxuu helay tiradii u badneyd. Nkruma jeelkuu ku jiray doorashadaasi markay dhacaysay, hase yeeshee badhasaabkii Ingiriiska halkaa u fadhiyey Nkruma wuu sii daayey markuu arkay arrimuhu halkay marayaan. Isaga iyo raggii la midka ahaana jagooyin sare ayaa laga siiyey Taliskii. Sannado ka dibna golihii wasaaradda ee Gaana lahayd dad madow ayuu wada noqday marka laga reebo gaashaandhigga iyo amuuraha dibedda. Is-xukunka markay muddo ku soo jireen ayey u gudbeen qarannimo buuxda 1957.

Gobannimada Gaana marka laga bilaabo Afrika inteedii kalena si isdaba-joog ah ayey u qaatenn gobannimadoodii. Waxa ku xigay dhanka galbeedka Afrika, Nijeeriya oo qaadatay 1960kii, Siiraliyoon oo qaadatay 1961kii iyo Gaambiya oo qaadatay 1963kii.

Sidii uu shisheeyuhu u xukumi jirey Afrika (1957)






☐ dawladaha xorta ah.

■ Kuwa gacanta gumeysiga ku jira.

Faransiiska dhulka galbeedka Afrika xukumayeyna waxay ku daydeen dalalka Ingiriisku xukumayey. 1956kii Faransiisku waxay soo saareen qaynuun kaasoo u ogoolaanayey in Hay'ado wakiillo doorta la sameeyo. Sharcigaasu wuxuu sameeyey laba iyo tobanka waddan ee ay xukumayeen iyo dhulbadeedka Madagskar. Laba sannadood ka dib markuu Degulle qabsaday dawladdii Faransiiska waxa loo oggolaaday waddammada Afrika ee Saxaara koonfur ka xiga iyo in ay kala doortaan gobannimo buuxda iyo iyagoo waaxyo madax banaan noqda, kana tirsan dawladda Faransiiska. Dawladda Gini oo qura, oo uu Axmed Sekou Tuure ayaa gobannimo dooratay intooda kale gobollo madax bannaan bey noqdeen.

Muddo dabadeed arrintii way isbeddeshay. 1959kii sinigaal iyo Soodaanta Faransiiska (French Sudan) gobannimo ayey dooneen, waxayna sameeyeen isutagga Maali. Taas markii la oggolaaday afar waddan oo kale ayaa weydiistay gobannimo, Nayjar, Dahomey iyo Foolta Sare iyaga oo ka baxsan beesha Faransiiska, ayey heleen.

1960kii dhaammadkiisiina Afrikada Dhexe iyo ta Galbeed ee Faransiisku xukumayey waxay wada heleen gobannimadoodii. Koongo oo Beljimku xukumayey markeynu eegno dagaal qaraar ayey soo martay, waxaana ugu wacnaa siyaasadda gumeystuhu ku xukumayey oo ahayd in aan dadka loo oggolaan tababar siyaasadeed, tacliin sarena la gaarsiin. Inta yar ee wax taqaanna waayo-aragnimo ku filan may lahayn. Dadka reer Koongo waxay u kala qaybsanayeen qabiil qabiil dawladnimada iyo jagooyinka madaxnimada. Taas oo ay ku beereen Beljimku ahaydna waxyaabihii uu ka dhiidhiyaayey ninkii waddaniga ahaa «Patrice Lumumba».

Dhammaadkii 1959kii mar qalaanqal ka kacay magaala madaxda Koongo, ayaa Beljimkii iyaga oo u baqanaya xoolihiisa ay u oggolaadeen doorasho madax-bannaan iyo gobannimo deg-deg ah. «Patrice Lumumba» ayaa noqday hoggamiyihii dawladdii u horraysay. Qas iyo qayb qayb ayaa markiiba ka dhacay, waxaana ugu qas badnaa gobollada macdantu ku badan tahay ee «Kataanga» oo gumeystuhu doonayey inay ka go'do waddanka intiisa kale si ay xoolaha barwaaqada ugu ilaashadaan. Qaskii markuu batay waddankiina ku baahay ayuu Ururka Ummadaha Midoobay soo dhex galay. halkaasna keenay ciidammo ka tirsan. Xoghayihii Guud ee Ururkana, Dag Hamerskjold ayaa ku dhintay mar dayuuradii kula dhacday Koongo.

Dhanka bariga haddaynu eegno, halganka gobannimadoonku wuu ku badnaa. Kiinya is afgarasha-waaga dadka cadi iyo madowgu aad buu u weynaa, waayo caddaanku wuxuu degganaa dhulkii beeraha ku fiicnaa, barwaaqaduna u badnayd. Taas ayaana kicisay halgankii Maw-Maw ahaa, sameysayna urur qarsoon oo argagixiso, oy Kikuyadu u badan tahay. Dadka reer Kikuyo aan ka soo qayb gelin dagaalkana waa la dili jirey. kacaankaasi intii lagu dilay waxay gaarayeen ugu yaraan 7,000, waxaana lagu xiray 83,000 qof oo Maw-Maw ah., Kacaankaasi Ingiriiska wuxuu ku khasbay in uu aqoonsado xooggii Maw-Mawga, khasabna waxa ku noqotay inuu xabsiga ka soo daayo madaxdii Maw-Maw, Jomo Kenyaata. Kenyaata sidii Nkruma ayaa xisbigiisii helay tiradii ugu badneyd ee doorashada.

1963kii wuxuu noqday Guddoomiyihii Wasaaradda, isla markaana gobannimadoodii ayey qaateen, taasoo ay u yaqaaneen «Uhuru». Ugaandha oo iyada dad caddaana loo oggolaa in ay dhul ka degaan, gobannimadoodii waxay qaateen 1962kii.

Tanganiika oo ahayd dhul uu xukumi jirey Jarmalku dagaalkii kowaad, noqotayna dhiibaal Ingiriis. waxay qaadatay gobannimada 1962kii.

Isutagga Afrikada Dhexe oo ka koobnayd Nyaasaland. Roodiishiyada Waqooyi iyo ta Koonfureed waxa la aasaasay 1953kii, in kastoo siyaasadda lagu aasaasay ahayd siyaasadda ah is-bahaysi, haddana isutaggaasu wuu kala jabay, waxaana ugu wacnaa gumeysiga siyaasadeed iyo dhaqaale oo ka yimid caddaanka tirada yar oo ku badnaa Koonfur Roodiishiya. Xagga waqooyiga Roodiishiya iyo Nayasalaand (Malaawi) waxaa loo oggolaaday is xukun 1962kii.

Isutaggii saddexda waddan oo suuroobi waayey wuxuu baaba'ay 1dii jannaayo 1964kii. Isla sannadka dabayaaqadiisiina waqooyigii Rodiishiya oo la baxday Saambiya ayaa gobannimadeedii qaadatay iyo Nayaasaland oo la baxday Malaawi.

Boortaqiisku wuxuu isku deyey inuu indhaha Angoola iyo Mosambiik ka qariyo, dhegahoodana ka daboolo halganka Afrika ka socda asagoo isla markaana ku dhawaaqaya in ay waddammadaasu yihiin gobollo ka mid ah Boortuqaal. Boortaqiiska, sidaa gacan waxa ku siiyey Afrikada Koonfureed. oo doonaysa in ay Angoola iyo Mosambiik uga noqdaan gaashaan waddaninnimada Afrika ee fideysey. hase yeeshee, Angoola waxa ka dhacay gadood 1961kii. Dadka gadoodkaa sameeyeyna in kasta oo aanay lahayn xeel milateri oo dheer, waxay qabsadeen qayb ka mid ah xagga waqooyiga waddanka. Markuu mar labaad Boortaqiiskii qabsaday qaybtaasna dib ayey u soo dhacsadeen in ka mid ah.

Afrikada Koonfureed iyo Aljeeriya waxa sidaynu soo sheegnay kaga duwanayd dadka cad oo kaga badnaa Afrika inteeda kale, taasoo saldhig u ahayd dagaalladii faraha badnaa ee ka dhacay Aljeeriya 1954-1962 iyo dhaqdhaqaaqyadii qarsoonaa ee ka dhacayey Afrikada koonfureed lixdaneeyadii.

Afrikada koonfureed waxay noqotay «Dominion» is xukunta 1909 kana tirsan Barwaaqo Sooranka Ingiriiska. ka dib dagaalladii «Booriska», 1961na waxay qaadatay dawladnimo caddaanka yari u taliyo, waxaanay ka baxday Barwaaqo Sooranka Ingiriiska. Sababta oo ah siyaasaddeeda midabtakoorka oo ay waraysteen dawladihii Afrika iyo kuwii Aasiya ee ku jirey barwaa sooranka in ay beddesho. Midabtakoorku wuxuu ku dhisnaa laba qodob. Ta hore waxay ahayd in dadka madoobi siyaasadda aanu ka qayb qaadan, iyo in dadka madow loo sameeyo degmooyin u gaar ah si aaney u dhex gelin dadka cad. Dadka madoobi may rabin gooni u sooca, iyo xeryaha loo sameeyey. Waxay rabeen welina rabaan gobannimo buuxda iyo dalkooda hooyo oy xukunkiisa u madaxbannaanaadaan. Ilaa iyo haddana way wadaan halgankaa, Afrikada inteeda kalena gacan bay ku siisaa.

Afrikada waqooyi iyada gobannimadeeda may saameyn dadkii caddaa ee deganaa oo qudhi ee laba qodob oo kale ayaa u weheliyey. Kuwaas oo ahaa in dagaalkii labaad ee Adduunyada ciiddeeda lagu dagallamayey iyo waddaniyaddii. carabta oo soo gaarta. 1940kii ilaa 1943kii intii u dhaxaysay, Ingiriiska Faransiiska iyo Maraykanka ciidammadoodu waxay kula dagallameen Talyaaniga iyo Jarmalka xeebaha waqooyiga iyo waqooyiga bariga Afrika.

Dagaalka markuu dhammaaday, Itoobiya gobannimadeedii way la soo noqotay marka lagu daro Ereteriya. Soomaalidii Talyaaniga xukumi jirey toban sannadood ayey dhiibaal u sii ahaayeen Talyaaniga. Intaa ka dib waxay isku darsadeen Soomaalidii Ingiriisku xukumi-jirey oo gobannimadeedii qaadatay 26kii Juun, 1960kii, bishii Juulaay 1dii 1960kii. Liibiya oo uu xukumayey Talyaanigu Ingiriiskiibaa sii hayey, ilaa Diseembar 14dii 1951kii, markaasoy gobannimadoodii ay qaateen, hoggaamiyana uu u noqday Boqor Idriis Al Senusi. Liibiya ayaa horseed u noqotay Afrikada waqooyi inteeda kale.

Faransiisku dalalkuu xukumi jirey dagaallo waaweyn ayuu la galay, hase yeeshee gobannimadoodii wey ka dhacsadeen. Tuunis waxay qaadatay gobannimadeedii 1956kii. Marookana 1956kii. Faransiisku Aljeeriya ayuu intaa dabadeed dagaalkeeda ku keliyeystay. Aljeeriya gobannimadoonkeedu wuxuu bilaabmay 1954 ka dib markii Faransiiska laga soo saaray Indho-Shiina. Qarannimo jab foolxumo halkaa ka soo gaarta ayuu kula dhacay Aljeeriya. Waxaa kale oo sii dhiiri geliyey caddaanka ku dhashay Aljeeriya oo aan rabin in gobannimada gacanta loo geliyo dadka reer Afrika. Cirib dambeedkii wuxuu noqday, in dagaalkii dheeraado ilaa 1962kii, waqtigaas oy qaateen gobannimadoodii ahaydna ugu dambeyntii imberadooriyad Faransiis ay Afrika ku jirto.

Afrikada guud ahaan sida aynu soo sheegnay ayey ugu halgameen gobannimadoodii. Habkay u raaceen ha noqoto hab siyaasadeed, diineed ama hab kale oo qarsoon waxay isku waafaqsanaayeen nacayb xukun shisheeye iyo ismuujis ay isumuujinayaan in ay is xukumaan, barwaaqadoodana iyagu ay qaataan.

MINISTRY OF EDUCATION, TEXTBOOKPRESS MOGADISHU 10-83 50.000